

**Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam
adeerkiis**

Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy

المطلب بن عبد مناف بن قصي

Aabaha dhalay Al Imaamu Al Shaaficii Allaha raalli ka noqdee

الإمام الشافعي رضي الله عنه

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

**Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam
adeerkiis**

Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy

المطلب بن عبد مناف بن قصي

Aabaha dhalay Al Imaamu Al ShaaficiiAllaha raalli ka noqdee

الإمام الشافعي رضي الله عنه

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

Tusmada Kitaabka

1.Mawduuca	Bogga
2. Tusmada Kitaabka	3
3.Araarta dhigaha kitaabka	4
4. Sarraynta Quraysh\قريش iyo Carabta\العرب	8
5. Kitaabka Al Bayhaqii: Manaaqibu Al Shaaficii\كتاب البيهقي: مناقب الشافعي	19
6. Abtirsiga Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aali Wa Sallam	36
7. Abtirsiga Al Shaaficii\الشافعي	36
8. Cabdu Manaaf bin Qusayy\عبد مناف بن قصي	36
9. Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy\المطلب بن عبد مناف بن قصي	37
10. Caruurta Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy\المطلب بن عبد مناف بن قصي	39
11. Camr bin Cabdu Manaaf, ahna Haashim\عمر بن عبد مناف: هاشم	65
12. Sarraynta afarta nine e ilmo Cabdu Manaaf\عبد مناف	67
13. Labada Safar ee Quraysh\رحلة الشتاء والصيف	69
14. Cabdu Al Mudh-dha-dhalib\المطلب بن عبد المطلب iyo adeerkiis Al Mudh-dhalib	72
15. Cabdu Al Mudh-dhalib\المطلب بن عبد المطلب Makkah Al Mukarramah\مكة المكرمة la keenay	74
16. Dhimashada iyo qabriga Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf\المطلب بن عبد مناف	79
17. Qubuuraha afarta nine e ilmo Cabdu Manaaf\عبد مناف	81
18. Amarka "saxiifada\الصحيفة"	82
19. Al Imaam Al Shaaficii\الشافعي	85
20. Aali Muxammad\آل محمد/Qoyska Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam	139
21. Deequhuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى Ahlu Al Bayti\أهل البيت siiyay	154
22. Taariikh nololeedka dhigaha kitaabkaan	178

Araarta dhigaha kitaabkaan

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الحمد لله رب العالمين، والثناء لله وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون، أما بعد

Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy **المطلب بن عبد مناف** waa Cabdu Al Mudh-dhalib **عبد المطلب** adeerkiis, isagaana soo koriyay isagoo afgoon ah, oo aabihiis Haashim bin Cabdu Manaaf **عبد مناف** **هاشم بن عبد مناف** wuxuu dhintay isagoo caloosha hooyadiis ku jira, ama muluq ah, siday riwaayadaha kala duwan wariyeen. Sababta Cabdu Al Mudh-dhalib **عبد المطلب** loogu bixiyay kitaabkaan Ayaan ku arki doonnaa inshaa'a Allaahu **إن شاء الله**, oo magaca hooyadiis u bixisay wuxuu ahaa Shaybatu Al Xamdi **شيبه الحمد** ama Shaybah **شيبه**.

Al Mudh-dhalib **المطلب** waa tarmay waxaana ka farcamay qabiilka Banii Al Mudh-dhalib **بني المطلب** oo uu ka dhshay Al Imaam Al Shaaficii **الإمام الشافعي**.

Banii Al Mudh-dhalib **بني المطلب** waa ashraaf **أشراف**, waxayna ka mid yihiin Ahlu Al Bayti **أهل البيت**, Qoyska Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Banii Al Mudh-dhalib **بني المطلب** waxay wax ku leeyihiin Khumuska **الخمسة** ghaniimada muslimiinta oo ku xusan Aayadaha soo socda ee Suuratu Al Anfaali **سورة الأنفال**.

Sidoo kale dawladaha batroolka leh iyo gaaska iyo khayraadka dhulka ku jiraba waxay ku leeyihiin sahamkooda.

Quraanka anfaasha **الأنفال** kasoo degay

Anfaal **أنفال** waxaa la yiraahdaa xoolaha gaalada dagaal looga furtay. Ibnu Isxaaq **إبن إسحاق** wuxuu yiri:

"Markuu amarka Badar **بدر** dhammaaday ayuu Ilaahay Cazza wa Jalla **الله عز وجل** kasoo dejiyay Quraan, oo ah Suuratu Al Anfaali **سورة الأنفال** dhammaanteed. Markay nafalka isku khilaafeen sida laga yeeli lahaana waxaa kasoo degatay Aayadda koowaad ee Suuratu Al Anfaali **سورة الأنفال**:

يَسْأَلُونَكَ عَنِ الْأَنْفَالِ قُلِ الْأَنْفَالُ لِلَّهِ وَالرَّسُولِ فَأَتَقُوا اللَّهَ وَأَصْلِحُوا ذَاتَ بَيْنِكُمْ وَأَطِيعُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ (1)

"Yas'aluunaka cani al anfaali quli al anfaalu Lillaahi wa Al Rrasuuli fa ittaqu Allaaha wa aslixuu thaata baynikum wa adhiicuu Allaaha wa Rasuulaha in kuntum mu'miniina(1)."

Aayadda macnehedu waxaa weeye:

"Waxay kaa wareysanayaan xagga anfaasha\الأنفال. Waxaad ku tiraahdaa:

"Anfaasha\الأنفال waxaa iska leh Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Marka Ilaahay ka dhawrsada, xiriirka dhexdiinna ahna suubiya, Ilaahayna adeeca iyo Rasuulkiisa haddaad mu'miniin tihiin(1)."

Ibnu Isxaaq\إسحاق ابن wuxuu yiri:

"Sida isoo gaartay Cubaadah bin Al Ssaamit\عبادة بن الصامت marka laga wareysto Suuratu Al Anfaali\سورة الأنفال wuxuu yiri:

"Annaga, ragga Badar\بدر, ayay nagu soo degatay, markaan Maalinta Badar\يوم بدر nafalka isku khilaafnay. Markaasuu Ilaahay gacneheenna ka bixiyey markay akhlaaqdeennu xumaatay, wuxuuna u celiyay Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo si siman noogu qaybiyay. Waxaana taas ku sugnaa taqwada Ilaahay iyo adeeciddiisa iyo adeecidda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo suubin dhexdeenna lagu suubinayo waxaan isku khilaafnay."

Iyo:

وَأَعْلَمُوا أَنَّمَا غَنِمْتُمْ مِنْ شَيْءٍ فَإِنَّ لِلَّهِ خُمُسَهُ وَلِلرَّسُولِ وَلِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسَاكِينِ وَأَبْنِ السَّبِيلِ إِنْ كُنْتُمْ
أَمْنْتُمْ بِاللَّهِ وَمَا أُنزِلْنَا عَلَىٰ عَبْدِنَا يَوْمَ الْفُرْقَانِ يَوْمَ التَّقَىٰ الْجَمْعَانَ وَاللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ (41)

"Waxaad ogaataan in waxaad ka ghaniimaysataan gaalada oo aad ka furataan inuu Ilaahay ka leeyahay iyo Rasuulkiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, khumuskiisa, oo ah marka maalkaas shan meelood loo qaybiyo meel ama boqolkiiba labaatan. Khumuskaasna waxaa iska leh (Kow) Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. (Labo) kuwa qaraabada u saaxiibka ah, oo ah qaraabada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahna Banuu Haashim\بنو هاشم iyo Banuu Al Mudh-dhalib\بنو المطلب. Imaam Al Shaaficii\الإمام الشافعي, Allaha raalli ka noqdee, waxbuu ku lahaan jiray, isagoo ah ina adeerka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo ku abtirsada Al Mudh-dhalib bin Cabdi Manaaf\عبد مناف, walaalka la dhashay Haashim bin Cabdu Manaaf\هاشم بن عبد مناف. (Saddex) Agoonta. (Afar) Masaakiinta. (Shan) Kan musaafirka ah oo sahaydu ka go'day. Sidaas u qaybiya haddaad tihiin kuwa rumeeyey Ilaahay iyo Quraankaan kusoo dejinnay Addoonkeenna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maalinta kala baxa, oo Maalinta Badar\بدر waxay ahayd maalin jimce ah oo ay bisha Ramadaan\رمضان toddoba iyo toban habeen ka gudbeen, maalintaasoo xaqa iyo baadhilka la kala saaray oo uu islaamku gacanta sare yeeshay, gaalnimadana le jebiyay oo laga adkaaday. Maalintaasna waa maalintay kulmeen labada kooxood, oo kala ah xizbiga Ilaahay iyo xizbiga shaydaanka. Ilaahayna wax walba wuu karaa, sida inuu adinkoo yar oo taag daran libta idin siiyo(41).

Riyadayda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo Al Imaamu Al Shaaficii\الإمام الشافعي

Maalintay taariikhdu ahayd sagaal iyo tobanka bisha Shawwaal\شوال ee sanadka kun iyo afar boqol iyo sagaal iyo toban Hijriga, una dhiganta lixda bisha fabraayo ee kun iyo sagaal boqol iyo sagaal iyo sagaashanka miilaadiga waxaan bilaabay inaan Siirada Nabi Muxammad, Sallaa

Allaahu Calayhi Wasallam, cajalado ku akhriyo, kaddib markaan siirada Ibnu Hishaam\ابن هشام\ asaaska u yahay, afka soomaliga ku tarjumay, waxaanna akhrintiisa dhammeeyey qiyaas labo sano kaddib maalin axad ah taariikhduna ay tahay labataanka bisha Jamaadu Al Uulaa\جماد الأولى\ ee sanadka kun iyo afar boqol iyo kow iyo labaatanka Hijriga ah, una dhiganta labaatnka agoosto ee sanadka laba kun ee miilaadiga ah.

Galabta sabbtida ah iyo maalinta axadda oo aan la shaqayn ayaan toddobaad walba waxaan ku akhrin jiray laba cajaladood. Mahaddana Eebbe ayaa leh. Markaan gaaray akhrinta Bicthada\البعثة\ iyo axkaamta la xiriirta ayuu Ilaahay Tacaala iigu nicmeeyey inaan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, riyo ku arko. Riyadaasna waxay ahayd sidatan.

Waxaan ku jiraa qol wayn oo u eg fasallada ardayda wax loogu dhigo, aanna taaganahay labada darbi ee qolka ee kala fog kooda shisheeya meel u dhow.

Dhinaca kalena waxaa yaalla miis kor saaran alwaax balaaran oo dhulka ka xiga, sida miisaska ay macallimiintu fasalka dhexdiisa ku fariistaan, oo xoogaa dhulka ka kacsan si ay ardayda fasalka ku jirta u wada arkaan, oo ay ishoodu u wada qabato.

Miiskaas dhiniciisa shisheeya oo aniga iga fog waxaa laba kursi ku kala fadhiya laba nin. Waxaa la ii sheegay inuu ninka midigtayda ku beeganu uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yahay, kan isaga midigtiisa fadhiana uu imaam Al Shaaficii\الشافعي\ yahay. Markaasaan waxaan iri:

"Sideebuu imaam Al Shaaficii\الشافعي\ u ahaan karaa isagoo boqol iyo konto sano qiyaas Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka dambeeyey?"

Markaasaan waxaan dareemay inay riyo tahay oo ay taasi ku suurtoowdo.

Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, koofi iyo cimaamad midna ma xirna, timaha madixiisuna waxay la siman yihiin garbihiisa. Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu xagga imaam Al Shaaficii\الشافعي\ dhugto uuna la hadlayo kaddibna uu kasoo jeesanayo, timihiisu way ruxanayaa ayagoo wada socda. Markaasey intay wada hadalaan, hadana aniga isoo dhuganayaa, oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, farta igu soo fiiqayaa.

Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, marna wuxuu fiirinayaa imaam Al Shaaficii\الشافعي\ oo uu la hadlayaa, kaddibna anigu isoo dhuganayaa isagoo fartana igu soo fiiqaya madaxana ruxaya. Markaan subixii hurdada kasoo kacay waxaan riyadaas u fasirtay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, i amrayo inaan axkaamta Siirada igu soo mari doonta sharxo aanna math-habka imaam Al Shaaficii\الشافعي\ ku fasiro.

Sidaas ayaanna yeelay ilaa aan akhrinta Siirada ka dhammeeyey. Wa al xamdu li Allaahi Rabi al caalamiina wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaana Muxammadin wa Calaa Aalihi wa Saxbihi ajmacina wa Sallama Tasliiman Kathiiran.

Warka riyadaanna waxaan kasoo qaatay kitaabkayga siirada ee “Nuurka Quluubta Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam juzka saddexaad bogga shan boqol shan iyo toddobaatan.

Imaam Al Shaaficii\الإمام الشافعي\ wa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ina adeerkiis, iasgoo ah ubadka Al Mudhalib bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab\المطلب بن عبد

\كلاب\ مناف بن قصي بن كلاب, walaalka la dhashay Haashim bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab\هاشم بن عبد مناف بن قصي بن كلاب\ أهل البيت, wuxuuna ka mid yahay Ehelu Baytka\الخمس\ ghaniimada. waxaana wax laga siin jiray Khumuska\

Wixii qalad ah oo kujira wuxuu ka yimid aniga iyo shaydaan, inta suubanna waa nicmo Ilaahay iggu galladaystay. Waxaanna Ilaahay ka baryayaa inuu ajarka kitaabkaan siiyo aniga iyo labada i dhashay, iyo Bani Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy \بني عبد المطلب بن عبد مناف بن قصي\, uuna ka mid yahay imaamkeenna Al Imaam Muxammad bin Idriis Al Shaaficii \الإمام محمد بن إدريس الشافعي\ Allaha raalli ka noqdee.

Waxaa allifay midka naxariista iyo dambii dhaafka Ilaahay faqiirka u ah
Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM
Watetown, South Dakota, USA

Maalin Axad ah ee afarta bisha Rabiicu Al Awwal\ربيع الأول\ kun afar boqol shan iyo soddon Hijriga, una dhiganta shanta Janaayo laba kun afar iyo toban Miilaadiga.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الحمد لله رب العالمين، والشئاء لله وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون

فضل قريش و العرب\Fadliga/Sarreynta Quraysh iyo Carabta

Al Imaamu al xaafith Fatxu al Diini abuu Al Fatx Muxammad bin Sayyidu Al Nnaasi al Shaafici, ابن سيد الإمام الحافظ فتح الدين أبو الفتح محمد بن سيد الناس الشافعي الناس, noolaana inta u dhexeysey lix boqol iyo kow iyo todobaatan ilaa toddoba boqol iyo afar iyo soddon ee Hijrada ayaa wuxuu Xadiithkaan ku wariyay kitaabkiisa Cuyuunu al Athari fii funuuni al maghaazii wa al shamaa'ili wa al siyari/الشمائل والسير/المغازي, عيون الأثر في فنون المغازي والشمائل والسير, mujalladka koowaad bogga toddoba iyo labaatan.

Waxaa kaloo wariyay kitaabka Kanzu al Cummaali/كنز العمال (11/32119, 32120, 32121).

Al Sayuudhii/السيوطي wuxuu kitaabkiisa Al Jaamicu Al Saghiir/الجامع الصغير, Xadiithkiisa laba boqol iyo shan iyo labaatan ku wariyay inuu Nabi Mixammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أحبوا العرب ثلاث لاني عربي والقرآن عربي وكلام اهل الجنة عربي."

"Axibbuu Al Caraba li thalaathin: (1) li annii Carabiyyun, (2) Wa Al Quraanu Carabiyyun, (3) wa kalaamu ahli Al Jaannati Carabiyyun."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Carabta u jeclaada saddex sababood daraadood: (kow) Tan koowaade anigu waxaan ahay nin Carab ah, (labo) waa tan labaade Quraanku waa af Carabi, (saddex) Waa tan saddexaade afka ay dadka Jannada ku jira ku hadlaan waa af Carabi."

Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Al Bayhaqii/البيهقي, kuna wariyay kitaabkiisa Shucbu Al limaani/شعب الإيمان/إبن عباس/Cabbaas/إبن عباس, Allaha raalli ka wada noqdee, yirina waa Xadiith saxiix ah.

Waxaa kaloo wariyay Al Xaakim/الحاكم oo ku wariyay kitaabkiisa Al Mustadrik/المستدرک, yirina waa saxiix.

Waxaa sidoo kale wariyay Al Dhabraanii/الطبراني, kuna wariyay kitaabkiisa Al Kabiiru/الكبير, yirina waa Xadiith saxiix ah.

Al Dhabraanii/الطبراني wuxuu ka wariyay Cabdu Allaahi ibnu Cumar bin Al Khadh-dhaab/عبد الله بن عمر بن الخطاب, Allaha raalli ka wada noqdee, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن الله إختار خلقه فأختار منهم بنى آدم ثم إختار من بنى آدم العرب ثم إختارني من العرب فلم أزل خياراً من خيار. الأمان احب العرب فبحبي أحبهم ومن أبغضى العرب فببغضي أبغضهم."

Inna Allaaha ikhtaara khalqahu fa ikhtaara minhum Bani Aadama. Thumma ikhtaara min Bani Aadama Al Caraba, thumma ikhtaaranii mina Al Carabi, fa lam azal khiyaaran min khiyaarin. Alaa man axabba Al Caraba fa bi xubbii axabbahum, wa man abghada Al Caraba fa bi bughdii abghadahum. "

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu kala doortay khalqigiisa kuwa ugu sharaf badan, markaasuu wuxuu ka doortay Bani Aadanka. Kaddib wuxuu Bani Aadanka ka doortay oo ugu sharaf iyo khayr badan Carabta. Kaddibna anigu Carabta iga dhex doortay oo ugu sharaf badan uguna khayr badan, oo sidaasaan waxaan ku ahay kan ugu sharaf badan oo kuwa ugu sharaf badan ka dhashay. War hooy ogaada: qofka Carab jecel wuxuu u jecel yahay jeceylka uu aniga i jeceyl yahay daraadiis, midka Carabta necebna wuxuu u neceb yahay nacaybka uu aniga. i neceb yahay daraadiis."

Riwaayad kalena waxay warisay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Waallam yiri:

" ثم إختار بنى آدم فأختار منهم العرب."

"Thumma ikhtaara Bani Aadama, fa ikhtaara minhum Al Caraba",

oo macneheedu yahay:

"Kaddib wuxuu doortay Bani Aadanka, markaasuu ayagana Carabta ka dhex doortay."

Al Tarmathii-na/الترمذي wuxuu ka wariyay Salmaan Al Faarisii/سلمان الفارسي inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

" يا سلمان لا تبغضني فتفارق دينك."

"Yaa Salmaan laa tabghadnii fa tufaariqa diinaka",

oo macneheedu yahay:

"Salmaanow سلمان ha i nicin, maxaa yeelay haddad i nacidid Diinta ayaad ka baxaysaa".

Markaasaan waxaan iri:

"Rasuulka Ilaahayow, sideebaan kuu nacayaa ayadooba uu Ilaahay adigu igu kaa hanuuniyay?"
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"تبغض العرب فتبغضني."

"Tabgadhu Al Caraba fa tabghadunii",

oo macneheedu yahay:

"Waxaad nacaysaa Carabta, markaasaad anigana i nacaysaa."

Salmaa Al Faarisi/سلمان الفارسي, Allaha raalli ka noqdee, siduu magaciisuba u sheegayo wuxuu u dhashay dalka Iiraan/إيران, oo Carab ma uusan ahayn.

Al Dhabraanii/الطبراني wuxuu calii ka wariyay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"لايبغض العرب إلا منافق."

"La yabghadu Al Caraba illaa munaafiqun",

oo macneheedu yahay:

"Carabta ma uusan necba munaafaq mooyee".

قريش\عبد الله ابن عباس\Xadiithka Ibnu Cabbaas

Wuxuu Muxammad. bin Cumar Al Cadanii/محمد بن عمر العدني, oo ah Sheekha Imaam Muslim/مسلم, Musnadkiisa/في مسنده Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas/عبد الله ابن عباس uga wariyay inuu yiri:

"أن قريشا كانت نورا بين يدي الله قبل أن يخلق آدم بألفي عام، يسبح ذلك النور وتسبح الملائكة بتسبيحه."

Oo macnihiisu yahay:

"inay Quraysh\قريش, oo ah midda lagu liibaaniyay Islaamka ay ahayd nuur ku sugan labada Gacnood ee Ilaahay dhexdooda ka hor intaan la abuurin Aadan laba kun oo sano, ayadoo uu nuurkaasi Subxaanalleysanayo, Malaa'igtuna ay tasbiixdiisa ayaguna markaas ku tasbiixsaneyso (oo ah inay markay Qurayshi tiraahdo Subxaana Allaahi/سبحان الله ayay Malaa'igtuna Subxaana Allaahi/سبحان الله ka daba leedahay)".

Ibnu Al Qadh-dhaan/ابن قطان wuxuu yiri:

"Xadiithkaan iyo Xadiithka Calii/علي, oo, hadda nasoo maray, waxaa loo mideynayaa ayadoo uu nuurka Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jirmi loo yeelay laba iyo toban kun oo sano abuuritaanka Aadan\آدم ka hor, kaddibna Quraysh\قريش inteeda kale lagu daray, tasbiixdana lagu dhawaajiyay, oo ay tasbiixsadeen."

Sarraynta Quraysh

Al Waaqidii\الواقدي wuxuu yiri:

وَجَعَلَ أَبُو قَتَادَةَ يُرِيدُ أَنْ يَنْتَالَ مِنْ قُرَيْشٍ، لِمَا رَأَى مِنْ غَمِّ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فِي قَتْلِ حَمْزَةَ وَمَا مُثِّلَ بِهِ كُلَّ ذَلِكَ يُشِيرُ إِلَيْهِ النَّبِيُّ ﷺ أَنْ اجْلِسْ ثَلَاثًا - وَكَانَ قَائِمًا - فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ: «أَحْسَبُكَ عِنْدَ اللَّهِ»، ثُمَّ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ:

«يَا أَبَا قَتَادَةَ، إِنْ قُرَيْشًا أَهْلُ أَمَانَةٍ مِنْ بَعَاهُمْ الْعَوَائِرَ كَبَهُ اللَّهُ لِفِيهِ وَعَسَى أَنْ طَالَتْ بِكَ مُدَّةٌ أَنْ تَحْقِرَ عَمَلَكَ مَعَ أَعْمَالِهِمْ، وَفَعَالِكَ مَعَ فَعَالِهِمْ، لَوْلَا أَنْ تَبَطَّرَ قُرَيْشٌ لِأَخْبَرْتَهَا بِمَا لَهَا عِنْدَ اللَّهِ».

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Duullanka Uxud\غزوة أحد markuu Saxaabiga Abuu Qataadah Al Ansaarii\الأنصاري arkay kurbaday Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam gelisay dilidda adeerkiis Xamzah\حمزة iyo siday jirkiisa cadad looga gooyey si loo foolxumeeyo ayuu Quraysh\قريش wax ka sheegay. Intaasoo idilna Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu Abuu Qataadah أبو قتادة u tilmaamayaa inuu fariisto oo uu saddex goor ku yiri: “fariiso” isagoo uu Abuu Qataadah أبو قتادة markaas taaganyahay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu Xamzah\حمزة ku yiri:

“Ilaahay ayaan ka rajeynayaa inuu i siiyo ajarka dhibaataada iga soo gaartay waxa lagu falay.”

Kaddibna wuxuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri: “Abaa Qataadow\أبا قتادة! Qurayshi\قريش waa dad amaano leh oo ehel u ah oo la aaminay, qofka god khayaano u qodana oo doona inuu sida libaaxa loo dabo oo loo ugaarsado u ugaarsadana Ilaahay intuu waji waji u tuuro ayuu afka ciidda u geliyaa oo dulleeyaa. Waxaadna arki doontaa hadduu cumrigaado dheeraado inaad camalkaaga (waana salaadda, zakada, soonka, xajka iyo camalka suuban oo dhan oo aad suubisid) saluugtid oo uu kula yiraado markaad ayaga camalkooda barbar dhigtid oo ku qiyaastid, falalkaagana aad yastid markaad falalkooda barbar dhigtid. Haddaanan ka baqayn inay Qurayshi\قريش kibirto waxaan u sheegi lahaa waynaanta waxa wanaag ah oo Ilaahay agtiisa u yaalla.” (waxaan kasoo qaadannay kitaabka Siirada Al Waaqidii Mujalladka Koowaad bogga laba boqol iyo kow: duullaanka Uxud\غزوة أحد).

Ibnu Al Athiir\ابن الأثير wuxuu isaguna Al Nihaayah\النهاية mujalladka sadexaad bogga boqol laba iyo sideetan ku wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

“إن قريشا أهل أمانة، من بغاها العواثر كبه الله لمنخره.”

“Inna Qurayshan ahlu amaanatan, man baghaahaa al cawaathira kabbahu Allaahu limunkharihi” oo macnihiisu yahay:

“Qurayshi\قريش waa amaano xambaar qofka kusoo xad gudbana oo dulmiya Ilaahay sankuu ciidda u geliyaa oo waa dulleeyaa.”

Al Shariif Axmad Zaynii Daxlaan oo reer Makkah ahaa\السيد أحمد زيني دحلان Allaha u naxariiste, tarjumadiisuna waa na soo martay, wuxuu kitaabkiisa Siirada\السيرة النبوية والآثار المحمدية Umuu Haan’I bintu Abuu Dhaalib bin Cabdu Al Mudh-dhalib\أم هانئ بنت أبي طالب بن عبد المطلب, Allaha dhammaantood raali ka noqdee, ka wariyay inay tiri:

فضل رسول الله صلى الله عليه وسلم قريشا بسبع خصال لم يعطها أحد قبلهم ولا يعطاها أحد بعدهم:

- (1) النبوة فيهم
- (2) والخلافة فيهم
- (3) والحجابه فيهم
- (4) والسقاية فيهم
- (5) ونصروا على أصحاب الفيل
- (6) وعبدوا الله سبع سنين لم يعبده أحد غيرهم: ، في رواية “عشر سنين” قال بعضهم المراد منها السنون التي كانت في أول بعثته صلى الله عليه وسلم فإن أول المؤمنين الذين اتبعوه كانوا من قريش وصبروا معه على كثير من الأذى الحاصل من بقية قريش الذين لن يسلموا واستمر الإسلام يتقوى بمن أسلم منهم حتى فشا وظهر بإسلام الأوس والخزرج و ذلك القدر يبلغ عشر سنين.
- (7) ونزلت فيهم سورة من القرآن لم يذكر فيها أحد غيرهم: لنلاف قريش.

Xadiithka Macnihiisu waxaa weeye:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu Quraysh\قريش u yeelay oo dadka intiisa kale dheereysiiyay oo uga sare mariyay toddoba aan ayaga hortood axad ayaga ka horreeyey la siin, axad ayaga ka dambeeyana aan la siinayn, oo kala ah:

(Kow) Nabinnimadu ayagay ku sugnaatay,

(Laba) Khilaafaduna ayagay ku sugnaatay,

(Saddex) Maamulka Kacbaduna ayagay ku sugnaatay,

(Afar) Waraabinta xujayda biyaha Zamzam\زمزم ayagay ku sugnaatay,

(Shan) Waxaa looga hiilliyay oo looga gargaaray kuwa maroodiga watay ee “Asxaabu Al Fiil\أصحاب الفيل”,

(Lix) Toddoba sano ayay Ilaahay caabudayeen, isagoo uusan axad aan ayaga ahayn caabudayn. Riwaayadna waxay warisay “Toban sano” Culumada qaarkoodna waxay yiraahdeen waa sanooyinka ugu horreeyey Bictadiisa\بعثته Sallaa Allaaahu Calayhi Wa Sallam oo mu’miniinta ugu horreeyey oo raacay waxayu dhasheen Quraysh\قریش ayagoo la jirayna waxay u sabreen dhibka faraha badan oo uga yimid Qurayshta\قریش aan wali islaamin, islaamkuna wuxuu kusii xoogeysanayay kuwooda hadba soo islaama ilaa ay diintu kasoo bannaan baxdo oo ay faafto markay Al Aws\الأوس iyo Al Khazraj\الخيرج islaameen: mudadaasna waxay qaadatay ilaa toban sano.

(Toddoba) Waxaana kasoo degatay Suurad Quraanka ka mid ah oo aan axad aan ayaga ahayn lagu xusin: Suuradda Li Ilaafi Quraysh\قریش لئلاف .

وعن أنس رضي الله عنه:

”حب قریش إيمان وبغضهم كفر.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Jecaylka Quraysh\قریش waa iimaan, nacaybkooduna waa kufrinnimo.”

وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

”الناس تبع لقریش مسلمهم تبع لمسلمهم وكافرهم تبع لكافرهم.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Dadku wuxuu raacsan yahay oo ka dambeeya madaxtinnimada Quraysh\قریش, oo dadka muslinka ahi waxay raacsan yihiin Qurayshta\قریش muslinka ah, dadka gaalada ahna waxy raacsan yihiin Qurayshta\قریش gaalada ah.”

وقال صلى الله عليه وسلم:

”العلم في قریش.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Cilimigu wuxuu ku sugan yahay \قریش dhexdeeda.”

وقال أيضا:

"الأئمة من في قريش."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Imaamnimadu – waana midda dawladda ee madaxweynannimada, boqornimada, iwm. Iyo tan salaadda, jihaadka, iwm. – waxaa iska leh oo ay u sugnaatay Quraysh\قريش.”

وقال أيضا:

"لأتسبوا قريشا فإن عالمها يملأ طباق الأرض علما".

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Quraysh\قريش ha caayina, ayadoo midkooda caalinka ahi adduunkoo idil cilmi ka buuxinayo.”

قال جماعة منهم الإمام أحمد:

“هذا العالم هو الشافعي رضي الله عنه لأنه لم ينتشر في طباق الأرض من علم عالم من قريش من الصحابة وغيرهم ما انتشر من علم الشافعي رضي الله عنه.”

Koox culummada ka mid ah, uuna ka mid yahay Imaam Axmad\أحمد waxay yiraahdeen:

“Caalinkaasu waa Al Shaaficii\الشافعي Allaha raali ka noqdee, maxaa yeelay kuma uusan faafin arliga oo idil cilmi nin caalin ah oo Quraysh\قريش u dhashay oo saxaabada ka mid ah iyo ayaga ghayrkoodba wax aka faafay cilmiga Al Shaaficii\الشافعي Allaha raalli ka noqdee.”

وقال صلى الله عليه وسلم:

"قدموا قريشا ولا تقدموها"، وفي رواية: "ولا تعالوها" إي لا تغالبوها ولا تكاثروها فيه. وفي رواية: **"ولا تعلوها" إي لا تعلوا عليها بمعنى لا تجعلوها في المقام الأدنى الذي هم مقام التعلم والقصد أن لا تحتقر.**

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Quraysh\قريش hormariya, oo ha ka hor marina.”

Riwaayadna waxay warisay:

“Ha iska kor yeelina” oo macneheedu yahay ha ku dadaalina inaad ka kor martaan oo aad ka badisaan, kana adkaatan.

Riwaayad kalena:

“Hoos ha u dhuganina oo iskala kor ahaanina” oo ah ha yasina.

وقال صلى الله عليه وسلم:

"أحبوا قريشا فان من احبهم احبه الله."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Quraysh\قريش jeclaada, maxaa yeelay qofka jeclaada Ilaahay ayaa isagana jeclaada.”

وقال صلى الله عليه وسلم:

"لولا أن تبطر قريش لأخبرتها بالذي لها عند الله تعالى."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Haddaanan ka baqayn inay Quraysh\قريش kibirto waxaan u sheegi lahaa waxa (khayrka ah) oo Ilaahay agtiisa u yaalla.”

وقال صلى الله عليه وسلم يوما:

"أيها الناس إن قريشا أهل أمانة من بغاها العواثر أي من طلب لها المكاييد كبه الله لمنخره أي كبه الله على وجهه." قال ذلك ثلاث مرات.

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Qurayshi\قريش waa amaano xambaar qofka kusoo xad gudbana oo dulmiya oo dabin u qorsheeya Ilaahay sankuu ciidda u geliyaa oo waa dulleeyaa.”

Sidaas ayuu saddex goor yiri.

وقال صلى الله عليه وسلم:

"خيار قريش خيار الناس وشرار قريش خيار شرار الناس"، وفي رواية: "وشرار قريش شرار الناس." والرواية الأولى أصح وأثبت.

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Akhyaarta Quraysh\قريش waa akhyaarta dadka (oo idil), Quraysh\قريش kuwooda xunna waa akhyaarta dadka intiisa xun.”

Riwaayadna waxay warisay:

Quraysh kuwooda xunna ayagaa dadka ugu xun.”

Riwaayada hore ayaana midda dambe ka saxsan kana sugan.

وقال صلى الله عليه وسلم:

"قريش ولاة هذا الأمر فبر الناس تبع لبرهم وفاجرهم تبع لفاجرهم."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Quraysh\قريش ayaa amarkaan hoggaamiye u ah – waana madaxtinnimada ummadda Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam – oo dadka kuwooda fiicani waxay raacsan yihiin ayaga kuwooda fiican, kuwooda xunna ayaga kuwooda xun ayagay raacsan yihiin."

وعن ابن عمر رضي الله عنهما قال: قال لي رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"من أحب العرب فبحبي أحبهم ومن أبغض العرب فببغضي أبغضهم."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Qofka carabta jeclaada aniguu i jecel yahay oo jacaylkayga daraadiis ayuu ayagana u jecel yahay, qofka carabta necebna aniguu i neceb yahay oo nacaybkayga daraadiis ayuu ayagana u neceb yahay."

وروى الترمذي عن سلمان رضي الله عنه قال: "قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"يا سلمان لا تبغضني فتفارق دينك." قلت:

يا رسول الله كيف أبغضك وبك هداني الله؟

قال:

"تبغض العرب فتبغضني."

Al Tirmithii\الترمذي wuxuu wariyay inuu Salmaan\سلمان (Al Faarisii\الفارسي) Allaha raalli ka noqdee yiri:

"Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

"Salmaanow, ha i nicin oo haddaad i nacdiddiintaadaad ka baxaysaa."

Waxaan iri:

"Rasuulka Ilaahayow, side ku nici karaa ayadooba uu Ilaahay adiga igu kaa hanuuniyay?"

Wuxuu yiri:

"Carabta ayaad nacaysaa markaasaad anigana i nacaysaa."

وروى الطبراني عن علي رضي الله عنه قال: "قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"لا يبغض العرب إلا منافق."

Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu wariyay inuu Calii\علي Allaha raalli ka noqdee yiri:

"Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

"Carabta ma nebcaado qof aan munaafaq ahayn."

وروى الترمذي عن عثمان رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال:

"من غش العرب لم يدخل في شفاعتي ولم تنله مودتي."

Al Tirmithii الترمذي wuxuu Cuthmaan عثمان ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri:

"Qofka carab khayaana kama mid ahaanayo kuwaan u shafeeco qaadayo, jacaylkaygana ma helayo."

وقال صلى الله عليه وسلم:

"أحبوا العرب لثلاث: لأني عربي، والقرآن عربي وكلام أهل الجنة عربي."

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri:

"Carabta saddex daraadood u jeclaada:
(Kow) Anigu waxaan ahay carab,
(Laba) Quraankuna waa carabi,
(Saddex) Hadalka dadka jannada ku jirana waa carabi.

وقال صلى الله عليه وسلم:

"إن لواء الحمد بيدي يوم القيامة وأن أقرب الخلق من لوائي يومئذ العرب."

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Salam yiri:

"Calanka xamdigu gacantaydu ku jiraa maalinta qiyaame, khalqigana waxaa calankayga ugu dhow maalintaas carabta."

وقال صلى الله عليه وسلم:

"إذا ذلت العرب ذل الإسلام."

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri:

"Haddii carabta la dulleeyo, islaamkuna waa dulloobayaa."

وعن ابن عباس رضي الله عنهما مرفوعا:

"خير العرب مضر وخير مضر عبد مناف وخير عبد مناف بنو هاشم وخير بني هاشم بنو عبد المطلب والله ما افترق فرقتان منذ خلق الله آدم إلا كنت في خيرهما."

وروى ابن عساكر عن جابر رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم:

"حب أبي بكر وعمر من الإيمان وبغضهما كفر."

Ibnu Casaakir wuxuu Jaabir Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri:

“Jeclaanta Abii Bakar **أبي بكر** iyo Cumar **عمر** iimaanka ayay ka mid tahay, labadooda la nacana waa gaalnimo.”

:و

Iyo:

"حب الأنصار من الإيمان وبغضهم كفر."

“Jeclaanta Ansaartu **الأنصار** waxay ka mid tahay iimaanka, nacaybkooduna waa gaalnimo.”

:و

Iyo:

"حب العرب من الإيمان وبغضهم كفر."

“Jeclaanta carabtu waxay ka mid tahay iimaanka, nacaybkooduna waa gaalnimo.”

:و

Iyo:

"من سب أصحابي فعليه لعنة الله ومن حفظني فيهم فأنا أحفظه يوم القيامة."

“Qofka asxaabtayda caaya waxaa korkiisa ah lacnadda Ilaahay – oo naxariistiisa laga fogaynayo – qofka asxaabtayda dhowrana aniga isaga dhowraya maalinta qiyaame.”

قال بعض شراح الشفا والأحاديث كثيرة في هذا الباب وبالجملة من أحب شيئاً أحب كل شئ يحب، وهذه سيرة السلف فيجب على كل أحد أن يحب أهل بيت النبي صلى الله عليه وسلم وجميع الصجابة من العرب والعجم لاسيما جنسه صلى الله عليه وسلم ولا يكون من الخوارج في بغض أهل البيت فإنه لا ينفعه حينئذ حب أهل البيت ولا من الأروان الذين يكرهون العرب بالطبع الملام ويرمونهم بسوء الكلام فإنه يخشى منه سوء الختام.

“Kuwa sharxay kitaabka Al Shifaa’ **الشفاء** qaarkood waxay yiraahdeen, arrinkaanna waxaa kusoo aroortay Axaadiith fara badan, in guud ahaan qofka wax jeclaada oo jecel yahay wuxuu qofkaas uu jeclaaday jecel yahay oo idil: taas weeyana dhaqanka asxaabtii. Marka waxaa waajib ku ah axad kasta inuu jeclaado Ahlu Al Baytka Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam **أهل بيت** **أهل بيت** صلى الله عليه وسلم iyo dhammaan saxaabada ha ahaadaan carab ama cajam, gaar ahaanna la jeclaado jinsigiisa oo ah kuwuu ka dhashay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, uusanna ka mid

noqon khawaarijta qaba nacaybka Ahlu Al Bayti, oo markaas ma anfacayo inuu jeclaado Ahlu Al Bayti **أهل البيت**, iyo sidoodaba kuwa neceb carabta, oo wax xun ka sheega, waxaana kaas looga baqaa khaatumo xumo.

Al Imaam Al Bayhaqii\الإمام البيهقي wuxuu kitaabkiisa “Manaaqibu Al Shaaficii\مناقب الشافعي
Quraysh\قريش ka yiri

باب

ما جاء في تخصيص قريش بالتقديم والاتباع، والتعلم منهم؛ لكثرة علمهم، ورجحان عقلهم، وقوة رأيهم، وما في بعضه من الإشارة إلى الشافعي، رحمه الله، لزيادة علمه من بين قريش بعد الصحابة، رضي الله عنهم، وانتشاره في مشارق الأرض ومغاربها، وانتفاع المسلمين به.

عن أبي هريرة قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

“الناس تبع لقريش في هذا الشأن، مسلمهم تبع لمسلمهم، وكافرهم تبع لكافرهم.”

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Qodobka ku saabsan oo ay kusoo aroortay in Quraysh\قريش gooni loogu yeelay in ayaga la hormariyo, lana raaco, cilmigana ayaga laga barto, sababtoo ah badnida cilmigooda, iyo waynaanta caqligooda, iyo xoogga aragtidooda. Axaadiithtaasna waxaa qaarkood ku sugan tilmaamid oo ay tilmaamayaan Al Shaaficii\الشافعي Allaha u naxariistee, iyo siduu Quraysh \قريش\ inteeda kale uga cilmi badan yahay asxaabta dabadood, Allaha raalli ka noqdee, iyo siduu cilmigiisu ugu faafay arliga qorrax kasoo bixiisa iyo qorrax u dhiciisa, iyo siday muslimiintu ugu intifaaceen oo uu cilmigaasu wax u taray.

Waxaan ka tegay markaan Al Bayhaqii\البيهقي kasoo guuriyay Axaadiithtaan silsiladda ragga wariyay, aanna diidayay inaan warka dheereeyo.

Abuu Hurayrah\أبو هريرة wuxuu yiri:

"Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

“Arrinkaan, oo ah islaamka iyo imaamnida ummadda, dadku wuxuu raacayaa oo uga dambeeyaa Quraysh\قريش, oo dadka kooda muslimka ah wuxuu raacsan yahay muslimka Quraysh\قريش, kooda gaalka ahna wuxuu raacsan yahay gaalka Quraysh\قريش.”

Ibnu Cumar\عمر ابن wuxuu wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن ابن عمر عن النبي صلى الله عليه وسلم قال:

“لا يزال هذا الأمر في قريش ما بقي من الناس اثنان.”

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

“Amarkaanu wuxuu ku sugnaanayaa oo iska leh Quraysh\قريش intay dadka laba qof ka haraan – oo markaas midkooda Qurayshta\قريش ah ayaa amarkan iska leh weeye –“.

Anas\أنس wuxuu wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن أنس عن النبي صلى الله عليه وسلم قال:

الأئمة من قريش.

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Imaamyada waxaa laga soo dhex saarayaa Quraysh قريش.”

Jaabir bin Cabdu Allaahi\جابر بن عبد الله wuxuu wariyay inuu maqlay Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi W Sallam oo leh:

قال جابر بن عبد الله: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول:

“خيار قريش خيار الناس، وقريش كالمح، وهل يطيب طعام إلا به؟ ولاو أن تطغى قريش لأخبرتها بما لها عند الله، عز وجل.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Akhyaarta Quraysh قريش ayaa akhyaarta dadka ah, Qurayshna قريش waa milixda oo ah cusbada oo kale: oo cunno milix la’aanteed ma macaanaanaysaa? Haddaan ka baqayn inay Qurayshi قريش kibirto waxaan u sheegi lahaa waxa u yaalla Ilaahay Cazza wa Jalla الله عز وجل agtiisa.”

Kacb (Al Axbaar)\كعب (الأخبار) oo ahaan jiray caalin yuhuudi ah kaddiobna islaamay wuxuu yiri:

عن كعب قال:

“نجد في الكتاب أن قريشا هي الكتبة الحسبة، ملح هذه الأمة.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“kitaabka –waana kitaabka Al Tawraat\التورات ee Nabi Muuse Calayhissalaamu– aragnay inay ku dhigan tahay inay Qurayshi قريش tahay kuwa wax dhiga dadkana amra inay la yimaadaan waxa fiican waxa xunna ay ka haraan, ayna yihiin milixda ummaddaan.”

Caamir Shihr\عامر بن شهر wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri:

عن عامر بن شهر قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

“انظروا قول قريش، واسمعوا قولهم، ولا تعملوا بأعمالهم.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“fiiro u yeesha warka Quraysh قريش, hadalkoodana maqla oo yeela, camalkoodase ha la imaanina.”

Zayd bin Aslam wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن زيد بن أسلم قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"صلب الناس قريش، وهل يمشي الرجل بغير صلب؟"

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Quraysh قريش waa dadka dhabarkiisa, oo miyuu nini socon karaa hadduusan dhabar lahayn?"

Abuu Bakr bin Sulaymaan bin Xathmah حثمة أبو بكر بن سليمان – kana mid ahaa culummada Quraysh قريش – wuxuu yiri: "waxaa nasoo gaartay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن أبو بكر بن سليمان بن أبي حصمة – وكان من علماء قريش – يقول: بلغنا أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال:

لا تعلموا قريشا وتعلموا منها، ولا تقدموها و لا تأخرو عنها، فإن للقرشي مثلي قوة الرجل من غير قريش."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Quraysh قريش adinku macallin ha u noqonina oo wax ha barina ee ayada ka barta, hana ka hormarina dibna ha uga harina, oo ninka Quraysh قريش u dhashay wuxuu leeyahay laba jibaarka tabarta ninkaan Quraysh قريش u dhalan."

Jubayr bin Mudhchim مطعم جبير بن wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن جبير بن مطعم قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"للقرشي مثل قوة الرجلين من غير قريش."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ninka Qurayshta قريش ahi wuxuu leeyahay tabarta laba nin oo aan Quraysh قريش u dhalan."

Jubayr bin Mudhchim مطعم جبير بن wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن جبير بن مطعم قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"يا أيها الناس، لا تقدموا قريشا تهلكوا، ولا تخلفوا عنها فتضلوا، لا تعلموها وتعلموا منها؛ فإنهم أعلم منكم. لولا أن تبطر قريش لأخبرتها بالذي لها عند الله تعالى."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Dadow Quraysh قريش ha ka hormarina oo aad markaas halaagantaan, dibna ha uga harina oo aad markaas luntaan, waxna ha barina ee ayaga ka barta oo ayagaa idinka cilmi badan. Haddaanan ka baqayn inay Qurayshu قريش kibirto waxaan u sheegi lahaa waxa Ilaahay Cazza wa Jalla الله عزوجل agtiisa u yaalla.”

Cabdu Allaahi bin Abii Mulaykah عبد الله بن أبي مليكة wuxuu wariyay inuu Abaa Qataadah Al Sulamiyyu أبو قتادة السلمي uu Maalinta Furashada Makkah مكة ku yiri:

“Maanta waa maalintuu Ilaahay Cazza wa Jalla الله عزوجل Quraysh قريش dullayn lahaa.” Markaasay rag ka mid ah asxaabta Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waxay yiraahdeen:

“Miyaadan maqlayn wuxuu Abuu Qataadah أبو قتادة yiri?”

Markaasuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

عن عبد الله بن أبي مليكة، أن أبا قتادة السلمي قال لخالد بن الوليد يوم الفتح: "هذا يو بذل الله عزوجل فيه قريشا." فقال بعض أصحاب النبي صلى الله عليه وسلم: "ألا تسمع ما يقول أبو قتادة" فقال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"مهلا يا أبا قتادة، فإنك لو وزنت رأيك برأيهم لحققت رأيك مع رأيهم، ولو وزنت حلمك مع أحلامهم لحققت حلمك مع أحلامهم. ولا تعلموا قريشا وتعلموا منها، فلو لا أن تبطر قريش لأخبرتهم بما لهم عند رب العالمين."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Aayarkaa Abaa Qataadah أبو قتادة, oo adigu haddaad caqligaaga la miisaantid caqligooda waxaad hoos u dhuganaysaa oo aad yasaysaa caqligaaga, haddaad sabirkaaga iyo adkaysigaaga la miisaantid ayaga sabirkooda iyo adkaysigoodana waxaad hoos u dhuganaysaa oo aad yasaysaa adiga sabirkaaga iyo adkaysigaaga. Qurayshna قريش wax ha barina ee ayada ka barta. Haddaanan ka baqi lahayn inay Qurayshu قريش kibirto waxaan u sheegi lahaa waxa u yaalla caalamiinta Rabbigood رب العالمين agtiisa.”

Ibnu Cabbaas ابن عباس wuxuu yiri:

عن ابن عباس، قال: "قال لي علي بن أبي طالب، رضي الله عنه، يوم حروراء: "أخرج إلى هؤلاء القوم فقل لهم: "يقول لكم علي: أتتهموني على رسول الله صلى الله عليه وسلم؟ فأشهد: لسمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: "لا تؤموا قريشا وانتموا بها، ولا تقدموا على قريش وقدموها، ولا تعلموا قريشا وتعلموا منها؛ فإن أمانة الأمين من قريش تعدل أمانة اثنين من غيرهم، وإن علم عالم قريش يسع طباق الأرض. ولو لا أن تبطر قريش لأخبرتها بما لها عند الله عزوجل."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ibnu Cabbaas ابن عباس wuxuu yiri:

“Calii bin Abii Dhaalib\علي بن أبي طالب\ Allaha raalli ka noqdee ayaa wuxuu Maalinta Xaruuraa’
\يوم حروراء\ (waana maalinta la dagaallanka Khawaarijta\الخوارج\ igu yiri:

“U tag raggaas waxaadna ku tiraahdaa:

“Calii\علي\ wuxuu idin leeyahay: “ma waxaad igu tuhmaysaan inaan Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ka been sheegayo? Waxaann ka marag kacayaa inaan maqlay Rasuulka Ilaahay Sallaa Aklaahu Calayhi Wa Sallam oo leh:

“Quraysh\قریش\ imam ha u noqonina oo ayaga imam ka dhigta oo raaca, Qurayshna\قریش\ ha ka hormarina ee ayaga hormariya, Quraysh\قریش\ wax ha barina ee ayada ka barta, oo amaanada ninka aaminka ah ee Quraysh\قریش\ ah waxay u dhigantaa amaanada laba nin oo ayaga ghayrkood ah aaminnimadooda. Ogaadana cilmiga nin caalin ah ee Quraysh\قریش\ wuxu wada gaaraya meel kasta oo arligaan ka midka ah. Haddaanan ka baqan lahayn inay Quraysh\قریش\ kibirto waxaan u sheegi lahaa waxay ku leedahay Ilaahay Cazza wa Jalla\الله عزوجل\ agtiisa.”

Ibnu Cabbaas\ابن عباس\ wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن ابن عباس، قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

”اللهم أهد قريشاً؛ فإن علم العالم منهم يسع طباق الأرض. اللهم أذقت أولها نكالا فأذق آخرها نوالاً.“

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ilaahayow Quraysh\قریش\ hanuuni; oo cilmiga caalin ayaga ka mid ayaa wada gaaraya meel kastoo arligaan ka mid ah. Ilaahayow kuwoodii hore waxaad dhedhensiisay ciqaab iyo cibro ee marka kuwooda dambe wax siintaada dhedhensii.”

Waxaa Abuu Hurayrah\أبو هريرة\ laga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن أبي هريرة عن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال:

”اللهم أهد قريشاً؛ فإن عالمها يملأ طبق الأرض علماً. اللهم كما أذقتهم عذاباً لأذقتهم نوالاً.“
دعا بها ثلاث مرات.

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ilaahayow Quraysh\قریش\ hanuuni; oo caalinkeeda ayaa meel kastoo arliga ka mid ah cilmi buuxin doona. Ilaahayow sidaad hore cadaab u dhedhensiisay hadda wax siin dhedhensii.”

Abuu Nucaym\أبو نعيم\ wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن أبي نعيم قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

”الأئمة من قريش.“

Xadiithka macnihiisu hore Ayaan ayuu noo soo maray.

Abuu Nucaym\أبو نعيم\ wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن أبي نعيم قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"للقرشي قوة الرجلين من غير قريش."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ninka Quraysh\قريش\ u dhashay wuxuu leeyahay itaalka laba nin oo aan Quraysh\قريش\ u dhalan."

Muxammad bin Al Xasan\محمد بن الحسن\ wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن محمد بن الحسن قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"إن عقل الرجل من قريش عقل رجلين من غيرهم."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ninka Quraysh\قريش\ u dhashay wuxuu leeyahay caqliga laba nin oo la isku daray oo aan ayaga ka dhalan."

Al Shaaficii\الشافعي\ wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam yiri:

عن الشافعي قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"تعلموا من قريش، وقوة القرشي قوة الرجلين من غير قريش، في نبل الرأي."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Quraysh\قريش\ cilmiga ka barta oo itaalka ninka Quraysheed\قريش\ wuxuu la mid yahay itaalka laba nin oo Quraysh\قريش\ ghayrkeed u dhashay oo la isku daray, marka caqliga iyo talada la fiiriyo."

Abuu Nucaym\أبو نعيم\ wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن أبو نعيم قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"لاتسبوا قريشا؛ فإن عالمها يملأ الأرض علما، ويملاً طبق الأرض علما."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Quraysh قريش ha caayina; oo caalinkeeda ayaa arliga cilmi ka buuxinaya, meel kastoo arliga ka mid ahna cilmi ka buuxinaya.”

باب

ما جاء في قول الله عزوجل وَإِنَّهُ لَذِكْرٌ لَّكَ وَلِقَوْمِكَ وَسَوْفَ تُسْأَلُونَ (44) وما للعرب ثم لقريش فيه من الشرف، وما
وجب بذلك علة المسلمين من حبهم، والشافعي من جملتهم، رحمه الله.

Waxa laga wariyay tafsiiirka Hadalka Ilaahay Cazza wa Jalla **الله عزوجل** eek u sugan Aayadda
قريش قريش **وَإِنَّهُ لَذِكْرٌ لَّكَ وَلِقَوْمِكَ وَسَوْفَ تُسْأَلُونَ (44)** iyo sharafta ugu sugan carabta gaar ahaan Quraysh
taasoo waajib muslimiinta waajib ka dhigaysa inay jeclaadaan, Al Shaaficiina **الشافعي**, Allaha u
naxariistee, ayagaas ayuu ka mid yahay

Ibnu Cabbaas **ابن عباس** waxaa laga wariyay inuu tafsiiirka Aayaddaas, oo ah Aayadda 44 ee
Suuratu Al Zukhruf **سورة الزخرف** ka yiri:

عن **ابن عباس** في قوله عز وجل وَإِنَّهُ لَذِكْرٌ لَّكَ وَلِقَوْمِكَ وَسَوْفَ تُسْأَلُونَ (44) قال:
“شرف لك ولقومك” **لَقَدْ أَنْزَلْنَا إِلَيْكُمْ كِتَابًا فِيهِ ذِكْرُكُمْ أَفَلَا تَعْقِلُونَ (10)** قال:
"فيه شرفكم."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Sharaf ayaa adiga iyo tolkaa ugu jirta, waana Quraanke.”

Sidoo kale Aayadda tobnaad ee Suuratu Al Mu/miniiina **سورة المؤمنين** oo maneheedu yahay:

“Waxaa idiinku sugan Quraanka sharaftiinna.”

Caa’ishah **عائشة** waxaa laga wariyay inay tiri:

عن **عائشة**: **لَقَدْ مَنَّ اللَّهُ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ إِذْ بَعَثَ فِيهِمْ رَسُولًا مِنْ أَنْفُسِهِمْ يَتْلُو عَلَيْهِمْ آيَاتِهِ وَيُزَكِّيهِمْ وَيُعَلِّمُهُمُ
الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ وَإِنْ كَانُوا مِنْ قَبْلُ لَفِي ضَلَالٍ مُبِينٍ (164)** "قالت:
"هذه للعرب خاصة."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

Aayaddaan oo ah midda boqol afar iyo lixdan ee Suuratu Aali Cimraana\ عمران\ سورة waxay ka tiri:

“Aayaddaan waxay khaas u tahay oo gooni u leh dadka kale sokadiisa carabta.”

Al Shaaficiii\الشافعي\ wuxuu Aayadda afar iyo afartan ee Suuratu Al Zukhruf\الزخرف\ ka yiri:

الشافعي في قوله تعالى:

وَإِنَّهُ لَذِكْرٌ لَّكَ وَلِقَوْمِكَ وَسَوْفَ تُسْأَلُونَ (44)

قال:

يقال: "ممن الرجل؟ فيقال: "من العرب"، فيقال: "من أي العرب؟" فيقال: "من قريش".

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Waxaa la yiraahdaa marka qof la haybsanayo:

“Yaad u dhalatay?”

Wuxuu yiraahdaa:

“Carab.”

Waxaa markaas la yiraahdaa:

“Carab yaad ka tahay?”

Wuxuu yiraahdaa:

“Quraysh\قريش\.”

Taasu waa macnaynta Aayaddaas erayga ku jira ee “Qawm\قوم\” ah, macnihiisuna yahay “Tol”.

Ibnu Cabbaas\ابن عباس\ waxaa laga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن ابن عباس قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

“أحبوا العرب لثلاث: لأني عربي، والقرآن عربي، وكلام أهل الجنة عربي.”

Xadiithkaan macnihiisu hore ayuu noo soo maray.

Al Zubayru\الزبير\ wuxuu yiri inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

عن الزبير قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

“فضل الله عز وجل قريشا لسبع خصال: أنهم عبدوا الله عز وجل عشر سنين لا يعبدوا إلا قرشي، وفضلهم بأنه نصرهم يوم الفيل وهم مشركون، وفضلهم بأنه نزلت فيهم سورة من القرآن لم يدخل معهم غيرهم بسم الله الرحمن الرحيم. لإيلاف قريش (1) وفضلهم بأن فيهم النبوة والخلافة والحجاجة والسقاية.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ilaahay Cazza wa Jalla **الله عزوجل** wuxuu Quraysh قريش dadka intiisa kale uga deeqtomay oo uu uga sare mariyay toddoba arrimood:

- (1) Waxay caabudeen Ilaahay Cazza wa Jalla **الله عزوجل** toban sano oo uusan axad aan Quraysh ahayn caabudayn.
- (2) Wuxuu ugu deeqtoomay inuu libta ka siiyay oo uga gargaaray Maalinta Maroodiga (ayna kasoo degatay Suuratu Al Fiili **سورة الفيل**) ayagoo markaas gaalo ah.
- (3) Wuxuu dadka uga sare mariyay inay ayaga kasoo degatay Suurad Quraanka ka mid ah oo ayan cid kale lka wadaagin, ahna Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi **بسم الله** **لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ (1) الرَّحْمَنُ الرَّحِيمُ**.
- (4) Wuxuu dadka dheereysiiyay inuu Nabigu ayaga ka dhashay oo uu Nabi ka mid yahay.
- (5) Wuxuu kaloo siiyay Khilaafada **الخلافة**.
- (6) Wuxuu kaloo dadka dheereysiiyay inay ayagu hayaan Al Xijaabah **الحجابه** oo ah furaha iyo maamulka Kacbada.
- (7) Wuxuu kaloo dadka intiisa kale dheereysiiyay inay ayagu hayaan Al Siqaayah **السقاياه** oo ah biyaha Zamzam **زمزم** oo xujayda la waraabiyo.

Sacad bin Abii Waqqaas **سعد بن أبي وقاص** waxaa laga wariyay inuu yiri:

عن سعد بن أبي وقاص قال: قيل:
"يا رسول الله، قتل فلان – لرجل من ثقيف – قال:

"أبعده الله، إنه كان يبغض قريشا."

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:

"من يرد هوان قريش يهنه الله."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Sacad bin Abii Waqqaas **سعد بن أبي وقاص** wuxuu yiri: Waxaa la yiri:

“Rasuulka Ilaahayow hebel waa la dilay – ahaana nin Thaqiif **ثقيف** u dhashay – markaasuu wuxuu yiri:

“Ilaahay ha cadaabo oo wuxuu ahaa nin Quraysh **قريش** neceb.”

Wuxuu kaloo yiri: Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

“Qofka doonaya inuu Quraysh **قريش** dulleeyo isagaa Ilaahay dulleynayaa.”

Cumar bin Cuthmaan bin Caffaan\عثمان بن عفان\ wuxuu yiri:

عن عمر بن عثمان بن عفان قال: "قال لي أبي: "بيني، إن وليت أمر الناس شيئا فأكرم قريشا، فإني سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول:

"من أهان قريشا أهانه الله عز وجل."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Aabahay wuxuu igu yiri:

“Maandhow haddaad xukunka dawladda meel ka qabatid, markaas Quraysh\قريش\ karaamee, oo anigu waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo leh:

“Qofka Quraysh\قريش\ liida oo dulleeya Ilaahay Cazza wa Jalla\الله عز وجل\ ayaa isaga liida oo dulleeya oo hoos u dhiga .”

Jubayr bin Mudhchim\مطعم\ جبير بن مطعم\ wuxuu yiri:

عن جبير بن مطعم: قال: "لما قسم رسول الله صلى الله عليه وسلم سهم ذوي القربى من خيبر على بني هاشم وبني المطلب - مشيت أنا وعثمان بن عفان، فقلت:

"يا رسول الله، هؤلاء إخوتكم بنو هاشم، لا ننكر فضلهم لمكانك الذي جعلك الله به منهم. رأيت إخواننا من بني المطلب أعطيتهم وتركتنا، وإنما نحن وهم منك بمنزلة واحدة." فقال:

"إنهم لم يفارقونا في جاهلية ولا إسلام، إنما بنو هاشم وبني المطلب شيء واحد." ثم شبك رسول الله صلى الله عليه وسلم يديه إحداهما في الأخرى."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Jubayr bin Mudhchim\مطعم\ جبير بن مطعم\ wuxuu yiri:

“Markuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Sahamka Qaraabada ee Khaybar u qaybiyay Bani Haashim\هاشم\ بني iyo Bani Al Mudh-dhalib\بني\ \المطلب\ ayaa aniga iyo Cuthmaan bin Caffaan\عثمان بن عفان\ ayaan u tagtay, markaasaan waxaan iri:

oo macnihiisu yahay:

“oo maxaa idiin diiday inuu miski idiin soo carfo ayadoo uu halkaan ku yaallo qabriga Abuu Mucaawiyah **أبو معاوية**!”

Waxaa la yiri in marka la dilay uu cumrigiisu ahaa saddex iyo lixdan sano wuxuuna ahaa nin dhererkiisu meel dhexaad yahay oo waji qurxoon Allaha raalli ka noqdee.” Waa intaas warka Al Nnawawii **النووي**.

عبيدة\Cubaydah\إبن سعد\Ibnu Sacad

Ibnu Sacad **إبن سعد** wuxuu Al Dhabaqaatu Al Kubraa **الطبقات الكبرى** mujalladka labaad bogga lix iyo toddobaatan isagoo warinaya siirada ragga Duullaanka Badar **بدر** ka qayb galay ku yiri: “Cubaydah bin Al Xaarith bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy **بن عبيدة بن الحارث بن قصى**, hooyadiisna waa Sukhaylah bintu Khuzaacii bin Al Xuwayrith bin Xubayb bin Maalik bin Al Xaarith bin Xudhaydh bin Jusham bin Qasiyyi **بن سخيلا بنت خزاعي بن قسي** ahna Thaqiif **ثقيف**.

Cubaydah **عبيدة** caruurtiisu waxay ahaayeen Mucaawiyah **معاوية**, Cawn **عون**, Munqith **منقذ**, Al Xaarith **الحارث**, Muxammad **محمد**, Ibrahiim **إبراهيم**, Raydhah **ريطة**, Khadiijah **خديجة**, Sukhaylah **سخيلا** iyo Safiyyah **صفية** oo ay hooyooyin kala duwan dhaleen.

Cubaydah **عبيدة** wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ka da' waynaa toban sano, kuniyadiisuna waxay ahayd Abaa Al Xaarith **أبا الحارث**, wuxuuna ahaa nin dhererkiisu meel dhexaad yahay oo midabkiisu maariin yahay oo waji qurxoon... waxaa isi soo raacay Cubaydah **عبيدة** iyo Al Dhufaylu **الطفيل** iyo Al Xusaynu **الحصين** uuna wada dhalay Al Xaarithu bin Al Mudh-dhalib **المطلب** iyo Misdhax bin Uthaathah bin Al Mudh-dhalib **بن أثثة** **مسطح بن أثثة** Makkah **مكة** ayagoo hijroonaya waxayna ku ballameen bartamaha meesha la yiraahdo Naajix **ناجخ**.

Markaasaa waxaa kasoo haray Misdhax **مسطح** oo bahal hoosaad qaniinay. Markay waabariisteen ayaa khabarkiisu u yimid markaasay usoo laabteen waxayna ka heleen Al Xusaas **الحساس**, markaasay soo qaadeen oo ay Al Madiinah **المدينة** keeneen, waxayna ku degeen Cabdu Al Rraxmaan bin Salamah Al Cajlaanii **عبد الرحمن بن سلمة العجلاني**...Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu Cubaydah bin Al Xaarith **بن عبيدة بن الحارث** iyo Al Dhufayl **الطفيل** iyo labadiisa walaal dhul uga gooyay bartay maanta deggan yihiin oo u dhexeysa Baqiicu Al Zzubayr **بقيع الزبير** iyo Bani Maazin **بني مازن**...Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu walaaleeyey Cubaydah bin Al Xaarith **بن عبيدة بن الحارث** iyo Bilaal **بلاال**, wuxuuna walaaleeyey Cubaydah bin Al Xaarith **بن عبيدة بن الحارث** iyo

Cumayr bin Al Xumaam Al Ansaariyyi\عمير بن الحمام الأنصاري." Waa intaas warka ibnu Sacad ابن سعد\

Rukaanah\ركانة

Rukaanah\ركانة iyo la legdankiisa

Ibnu Isxaaq\إسحاق ابن wuxuu yiri:

"Rukaanah bin Cabdi Yaziid bin Haashim bin Al Mudh-dhalib bin Cabdi Manaaf ركانة بن عبد يزيد بن هاشم بن المطلب بن عبد مناف\ wuxuu ahaa ninka Quraysh\قريش ugu xoog badan.

Markaasuu wuxuu maalin maalmaha ka mid ah bananka Makkah\مكة midkood kula kulmay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri:

"يا ركانة، ألا تتقي الله وتقبل ما أدعوك إليه؟"

"Yaa Rukaanah, alaa tattaqii Allaaha wa taqbila maa adcuuka ilayhi?"

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Rukaanow\يا ركانة, maad Ilaahay ka dhawrsatid oo aad waxaan kuugu yeerayo yeeshid?"

Rukaanah\ركانة wuxuu yiri:

"Haddaan ogaan lahaa inay waxaad iigu yeereyso run yihiin waan ku raaci lahaa."

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"أفرايت إن سرعتك أتعلم أن ما أقول حق؟"

"Afara'ayta in saractuka ataclamu anna maa aquulu xaqqun?",

oo macnihiisu yahay:

"Bal ka warran, haddaan legdanno oo aan ku legdo ma ogaaneysaa markaas inay waxaan leeyahay run yihiin?"

Rukaanah\ركانة wuxuu yiri:

"Haa".

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"افقم حتى أسارعك."

"Faqum xattaa usaaricaka."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Hadaba sare joogso si aan kuula legdamo."

Markaasuu Rukaanah\ركانة usoo istaagay si uu ula legdamo.

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, intuu qabtay legday oo uu dhulka dhigay, isagoo uu Rukaanah\ركانة xoog uu isaga celiyo iska waayey.

Markaasuu Rukaanah **ركانة** wuxuu yiri:

"Muxammadow\ **محمد** (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) mar kale iigu celi."

Markaasuu ugu celiyey oo uu hadana intuu legday dhulka dhigay.

Markaasuu wuxuu yiri:

"Muxammadow **محمد** (Sallaa Allaahu Calayhi wasallam), wa Allaahi **والله** kani waa arrin yaab leh, inaad i legedid."

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri:

"وأعجب من ذلك إن شئت أربكه، إن إتقيت الله وأنبعت أمري."

"Wa acjabu min thaalika in shi'ta an uriikahu, in ittaqayta Allaaha wa atbacta amrii."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaan ku tusayaa mid taas kasii yaab badan haddaad Ilaahay ka dhawrsato oo aad amarkeygaan, oo ah Diinta Islaamka, soo raacdid."

Rukaanah **ركانة** wuxuu yiri:

"Waana maxay?"

Wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أدعوك هذه الشجرة التي ترى فتأينني."

"Aduu laka haathihi al shajarata allatii taraa fa ta'tiinii."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaan kuugu yeerayaa geedkaas aad u jeedid, markaasuu ii imaanayaa."

Wuxuu yiri:

"U yeer."

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam u yeeray. Markaasuu geedku soo kacay oo uu soo socday ilaa uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hortiisa soo istaagay.

Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu geedka ku yiri:

"إرجعي إلا مكانك."

"Irciia ilaa makaaniki",

oo macnihiisu yahay:

"Meeshaadii dib ugu laabo."

Markaasuu geedku meeshiisii dib ugu noqday. Intaas kaddib ayuu Rukaanah **ركانة** tolkiis u tegey wuxuuna ku yiri:

"Reer Bani Cabdi Manaafow\ **بني عبد مناف**, saaxiibkiinnaan (waana Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) saaxirnimada kula tartama dadka adduunkoo idil, oo wa Allaahi **والله** inaanan weligay qof sixirka ka badiya arag."

Intaas kaddibna wuxuu tolkiis u sheegay wuxuu arkay oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo isaga dhexmaray iyo wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sameeyey."

Al Suhaylii\السهيلى wuxuu yiri:

"Rukaanah wuxuu ka mid ahaa dadka marka Makkah\مكة la furtay islaamay, wuxuuna dhintay khilaafada Mucaawiyah\معاوية.

Rukaanah\ركانة waana isla ninka haweentiisa saddexdii dalaqoodba isku raaciyay oo furay, markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, weyddiiyey waxa niyadiisa ku jiray markuu sidaas yeelayay, wuxuuna yiri:

"Waxaan doonayey inaan hal dalqo ku furo".

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, haweentiisa usoo celiyey (waana Xadiithka laba kun iyo saddex boqol iyo saddex iyo todobaatanka ee Abuu Daaud\أبو داود uu wariyay). Rukaanah\ركانة Xadiithkiisa uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay waxaa kaloo ka mid ahaa inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن لكل دين خلقا، وخلق هذا الدين الحياء."

"Inna li kulli diinin khuluqan, wa khuluq haathaa Al Ddiini al xayaa'u."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Din walba waxay leedahay khuluq, waa dhaqane, ayada u gaar ah, khuluqda Diintaanna waa xishoodka."

Rukaanah\ركانة wiilkiisa Yaziid-na\يزيد wuxuu ahaa saxaabi. Yaziid bin Rukaanah\يزيد بن ركانة waxaa ka wariyay wiilkiisa Calii bin Yaziid bin Rukaanah\علي بن يزيد بن ركانة, kanoo la siiyey xoog aan cid kale la siin, uuna ka dhaxlay awoowihis Rukaanah\ركانة. Xoogiisaasna waxaa lagu wariyay akhbaar uu xusay Al Faakihii\الفاكهي (oo ah Muxammad bin Isxaaq Al Faakihii\محمد بن إسحاق الفاكهي), oo dhintay sanadka laba boqol iyo labo iyo toddobaatanka Hijriga, kitaabkiisana taariikhda Makkah\مكة ku saabsanna waxaa la yiraahdaa Akhbaaru Makkah fii Qadiimi Al Dahri wa Xadiithihi\أخبار مكة في قديم الدهر وحديثه), ayna ka mid tahay waxa dhex maray isaga iyo Yaziid bin Mucaawiyah\يزيد بن معاوية, midkaan damboo ragga Carabta kuwooda ugu xoog badan ka mid ahaa (Yaziid\يزيد aabihiis Mucaawiyah bin Abii Sufyaan\معاوية بن أبي سفيان wuxuu noqday boqorka dawladda Islaamka, wiilkiisa Yaziidna\يزيد waxaa la boqray oo la caleemo saaray kaddib dhimashada aabihiis. Mucaawiyah\معاوية wuxuu boqor ahaa labaatano sano oo ka bilaabatay sanadka afartanaad ee Hijrada wuxuuna dhintay sanadka lixdanaad, wuxuuna ku duugan yahay Dimishaq\دمشق, arliga Suuriya\سورية. Wiilkiisa Yaziid bin Mucaawiyah\يزيد بن معاوية wuxuu boqor ahaa saddex sano iyo bilo, isaga dabadiis. Isagana waxaa boqornimada ka dhaxlay wiilkiisa Mucaawiyah bin Yaziid bin Mucaawiyah\معاوية بن يزيد بن معاوية oo boqor ahaa afartan maalmood, kaddibna wuu dhintay isagoo saddex iyo labaatano sano jir ah sanadka afar iyo lixdan ee Hijrada).

Markaasuu Yaziid bin Mucaawiyah\يزيد بن معاوية maalin wuxuu la legdamay Calii bin Yaziid bin Rukaanah\علي بن يزيد بن ركانة. Markaasuu ina Rukaanah\ركانة wuxuu legday Yaziid bin Mucaawiyah\يزيد بن معاوية oo uu dhulka u dhigay si aan ayadoo kale hore loo arag.

Markaasuu Yaziid bin Mucaawiyah\يزيد بن معاوية wuxuu Calii\علي saaray faras adag oo aan la fuuli karin oo haddii la fuulana aan soconayn oo qofka saaran dushiisa ka tuuraya. Markaasuu Calii\علي wuxuu gartay waxa lala doonayo.

Markaasuu markuu farasku damcay inuu dushiisa ka rido ayuu faraska labadiisa bawdo xoog ugu qabtay oo uu xooggaas uu ugu qabtay daradiis farasku dhintay.

Al Faakihii\الفاكهي wuxuu kaloo xusay inuu Calii bin Yaziid bin Rukaanah\علي بن يزيد بن ركانة uu laba nin mid walba mid ka mid ah labadiisa kilkilood geliyay oo uu isagoo sidaas u sida la orday, uuna la ordayey ilaa ay ka qayliyaan oo ay yiraahdaan:

"Waan dhimaneynaayeey! Waan dhimaneynaayeey!"

Markaasu sii daayey." Waana intaas warka Al Suhaylii\السهيلى.

Sarraynta cimaamadaha

Al Nawawii\النووي wuxuu Tahthiibu Al Asmaa'i wa Al Llughaati\التهذيب للأسماء واللغات mujalladka koowaad bogga boqol iyo sagaashan ku yiri legdinta markuu xusay ka sokow yiri:

"Rukaanah\ركانة wuxuu yiri:

"Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo oranaya:

"**فرق ما بيننا وبين المشركين العمائم على القلائس.**"

"**Farqu maa baynanaa wa bayna al mushrikiina al camaa'imu calaa al qalaanisi.**"

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Farqiga annaga iyo gaalada noo dhexeeya oo na kala saara waa cimaamadaha koofiyadaha korkooda lagu duubto."

Haweentiisa uu saddexdaas ku furayna waxaa magaceedu ahaa Suhaymah bintu Cuwaymir\سهيمة النووي\ بنت عويمر. Waa intas warka Al Nawawii\النووي.

Al Xusaynu bin Al Xaarith\الحصين بن الحارث

Ibnu Sacd\ابن سعد wuxuu yiri:

"Al Xusaynu bin Al Xaarith bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy\الحصين بن قصى hooyadiisna waa Sukhaylah bin Khuzaacii al thaqafiyyah\سكيلة بنت خزاعي الثقفية\ عبيدة iyo Al Dhufaylu\الطفيل ilma Al Xaarith\الحارث.

Xuseen **الحصين** wuxuu dhalay Cabdu Allaahi **عبد الله** gabayaaga oo hooyadiisna waa Ummu Cabdu Allaahi bintu Cadiyyi bin Khuwaylid bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa **بن عبد الله بنت عدي** \خويلد بن أسد بن عبد العزى\.

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu walaaleeyey isaga iyo Raafic bin Canjadah **رافع بن ععدة**...Muxammad bin Cumar **محمد بن عمر** wuxuu yiri:

“Al Xusaynu **الحصين** wuxuu goob joog ka ahaa Badar **بدر** iyo Uxud **أحد** iyo dullaannada Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo idil, wuxuuna dhintay bilo Al Dhufaylu **الطفيل** dabadiis sanadka laba iyo soddon.” Waa intaas warka ibnu Sacad **إبن سعد**.

Misdhax bin Uthaathah **مسطح بن أثاثه**

Ibnu Sacd **إبن سعد** wuxuu yiri:

“Misdhax bin Uthaathah bin Cabbaad bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy **مسطح** **أبا عباد** **بن أثاثه** **بن عباد بن المطلب بن عبد مناف بن قصي** kuniyadiisu waa Abaa Cabbaad **أبا عباد** **بن أثاثه** **بن عباد بن المطلب بن عبد مناف بن قصي** Misdhax **مسطح** hooyadiisna waa Ummu Misdhax bintu Abii Ruhm bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy **مسطح بنت أبي رهم بن المطلب بن عبد مناف بن قصي**, waxayna ka mid ahayd haweenka baayacay (Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam oo islaamka ku baayacay).

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu walaaleeyey Misdhax bin Uthaathah **مسطح بن أثاثه** iyo Zayd bin Al Muzayyin **زيد بن المزين**...Misdhax **مسطح** wuxuu goob joog ka ahaa Badar **بدر** iyo Uxud **أحد** iyo dhammaan duullannada Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu Khaybar isaga iyo ibna Ilyas **إبن إلياس** ka siiyay konton wasaq **وسق**. Wuxuuna dhintay sanadka afar iyo soddon isagoo markaas lix iyo konto jir ah.” Waa intaas warka ibnu sacad **إبن سعد**.

Al Dhufaylu bin Al Xaarith **الطفيل بن الحارث**

Ibnu Sacd **إبن سعد** wuxuu yiri:

“Al Dhufaylu bin Al Xaarith bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf bin Qusayy **الطفيل بن الحارث** **بن عبيدة بن الحارث** **بن المطلب بن عبد مناف بن قصي**, hooyadiisna waa Sukhaylah bintu Khuzaacii al thaqaifiyyah **عبيدة بن الحارث** **بن عبيدة بنت خزاعي الثقفية** hooyada dhashay Cubaydah bin Al Xaarith **عبيدة بن الحارث**.

Al Dhufaylu **الطفيل** wuxuu dhalay Caamir bin Al Dhufaylu **عامر بن الطفيل**. Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu walaaleeyey Al Dhufaylu bin Al Xaarith **الطفيل بن الحارث** iyo Al Munthir bin Muxammad bin Cuqbah bin Uxayxah bin Al Julaax **المنذر بن محمد بن عتبة بن أحيحة بن الجلاح**...Al Dhufaylu **الطفيل** wuxuu goob joog ka ahaa Badar **بدر** iyo Uxud **أحد** iyo Duullaannada Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo idil, wuxuuna dhintay sanadka laba iyo soddon isagoo toddobaatan jir ah.” Waa intaas warka ibnu Sacad **إبن سعد**.

عبد يزيد بن هاشم بن Cabdu Manaaf bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Yaziid bin Haashim bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf
المطلب به عبد مناف

Al Xaafith ibnu XajarAl Casqalaanii\الحافظ ابن حجر العسقلاني\wuxuu kitaabkiisa saxaabada ka warbixinaya ee “Al Isaabah fii Tamyiizi Al Saxaabah\الصحابه في تمييز الصحابة” juzka lixaad, bogga lix boqol iyo saddex warbixinta tirsigeedu yahay shan kun laba boqol saddex iyo sagaashan ku yiri:

(5293)(الجزء السادس صفحة 603) **عبد يزيد بن هاشم بن المطلب بن عبد مناف**، والد **ركانة**، ذكره الذهبي في “التجريد” وعلم له علامة بي داود، وقال: **أبوركانة** طلق امرأته؛ وهذا لا يصح، والمعروف أن صاحب القصة **ركانة**. قال: وقع ذكره في الحديث الذي أخرجه عبد الرزاق، وأبو داود من طريقه، عن ابن جريج: أخبرني بعض بني **رافع** مولى النبي صلى الله عليه وسلم، عن **عكرمة**، عن **إبن عباس**، قال: “طلق **عبد يزيد** **أبو ركانة** وإخوته أم **ركانة**، ونكح امرأة من مزينة فجاءت النبي صلى الله عليه وسلم فقالت: “ما يغني عني إلا كما تغني هذه الشعرة – لشعرة أخذتها من رأسها – ففرق بيني وبينه.” فدعا **بركانة** وإخوته. فذكر القصة. وفيها: “فقال النبي صلى الله عليه وسلم لعبد **يزيد**: “طلقها” إي **المزينية**، ففعل، قال: “راجع امرأتك أم **ركانة** وإخوته.” قال: “إني طلقته ثلاثا يا رسول الله.” قال: “قد علمت، راجعها.”

قال **أبو داود**: “وحديث **نافع بن عجير**، و**عبد الله بن علي بن يزيد بن ركانة**، عم أبيه، عن جده، أن **ركانة** طلق امرأته البتة، فجعلها النبي صلى الله عليه وسلم واحدة – أصح؛ لأن ولد الرجل وأهله أعلم به.

وكان أسند قبل ذلك حديث **ركانة** كما تقدمت الإشارة إليه في ترجمته، لكن إن كان خبر **ابن جريج** محفوظا فلا مانع أن تتعدد القصة، ولا سيما مع اختلاف السياقين، و**شيخ ابن جريج** الذي وصفه بأنه بعض بني **أبي رافع** لا أعرف من هو، وقد تقدمت ترجمة **السائب بن عبيد بن عبد يزيد**، وأنه أسر يوم بدر وأسلم. ولم أر لابنه ذكرا إلا ما ذكر في هذه الرواية: فدعا **بركانة** وإخوته.

وذكر **الزبير** في كتاب “النسب”: “فولد **عبد يزيد بن هاشم ركانة** و**عجيرا** و**عميرا** و**عبيدا**، وأهمهم العجلة بنت **عجلان** من بني **سعد بن ليث بن بكر بن عبد مناة بن كنانة**. وعلى هذا فيكون في هذا الحديث أربعة أنفس في نسق من الصحابة، **عبد يزيد**، وولده **عبيد**، وولده **السائب بن عبيد**، وولده **شافع بن السائب**، وقد ذكرت في ترجمة كل منهم ما ورد فيه.” انتهى.

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

عبد يزيد بن هاشم بن المطلب Cabdu Manaaf bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Yaziid bin Haashim bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf waa aabaha dhalay **ركانة** Rukaanah\الذهبي\wuxuu ku xusay kitaabkiis “التجريد\Al Tajriid” Wuxuuna uga warbiyay warkuu **أبو ركانة** Abu Rukaanah\Daawud\wuxuuna yiri:

“**أبو ركانة** aabihiis wuxuu furay haweentiisa; taasna sax ma aha, waxa la ogyahayna waa inay qisadaani ku saabsan tahay **ركانة** laftiisa oo haweentiis afuray.” Wuxuu yiri:

“Arrinkaanna waxaa lagu sheegay Xadiithka uu wariyay Cabdu Al Rizaaq\عبد الرزاق, iyo Abuu Daaud\أبو داود\ isla dariiqiisa, ayna ka wariyeen ibnu Jarriij\ابن جريج\ oo yiri:

“Mid ka mid ah dhasha Raafic Mawlaha Nabiga\رافع مولى النبي\ Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu Cikrimah\عكرمة\ iiga wariyay inuu ibnu Cabbaas\ابن عباس\ yiri:

“Cabdu Yaziid\يزيد\, Rukaanah\ركانة\ iyo walaalihiis aabohood wuxuu furay Ummu Rukaanah\أم ركانة\, Rukaanah\ركانة\ hooyadiis, wuxuuna guursaday haweeney u dhalatay Muzaynah\مزينة\ . Markaasay haweeneydaan waxay u timid Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ayna tiri:

“Waxba igama taro sidayan tintaanu wax ii tarin oo kale – oo ahayd tin ay madexeeda kasoo qabatay -, markaasuu kala furay labadoodaas.”

Markaasuu wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u yeeray Rukaanah\ركانة\ iyo walaalihiis.”

Markaasuu qisada wada xusay. Qisadana waxaa ka mid ah:

“Markaasuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu Cabdu Yaziid\عبد يزيد\ ku yiri:

“Fur”, waana haweenta Muzaynah\مزينة\ u dhalatay. Markaasuu furay.

Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ku yiri:

“Soo cesho haweentaadii ahayd Rukaanah\ركانة\ iyo walaalihiis hooyadood.”

Markaasuu wuxuu yiri:

“Rasuulka Ilaahayow – Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam – saddex dalaqo ayaan ku furay.”

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

“Waan ogsoonahay ee soo cesho.”

Abuu Daaud\أبو داود\ wuxuu yiri:

“Iyo Xadiithka Naafic bin Cujayrah\عجيرة بن نافع\ iyo Cabdu Allaahi bin Calii bin Yaziid bin Rukaanah\عبد الله بن علي بن يزيد بن ركانة\, waxaa wariyay aabihiis adeerkiis oo awoowihiiis ka wariyay inuu Rukaanah\ركانة\ haweentiisa saddex dalaqood ku furay, oo uu markaas Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dal dalqo ka dhigay: taas ayaa ka saxsan, maxaa yeelay ninka caruurtiisa iyo ehelkiisa ayaa dadka intiisa kale uga aqoon roon.

Wuxuu wariyay taas ka hor Xadiithka Rukaanah\ركانة\ , sidaan usoo tilmaannay markaan isaga ka warbixinaynay.

Laakiin hadduu Xadiithkaan ibnu Jurayj\ابن جريج\ uu ilaalsan yahay oo sax yahay, wax diidaya ma jiraan inay qisada furriinku dhawr goor dhacdo, waliba haddii la tix geliyo inay labada Xadiith rag kala duwan ay wariyeen.

Sheekha ibnu Jurayj\ابن جريج\ oo uu ku tilmaamay inuu yahay dhasha Abii Raafic\أبي رافع\, anigu ma aqaanno midkuu yahay.

Waana soo aragnay oo nasoo martay ka warbixinta Al Saa’ib ibn Cubayd bin Cabdu Yaziid\السائب بن عبيد بن عبد يزيد\ iyo in la qafaalay Maalinta Badar\يوم بدر\ uuna islaamay. Caruurtiisana ma arag meel looga hadlayo intaan ka ahayn riwaayaddaan leh: “Markaasuu u yeeray Rukaanah\ركانة\ iyo walaalihiis.”

Al Zubayr\الزبير wuxuu kitaabkiisa “Al Nasab\النسب” ku yiri:

“Cabdu Yaziid bin Haashim\عبد يزيد بن هاشم wuxuu dhalay Rukaanah\ركانة iyo Cujayr\عجبر iyo Cumayr\عمير iyo Cubayd\عبيد. Hooyadoodna waa Al Cajlah bintu Cajlaan\عجلة بنت عجلان oo u dhalatay Bani Sacd bin Layth bin Bakr bin Cabdu Manaaf bin Kinaanah\بني سعد بن ليث بن بكر بن عبد مناة بن كنانة.”

Hadday sidaas tahay Xadiithkaan waxaa ku sugan afar nin oo saxaabada ka mid ah oo kala ah (1) Cabdu Yaziid\عبد يزيد, iyo wiilkiisa (2) Cubayd\عبيد, iyo wiilkiisa (3) Al Saa’ib bin Cubayd\السائب بن عبيد, iyo wiilkiisa (4) Shaafic bin Al Saa’ib\شافع بن السائب. Mid walboo ka mid ahna waxaan warbixintiisa ku xusay waxa la wariyay oo isaga ku saabsan.” Waa intaas warka ibnu Xajar\ابن حجر Allaha raalli ka noqdee.

Cubayd bin Cabdu Yaziid bin Haashim bin Al Mudh-dhalib\عبيد بن عبد يزيد بن هاشم بن السائب المطلب

Al Xaafith ibnu Xajar\العسقلاني wuxuu kitaabkiisa saxaabada ka warbixinaya ee “Al Isaabah fii Tamyiizi Al Saxaabah\الإصوبة في تمييز الصحابة” mujalladka toddobaad bogga afartan, warbixinta tirsigeedu yahay shan kun saddex boqol iyo toddobaatan wuxuu ku yiri:

5370. عبيد بن عبد يزيد بن هاشم بن المطلب بن عبد مناف المطلبى.
قال الزبير ابن بكار: "أمه الشفاء بنت الأرقم بن نضلة بن هاشم بن عبد مناف. تقدم ذكره في ترجمة والده"

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

5370. Cubayd bin Cabdu Yaziid bin Haashim bin Al Mudh-dhalib bin Cabdu Manaaf Al Mudh-dhalibii\عبيد بن عبد يزيد بن هاشم بن المطلب بن عبد مناف المطلبى.
Al Zubayru ibnu Al Bakkaar\الزبير بن بكار wuxuu yiri:
“Hooyadiisna waa Al Shifaa’u bintu Al Arqam bin Nadlah bin Haashim bin Cabdu Manaaf\الشفاء بنت الأرقم بن نضلة بن هاشم بن عبد مناف.”
Warkiisana waxaan wax uga soo sheegnay markaan aabihiis kasoo warbixinnay.”Waa intaas warkiisu Allaha u naxariistee.

Al Saa’ib bin Cubayd bin Cabdu Yaziid bin Haashim bin Al Mudh-dhalib iyo Shaafic شافع بن السائب بن عبيد بن عبد يزيد بن هاشم بن المطلب جد الإمام الشافعي

3847. تقدم ذكره في ترجمة أبيه غير مسمى، وذكر الخطيب في "تاريخه" أنه سمع أبا الطيب طاهر بن عبد الله الطبري يقول: "شافع بن السائب الذي ينسب إليه الإمام الشافعي قد لقي النبي صلى الله عليه وسلم وهو مترعرع وأسلم أبوه يوم بدر." وسيأتي ذكر في ترجمة عبد يزيد والد جده. "انتهى.

Al Xaafith ibnu Xajar\العسقلاني wuxuu kitaabkiisa saxaabada ka warbixinaya ee “Al Isaabah fii Tamyiizi Al Saxaabah\الإصوبة في تمييز الصحابة” mujalladka lixaad

bogga laba iyo lixdan, warbixinta tirsigeedu yahay saddex kun sideed boqol toddoba iyo afartan wuxuu ku yiri:

“Xusiddiisu way nasoo martay markaan aabihiis ka warbixinnay, ayadoo aan isaga la magacaabin.

Al Khadhiibu\(\البغدادي) الخطيب wuxuu kitaabkiisa “تاريخ بغداد\Taariikhdiisa” ku wariyay inuu maqlay Abaa Dhaalib Dhaahir bin Cabdu Allaahi Al Dhabarii\(\الطبري) عبد الله الطبري oo leh: “الإمام الشافعي\الإمام شافع بن السائب, ahna midkuu ku abtirsado Al Imaam Al Shaaficii\(\الشافعي) شافع بن السائب wuxuu la kulmay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam isagoo markaas koray oo ilaa toban jir ah. Isaga iyo aabihiis waxay islaameen Maalinta Badar\(\يوم بدر) يوم بدر.”

Warbixintiisuna waxay noogu imaanaysaa markaan ka hadlaynno Cabdu Yaziid\(\عبد يزيد) عبد يزيد oo ah aabaha awoowihis dhalay.” Waa intaas warkiisu Allaha u naxariistee.

Al Saa'ib bin Cubayd bin Cabdu Yaziid\(\عبد يزيد) عبيد بن السائب iyo Shafic bin Al Saa'ib\(\الشافعي) شافع بن السائب Awowwayaalka Al Shaaficii\(\الشافعي) الشافعي

Al Imaam Al Bayhaqii\(\البيهقي) الإمام البيهقي wuxuu kitaabkiisa “مناقب الشافعي\(\الشافعي) مناقب الشافعي” bogga sideed iyo toddobaatan ku yiri:

وأخبرنا أبو عبد الله الحافظ، حدثنا أبو الفضل: محمد بن إبراهيم الهاشمي، حدثنا أحمد بن سلمة، قال:

"سمعت مسلم بن الحجاج يقول:

"عبد الله ابن السائب والي مكة صحابي".

الصحيح حديثه. وهو أخو الشافع بن السائب: جد محمد بن إدريس.

قال أحمد: هذا الحديث الذي أشار إليه مسلم بن الحجاج رحمه الله، هو حديث رواه ابن جريج عن محمد بن عباد بن جعفر عن أبي سلمة بن سفیان، وعبد الله بن عمرو بن العاص، وعبد الله بن المسيب العبادي، عن عبد الله بن السائب، قال:

"صلى النبي صلى الله عليه وسلم بمكة الصبح، فاستفتح بسورة المؤمنين، حتى إذا جاء ذكر موسى وهارون، أو ذكر عيسى - محمد بن عباد شك - أخذت النبي صلى الله عليه وسلم سعة. قال: فرقع، وابن السائب حاضر لذلك."

والسائب بن عبيد بن عبد يزيد: أبو عبد الله والشافع - أسر يوم بدر، وكان شبيها بالنبي صلى الله عليه وسلم، ثم أسلم."

أخبرنا أبو عبد الله الحافظ، حدثنا عبد الله بن محمد القاضي، حدثنا أبو جعفر: محمد بن عبد الرحمن، حدثنا أبو محمد: أحمد بن محمد بن عبد الله بن محمد بن العباس بن عثمان بن شافع، الشافعي، فقال:

"سمعت أبي يقول: اشتكى السائب بن عبيد بن عبد يزيد، قال: فقال عمر بن الخطاب رضي الله عنه: "أذهبوا بنا إلى السائب نعوذه؛ فإنه من مصاصة قريش. قال النبي صلى الله عليه وسلم، حيث أتى به وبعمه

العباس بن عبد المطلب:

"هذا أخي وأنا أخوه."

يعني السائب بن عبيد.

فالسائب بن عبيد بن عبد يزيد جد الشافعي رضي الله عنه: صحابي، وعبد الله بن السائب أخو شافع بن السائب: صحابي، وركانة بن عبد يزيد أخو عبيد بن عبد يزيد – الذي طلق امرأته البتة – صحابي.

ومن رهط الشافعي جماعة من التابعين وأتباعهم إلى عصره، كانوا علماء يروى عنهم، منهم نافع بن عجير بن عبد يزيد، وعبد الله بن علي بن السائب، وطلحة بن ركانة، ويزيد بن طلحة، والسائب بن يزيد بن ركانة، وعلي بن السائب، ومحمد بن علي بن يزيد بن ركانة، وأخوه عبد الله بن علي، والعباس ابن عثمان بن شافع، ومحمد بن علي بن شافع، ومحمد بن العباس، وعبد الله بن إدريس بن العباس، وإبراهيم بن محمد بن العباس، وأخوه عبد الله بن محمد ابن العباس؛ وغيرهم رحمهم الله. إنتهى كلام البيهقي رحمه الله.

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

“Waxaa noo warramay Abuu Cabdu Allaahi midka xaafithka الحافظ أبو عبد الله oo ka wariyay Abuu Al Fadl Muxammad bin Ibraahiim Al Haashimii محمد بن إبراهيم الهاشمي oo ka wariyay Axmad bin Salamah أحمد بن سلمة oo yiri: “waxaan maqlay Muslim bin Al Xajjaaj مسلم بن الحجاج oo leh:

“Cabdu Allaahi ibnu Al Saa’ib عبد الله ابن السائب, guddoomiyaha Makkah مكة, waa saxaabi.’ Waana mid xadiithkiisu saxiixa yahay. Guddoomiyahaanu waa walaalka la dhashay Shaafic bin Al Saa’ib, awoowaha Muxammad bin Idriis محمد بن إدريس السائب: جد محمد بن إدريس .

Axmad أحمد wuxuu yiri: Xadiithkaan uu Muslim bin Al Xajjaaj الحجاج wariyay, waa Xadiith uu wariyay ibnu Jurayj جرير kana wariyay Muxammad bin Cabbaad bin Jacfar بن محمد بن جعفر oo ka wariyay Abuu Salamah bin Sufyaan سفیان أبو سلمة iyo Cabdu Allaahi bin Camr bin Al Caas عمرو بن العاص عبد الله بن عمرو iyo Cabdu Allaahi bin Al Musayyib Al Caabidii عبيد الله بن السائب oo yiri: “Nabigaa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ku tukaday salaadda subax ilaa uu markaasu wuxuu ku bilaabay akhrinta Suuratu Al Mu’miniina المؤمنین سورة ilaa uu ka yimaado Aayadda ka hadlaysa Muusaa موسى iyo Haaruun هارون, ama Ciisaa عيسى – waxaana shakiyay Cabbaad عباد – ayaa Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waxaa qaaday qufac. Wuxuu yiri: markaasuu rukuucay, wiilka Al Saa’ib-na ابن السائب-na taas goob jog ayuu ka ahaa.”

Al Saa’ib bin Cubayd bin Cabda Yazii عبد يزيد, السائب بن عبيد بن عبد يزيد, Abuu Cabdu Allaahi أبو عبد الله iyo Shaafic شافع waxaa labadoodaba la qafaalay Maalinta Badar بدر, wuxuuna u ekaa Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Kaddibna wuu islaamay.”

Waxaa noo warramay Abuu Cabdu Allaahi al xaafith أبو عبد الله oo ka wariyay qaalliga Cabdu Allaahi bin Muxammad محمد القاضي عبد الله بن محمد oo ka wariyay Abuu Jacfar أبو جعفر oo ka wariyay Muxammad bin Cabdu Al Rraxmaan محمد بن عبد الرحمن oo ka wariyay Abuu Muxammad Axmad bin Muxammad bin Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Al Cabbaas bin Cuthmaan bin Shaafic أبو محمد أحمد بن محمد بن عبد الله بن محمد بن العباس بن عثمان بن شافع, wuxuuna yiri:

“Waxaan maqlay aabahay oo leh:

“waxaa xanuunsaday Al Saa’ib bin Cubayd bin Cabda Yaziid\زيد\ عبيد بن عباس, wuxuu yiri: markaasuu Cumar bin Al Khadh-dhaab\خطاب\ عمر بن Allaha raalli ka noqdee wuxuu yiri:

“أذهبوا بنا إلى السائب نعوذ؛ فإنه من مصاصة قريش. قال النبي صلى الله عليه وسلم، حيث أتى به
وبعمه العباس بن عبد المطلب:
“هذا أخي وأنا أخوه.”
يعني السائب بن عبيد.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ina keena aan soo booqanee Al Saa’ib\السائب\ , oo wuxuu ka mid yahay asalka iyo jirrida Quraysh\قریش\ Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam wuxuu yiri marka loo keenay isaga iyo adeerkiis Al Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib\المطلب\ عبيد بن العباس (Maalinta Badar\يوم بدر\):
“Midkaanu waa walaalkay, aniguna waxaan ahay walaalkiis”, uuna ka wado Al Saa’ib bin Cubayd\عبيد بن عبيد\ .

Marka Al Saa’ib bin Cubayd bin Cabda Yaziid\زيد\ awoowaha Al Shaaficii\الشافعي\ عبيد الله بن الله\ عبيد الله بن الشافعي\ Allaha raalli ka noqdee waa saxaabi. Sidoo kale Cabdu Allaahi bin Al Saa’ib\السائب\ شافع\ شافع بن السائب\ oo ah Shaafic bin Al Saa’ib\السائب\ oo ah Rukaanah bin Cabda Yaziid\زيد\ ركانة\ ركانة بن عبيد\ عبيد بن عبيد\ Yaziid\زيد\ , midka haweentiisa saddexda dalqadood ku furay, isaguna waa saxaabi.

Al Shaaficii\الشافعي\ tolkiisna waxaa ka mid ah koox Taabiciin\تابعين\ ah iyo Taabiciin taabiciin\تابع تابعين\ ilaa zamankiisa oo ahaa culummo, oo axaadiith laga wariyay. Waxaana ka mid ah Naafic bin Cujayr bin Cabda Yaziid\زيد\ , iyo Cabdu Allaahi bin Calii bin Al Saa’ib\السائب\ , iyo Dhalxah bin Rukaanah\ركانة\ , iyo Yaziid bin Dhalxah\طلحة\ , iyo Al Saa’ib bin Yaziid bin Rukaanah\ركانة\ , iyo Calii bin Al Saa’ib\السائب\ , iyo Muxammad bin Calii bin Yaziid bin Rukaanah\محمد بن عبيد\ , iyo Cabbaas ibnu Cuthmaan bin Shaafic\شافع\ , iyo Muxammad bin Calii bin Shaafic\محمد بن عبيد\ , iyo Cabbaas\عباس\ , iyo Cabdu Allaahi bin Idriis bin Al Cabbaas\إدريس\ , iyo Ibraahiim bin Muxammad bin Al Cabbaas\عبد العباس\ , iyo walaalkiis Cabdu Allaahi bin Muxammad\إبراهيم\ , iyo ayagaas ghayrkoodba Allaha u naxariistee.”

Waa intaas hadalka Al Bayhaqii\البهقي\ Allaha u naxariistee.

Wuxuu ibnu Xajar Al Casqalaanii\العسقلاني\ Al Isaabah fii Tamyiizi Al Saxaabah\الإصابة في تمييز الصحابة\ (juzka afaraad tirsiga saddex kun iyo sideetan ee bogga laba boqol iyo shan) ku yiri:

3080. "وذكر الخطيب البغدادي في ترجمة الشافعي بغير إسناد أن السائب أسلم يوم بدر: وكان صاحب راية بني هاشم مع المشركين، فأسر ففدى نفسه وأسلم.

وَرَوَى الْحَاكِمُ فِي مَنَاقِبِ الشَّافِعِيِّ، مِنْ طَرِيقِ إِيَّاسِ بْنِ مَعَاوِيَةَ، عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ، قَالَ: كَانَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ذَاتَ يَوْمٍ فِي فَسْطَاطٍ إِذْ جَاءَ السَّائِبُ بْنُ عُبَيْدٍ وَمَعَهُ ابْنُهُ، فَقَالَ:

"مَنْ سَعَادَةُ الْمَرْءِ أَنْ يَشْبَهَ أَبَاهُ."

ويقال: إن السائب هذا كان ممن يُشبهه النبي صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ.

وقال الزبير في كتاب "النسب": "وَدَّ عُبَيْدُ بْنُ عَبْدِ يَزِيدِ السَّائِبِ، وَكَانَ يَشْبَهُهُ بِالنَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ. وَأَسْرَ يَوْمَ بَدْرٍ.

وذكر ابن الكلبي أنه كان يشبهه بالنبي صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ. "انتهى كلام ابن حجر رحمه الله.

وَأَخْرَجَ الْحَاكِمُ فِي "مَنَاقِبِ الشَّافِعِيِّ" مِنْ طَرِيقِ أَبِي مُحَمَّدٍ أَحْمَدَ بْنِ مُحَمَّدِ بْنِ عَبْدِ اللَّهِ ابْنِ مُحَمَّدِ بْنِ الْعَبَّاسِ بْنِ عَثْمَانَ بْنِ شَافِعِ بْنِ السَّائِبِ، قَالَ: سَمِعْتُ أَبِي يَقُولُ: اشْتَكَى السَّائِبُ بْنُ عُبَيْدٍ، فَقَالَ عَمْرٌ: "أَذْهَبُوا بِنَا نَعُودُ السَّائِبِ بْنِ عُبَيْدٍ، فَإِنَّهُ مِنْ مُصَاصَةِ قَرِيشٍ، قَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ حِينَ أَتَى بِهِ وَبِعَمَهُ الْعَبَّاسُ:

"هَذَا أَخِي."

قال البيهقي بعد تخريجه: فالسائب بن عبيد صحابي، وابنه شافع صحابي، وأخوه عبد الله بن السائب صحابي. وَقَالَ زَكْرِيَّا السَّاجِي فِي "مَنَاقِبِ الشَّافِعِيِّ": سَمِعْتُ أَحْمَدَ بْنَ مُحَمَّدِ بْنِ حَمِيدِ الْعَدَوِيِّ النَّسَابَةَ يَقُولُ: "أُمُّ السَّائِبِ بْنِ عُبَيْدِ الشَّفَاءِ بِنْتُ الْأَرْقَمِ بْنِ هَاشِمِ بْنِ عَبْدِ مَنَافٍ، وَأُمُّ الشَّفَاءِ هَذِهِ خَالِدَةُ بِنْتُ أَسَدِ بْنِ هَاشِمِ خَالَةَ عَلِيِّ بْنِ أَبِي طَالِبٍ وَإِخْوَتِهِ.

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Al Khadhiibu Al Baghdaadiي الخطيب البغدادي uxuu ka warbixinta Al Shaaficiiالشافعي, silsilad la'aan ku wariyay inuu Al Saa'ibالسائب islaamay maalinta Badar\يوم بدر, isagaana siday calanka Bani Haashimهاشم isagoo la jira gaalada. Markaasaa la qafaalay oo uu madaxiisa xoolo ku furtay.

Al Xaakim\الحاكم wuxuu ku wariyay manaaqibta Al Shaaficiiالشافعي, kana wariyay Iyaas bin Mucaawiyahيعاوية oo ka wariyay Anas bin Maalikأنس بن مالك oo yiri:

"Maalin ayuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ku sugnaa khaymad, markaasaa waxaa u yimid Al Saa'ib bin Cubaydعبيد السائب oo uu wiilkiisu la socdo oo uu ku yiri:

"مَنْ سَعَادَةُ الْمَرْءِ أَنْ يَشْبَهَ أَبَاهُ."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Raaxada nafta waxaa ka mid ah inuu ninku aabihiis u egyahay."

Waxaana la yiraahdaa inuu Al Saa'ibالسائب ka mid ahaa kuwa Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u ekaa.

Al Zubayr\الزبير wuxuu kitaabkiisa “Al Nasab\النسب” ku yiri:

"Cubayd bin Cabda Yaziid\عبيد بن عبد يزيد wuxuu dhalay Al Saa'ib\السائب , oo u ekaa Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Waxaana la qafaalay Maalinta Badar\يوم بدر.

Ibnu Al Kallbi\ابن الكلبي wuxuu wariyay inuu u ekaa Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.” Waa intaas warka ibnu Xajar\ابن حجر Allaha u naxariistee.

Al Xaakim\الحاكم wuxuu kitaabkiisa "Manaaqibu Al Shaaficii\مناقب الشافعي" uga wariyay Abii Muxammad Axmad bin Muxammad bin Cabdu Allaahi ibni Muxammad bin Al Cabbaas bin Cuthmaan bin Shaafic bin Al Saa'ib\أبي محمد أحمد بن محمد بن عبد الله ابن محمد بن العباس بن عثمان بن شافع بن السائب , inuu yiri:

“waxaan maqlay aabahay oo leh: “waxaa xanuunsaday Al Saa'ib bin Cubayd\السائب بن عبيد , markaasuu Cumar\عمر wuxuu yiri:

“Ina keena aan soo booqanee Al Saa'ib bin Cubayd\السائب بن عبيد , oo wuxuu ka mid yahay asalka iyo jirrida Quraysh\قريش. Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam wuxuu yiri marka loo keenay isaga iyo adeerkiis Al Cabbaas\العباس (Maalinta Badar\يوم بدر):

“Kani waa walaalkay.”

Al Bayhaqii\البيهقي kaddib markuu Xadiithkaan wariyay wuxuu yiri:

“Al Saa'ib bin Cubayd\عبيد بن السائب waa saxaabi. Wiilkiisa Shaafic\شافع waa saxaabi. Walaalkiis Cabdu Allaahi bin Al Saa'ib\عبد الله بن السائب waa saxaabii.”

Zakariyaa Al Saajii\الزكريا wuxuu kitaabkiisa “Manaaqibu Al Shaaficii\مناقب الشافعي” ku yiri: “waxaan maqlay Axmad bin Muxammad bin Xumayd Al Cadawii\احمد بن محمد بن حميد العدوي midka cilmiga nasabka ku xeel dheer oo leh:

“Al Saa'ib bin Cubayd\عبيد بن السائب hooyadiis waa Al Shifaa' bintu Al Arqam bin Haashim bin Cabdu Manaaf\الشفاء بنت الأرقم بن هاشم بن عبد مناف. Al Shifaa' –daanna\الشفاء hooyadeedna Khaalidah bintu Asad bin Haashim\خالدة بنت أسد بن هاشم , habaryarta Cali bin Abii Dhaalib\علي بن أبي طالب iyo walaalihis.”

Camr bin Cabdi Manaaf: waana Haashim\عمرو بن عبد مناف: هاشم

Awoowaha labaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Haashim bin Cabdi Manaaf bin Qusayyi\هاشم بن عبد مناف بن قصي .

Cabdi Manaaf\عبد مناف wuxuu guursaday haweeneyda la yiraahdo Caatikatu bintu Murrata bin Hilaal bin Faalij bin Thakwaan\عاتكة بنت مرة بن هلال بن ذكوان (waa thaalka dhibicda kor ku leh oo deelka ku xigah), markaasey waxay u dhashay labo wiil oo mataano ah, oo la kala bixiyay Camr\عمرو (oo ah Haashim\هاشم) iyo Cabdu Shams\عبد شمس.

Markay labadaas wiil dhalanayeen cagta Haashim\هاشم , oo soo horreeyey, ayaa waxay ku dhegganayd wajiga Cabdu Shams\عبد شمس. Markaasaa takhtar loo keenay mindi ku kala fujiyay, halkaasoo uu labadooduba dhiig ka baxay. Markaasey waxay dadkii yiraahdeen, oo ay hoos ugu nuunaaseen:

"Wiilashadooda ayaa dhiig dhex mari doonaa."

Magaca Haashim\هاشم waa koofaar waa dambe loo bixin doono, magaciisuse waa Camr\عمرو.
 Magaca Camr\عمرو . afar macne ayuu leeyahay oo lagu sheegay, oo kala ah:
 (Kow) Cumriga qofka, oo ah intuu adduunkaan ku noolyahay, ninkana loogu bixiyo yididiilo laga qabo inuu waaro oo uu wax badan noolaado.
 (Laba) Hilibka cirridka la xiriira oo labadii iligba dhexdooda ku yaalla,
 (Saddex) Darafta ama afka gacanta khamiiska ama shaatiga.
 (Afar) Dhegaha dahab ama wax kale ka samaysan oo dhegaha qurux raadin loo gashado. Macne shanaadna waa timirta sonkorta badan oo macaan.

Camr bin Cabdi Manaaf\عمرو بن عبد مناف wuxuu koray isagoo uu wajigiisa nuur ka kaahayo, oo qofkii arkaba soo jiidanaya.

Markuu waynaaday, Camr\عمرو wuxuu guursaday haweeneyda la yiraahdo Qaylata bintu Caamir bin Maalik Al Khuzaacii\قبيلة بنت عامر بن مالك الخزاعي, waxayna u dhashay wiil loo bixiyay Asad\أسد.
 Waxaa waqtigaas Quraysh\قریش haleeshay jiilaal adag iyo gaajo, markaasuu ninkii caruurtiisa wuxuu siiyo u waaya, gurigiisa ayuu hoosta ka soo xiran jiray, halkaas ayayna ku jiri jireen ilaa ay gaajo uga dhintaan, fogaansho ay ka fogaanayaa inay dad baryaan oo ay wax ha nala siiyo yiraahdaan. Ficiilkaasna waxaa la oran jiray Al Ictiqaadu\الإعتقاد.

Asad bin Haashim\أسد بن هاشم wuxuu lahaa wiil ay isku fac yihiin oo ay saaxiibna yihiin oo reer Bani Makhzuum\مخزوم u dhashay, uuna jeclaa, ayna wada cayaari jireen.
 Markaasuu Asad\أسد maalin maalmaha ka mid ah wuxuu arkay saaxiibkiis oo ooyaya.
 Markaasuu wuxuu ku yiri:
 "Maxaa kaa boohinaya?"
 Saaxiibkiis wuxuu ku yiri:
 "Waxaan dooneynnaa inaad ictiqaadno."
 Markaasuu Asad\أسد intuu naxay oo uu cabsaday, oo uu arkay saaxiibkiis oo gaajo u dhimanaya, ayuu soo orday oo uu hooyadiis u yimid, isagoo isaga laftiisu ooyaya. Markaasey weydiisay oo waxay tiri:
 "Maxaa kugu dhacay?"
 Wuxuu yiri:
 "Saaxiibkeyga reer Bani Makhzuum\مخزوم reerkiisa ayaa doonaya inay ictiqaadaan."

Markaasey hooyadiis waxay u dhiibtay bur iyo subag, kuwaasoo ay ayaamo ku noolaayeen.
 Markaasuu Asad\أسد, hadana, maalin kale saaxiibkiis oo ooyaya arkay, wuxuuna ku yiri: "Maxaa kugu dhacay?"
 Saaxiibkiis wuxuu yiri:
 "Reerkeyga ayaa doonaya inay ictiqaadaan."

Markaasuu Asad\أسد aabihiis Camr\عمرو u yimid oo uu u sheegay dhibaataada iyo gaajada uu dadku qabo. Markaasuu Camr\عمرو soo kacay oo uu Quraysh\قریش inta shiriyay u khudbeeyey, wuxuuna yiri:

"إنكم أجديتم جدبا تقولون فيه وتذلون، وأنتم أهل حرم الله وأشرف ولد آدم والناس لكم تبعاً."

Oo macnihiisu yahay:

"Quraysh\قریش waxaa idinku dhacday abaar xun oo idin laysay, idinna dullaysay, adinkoo ah ehelka Xaramka Ilaahay iyo kuwa u sharaf badan intuu Aadan\ادم dhalay, dadkoo idilna adinkay idin raacsan yihiin oo ay idinka dambeeyaan."

Waxay yiraahdeen:

"Annaguna adigaan ku raacsannahay oo aan kaa dambeynnaa, taasoo ayan labana isku khilaafsanayn."

Markaasuu wuxuu u qorsheeyey oo uu u jideeyey labada Rixlo\رحلة ama Safar: Rixlata Al Shitaa'i\رحلة الشتاء (Safarka Gu'ga ama qaboobaha) oo ay Yaman\يمن iyo xagga Koofur (iyo arliga xabashada) ganacsiga ugu safraan, iyo Rixlata Al Sayfi\رحلة الصيف (waa saad), oo ah Safarka Jilaalka oo ay xagga Waqooyi (Shaam\الشام, iyo Ciraaq\عراق iyo Iiraan\إيران iyo Masar\مصر) ganacsi ugu safraan.

Camr\عمرو faa'iidada ganacsigaas laga helo wuxuu ugu wada qaybin jiray kuwa hodanka ah iyo kuwa saboolka ahba si siman.

Camr\عمرو wuxuu Heshiis Saaxiibtinnimo iyo Nabadgelyo iyo Ganacsi la galay Boqorka Shaam\الشام oo la isku yiraahdo dalalka hadda la kala yiraahdo Siiriya\سورية iyo Falasdiin\فلسطين, iyo Urdun\أردن iyo Lubnaan\لبنان, oo ay Dimishiq\دمشق (magacaasna loogu bixiyay ayadoo uu degay ninka la yiraahdo Dmishiqu bin Namruuth\دمشق بن عمرو, oo ah wiilkuu dhalay boqorkii gaalka ahaa ee Baabil\بابل oo Nabi Ibraahiim\إبراهيم Calayhissalaamu dabka ku tuuray, oo intuu islaamay Nabiga soo raacay markuu arliga Ciraaq\عراق kasoo baxay, oo markuu Nabigu magaaladaas Dimishiq\دمشق furtay oo ay islaantay, isagu halkaas degey, oo magaaladiiba isaga loogu magac daray. Runtana Rabbi ayaa og) caasimadda u ahayd, inta kalena ay gobollo u ahaayeen.

Camr\عمرو walaalkiis Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf\عبد شمس بن عبد مناف wuxuu heshiis midkaas la mid ah la galay boqorka xabashada Al Najaashiyyi\النجاشي. Walaalkiis labaad oo ahaa Al Mudh-dhalib bin Cabdi Manaaf\المطلب بن عبد مناف wuxuu heshiiskaas oo kale la galay Boqorka Ximyar\حمير ee Yaman\يمن. Walaakiisa saddexaad oo ahaa Nawfal bin Cabdi Manaaf\نوفل بن عبد مناف wuxuu isaguna heshiis midkaas la mid la galay Boqorka Ciraaq\عراق iyo Iiraan\إيران. Markaasaa waxaa afartaas nin oo walaalaha ah oo ilmo Cabdi Manaaf\عبد مناف ah loogu yeeray "Al Tujjaaru\التجار" oo ah ganacsatada.

Sarraynta afarta nin oo ilmo Cabdu Manaaf\عبد مناف ah

Markaasey Qurayshi\قریش afartaas nin oo ilmo Cabdi Manaaf\عبد مناف ah ku lug darsatay, oo ay ganacsi iyo nolol cusub galeen oo heleen. Ilmo Cabdi Manaaf\عبد مناف aad ayaa Makkata Al Mukarramati\مكة المكرمة looga jeclaaday, makaankooduna uu ku waynaaday. Waaba ayada uu gabayaagu yiri:

1. يا أيها الرجل المحل رحله || هلا نزلت بآل عبد مناف
2. الأخذون العهد من آفاقها || والراحلون لرحلة الإيلاف
3. والرائشون وليس يوجد رائش || والقائلون هلم للأضياف
4. والخالطون غنيهم بفقيرهم || حتى يصير غنيهم كالكاف.

"1. Yaa ayyuhaa al rajulu al muxillu raxlahu
Halaa nazalta bi Aali Cabdi Manaafi.
2. Al Aakhithuuna al cahda min aafaaqihaa
Wa al raaxiluuna li rixlati al iilaafi.
3. Wa al raa'ishuuna wa laysa yuujaadu raa'ishu
Wa al qaa'iluuna halumma lil adyaafi.
4. Wa al khaalidhuuna ghaniyyahum bi faqiirihim
Xattaa yasiira ghaniyyuhum ka al kaafi."

Gabayga macnihiisa waxaa weeye:

"1. Ninyahow (musaafirka ah oo) alaabtiisa ratiga kasoo dejinayow
Maad ku degtid reer Aali Cabdi Manaaf\ **آل عبد مناف**.
2. Waana kuwa heshiisyada adduunka la soo galay
Una safra Safarka heshiiska lagu galay oo la caadeystay.
3. Waana kuwa dadka biyaha waraabiya ayadoo uusan waraabiye jirin
Waana kuwa yiraahda: kaalaya aan martida u tagnee.
4. Waana kuwa hodankooda iyo saboolka isku dheeha
Ilaa uu hodankoodu uu sida midka in ku filan haysta oo kale noqdo.

Kitaabka “Ansaabu Al Shraafi\ **أنساب الأشراف**” iyo ghayrkisba waxay wariyeen inay Haashim
هاشم, Al Mudh-dhalib **المطلب** iyo Cabdu Shams **عبد شمس** isku hooyo yihiin, hooyadoodna ay
ahayd wuxuuna yiri:

122. **عبد مناف**, سوى **هاشم**, عبد شمس بن عبد مناف، **والمطلب** ويدعى **“الفيض”**، وفيه يقول مطرود
الخراعي حين مات:
قد سغب الحجيج بعد المطلب بعد الجفان والشراب المنتعب
وأم **هاشم** وعبد شمس **والمطلب** عاتكة بنت مرة بن هلال بن فالج بن ذكوان بن ثعلبة بن بهثة بن سليم بن منصور.
ونوفل بن عبد مناف، وأبو عمرو وإسمه عبید درج، وامهما واقدة بنت أبي عدي، من بني مازن بن صعصعة ابن معاوية.
وكان يقال **لهاشم والمطلب “البدران”**

Cabdu Manaaf **عبد مناف** wuxuu dhalay Haashim, **هاشم** sokadiis, Cabdu Shams bin Cabdu
Manaaf **عبد مناف**, Al Mudh-dhalib **المطلب** oo la yiraahdo “Al Faydu **الفيض**”, uuna
Madhruud Al Khuzaacii **مطرود الخزاعي** ka yiri markuu dhimashadiisa maqlay:

Xujaydii waa gaajooddeen Al Mudh-dhalib dabadiis // Kaddib markuu siin jireen xeerooyin cunno
ka buuxdo iyo wax la cabboo oo u badan sida durdurka oo kale.

Haashim **هاشم** iyo Cabdu Shams **عبد شمس** iyo Al Mudh-dhalib **المطلب** hooyadood waa Caatikah
bintu Murrāh bin Hilaal bin Faalij bin Thakwaan bin Thaclabah bin Bahthah bin Sulaym bin

Mansuur منصور . Nawfal bin Cabdu Manaaf مناف iyo Abu Camr عمرو , magaciisuna waa Cubayd عبيد , ciribna ma reebin. Labadaanna hooyadood waa Waaqidah bintu Abii Cadiyy, una dhalatay Bani Maazin bin Sacsacah ibn Mucaawiyah معاوية ابن صعصعة , من بني مازن بن صعصعة .

Haashim هاشم iyo Mudhalib المطلب waxaa labadooda la isku yiraahdaa “Al Badraani البدراني” oo ah “Labada dayax oo nuuraya”.

قريش\رحلة الشتاء والصيف\Labada Safar

Qurayshi\قريش waxay ahayd ganacsato, badeecadaha adduunka ka ganacsata, kuwa Bariga laga keeno sida Hindiya iyo Shiinaha iyo dalalka dhinacaas ka jira; kuwa Galbeedka laga keeno sida Masar\مصر iyo dalalka qorrax u dhaca ka xiga; kuwa Koofur laga keeno sida dalka Soomaaliya iyo arliga xabashada iyo Afrika iyo kuwa Waqooyiga laga keeno sida Shaam\الشام , Ciraaq\عراق, Iraan\إيران iyo Yurub.

Qurayshi\قريش waxay xilliga kulaylaha ganacsi ugu safri jirtay Waqooyiga, oo uu arligaasu kulul yahay, oo waxay mar walba isku beegi jireen xilliga uu dalkaasi uusan qaboobayn, uuse jawigu diirran yahay. Xilliga qaboobahana waxay u safri jireen Koofur iyo dalka Yaman\يمن.

Yaman\يمن . waxay kasoo gadan jireen, gaar ahaan magaalada Cadan\عدن, badeecadaha laga keeno dalalka Bariga ee Hindiya, Shiinaha iyo kuwa Koofureed ee Soomaaliya iyo Afrika. Markaasey intii looga baahan yahayna waxay kusii gadi jireen Makkah Al Mukarramah مكة المكرمة, inta kalena waxay ganacsi u gayn jireen dalalka Waqooyiga iyo Galbeedka ka xiga, sida Masar\مصر, Yurub, Shaam\الشام, Ciraaq\عراق, Iraan\إيران, Roomaanka, Griigga, iwm.

Cadan\عدن waxay weligeed ahaan jirtay xarun badeecadaha Carabta, Afrika iyo Aasiya lagu kala gaddisto. Waagaas Yurub waxba ma ayan ahayn, oo xadaarad, iyo warshado iyo cilmi iyo badeecado la gato midna ma lahayn.

Safarrada Quraysheed\قريش waxaa loo agaasimi jiray si heer sare ah, waxayna madaxdoodu u maareyn jireen sidatan: qofka reer Makkah\مكة ah, iyo Dhaa'ifba\الطائف, oo doonaya inuu safarkaas ka qayb galo oo ganacsado, wuxuu lacag ama badeecadda uu doonayo inuu ka ganacsado u dhiibi jiray hoggaamiyaha Safarkaas, oo ma ayan ahayn laga maarmaan inuu isaga laftiisu socdaalo oo uu Safarkaas raaco.

Badeecadaha ay reer Makkah\مكة dalalka kale u iib gayn jireen waxaa ka mid ahaa dahabka iyo qalinka oo arligooda ilaa maanta aad ugu badan, oo buuro dhan oo dahab ah ayaa ku yaalla.

Waxay sidoo kale ka ganacsan jireen haragaha iyo saamaha iyo badeecado ay dalal kale ka keeneen. Mar walba waxaa safarkaas hoggaamin jirey nin madaxdooda ka mid ah.

Badeecadahaas waxaa la saari jiray oo lagu rari jiray awr, ayadoo uu geelu ahaa gaadiidka waagaas. Waxaa garawaantaas lagu dari jiray, oo burcadda iyo tuugada dariiqyada u istaagta ka ilaalin jiray rag hubaysan oo qabaa'il kale laga soo ijaartay, shaqadooduna ayba ahayd ilaalinta garawaanta.

Waxaa kaloo raaci jiray ragga reer Makkah\مكة oo markaas safarkaas ka qayb gelaya. Safar walba wuxuu ka koobnaa boqollaalo ama kumannaan rati oo raran iyo boqollaalo rag ah oo hubaysan. Ilahayna, Subxaanahu wa Tacaalaa\الله سبحانه وتعالى, wuxuuba labadaas Safar kusoo dejiyay Suurad Quraanka Kariimka ah ka mid ah oo Suuratu Quraysh\سورة قريش ah, uuna Cazza wa Jalla\عز وجل ku yiri:

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ. لِإِيلَافِ قُرَيْشٍ (1) إِيْلَافِهِمْ رِحْلَةَ الشِّتَاءِ وَالصَّيْفِ (2) فَلْيَعْبُدُوا رَبَّ هَذَا الْبَيْتِ (3) الَّذِي أَطْعَمَهُمْ مِنْ جُوعٍ وَأَمَّنَّهُمْ مِنْ خَوْفٍ (4)

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Li iilaafi Qurayshin(1)Iilaafihim rixlata al sh-shitaa'i wa al ssayfi(2)Fal yacbuduu Rabba haathaa Al Bayti(3) Allathii adhcamahum min juucin wa aamanahum min khawfin(4)"

Suuradda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi الرحيم الرحمن . بسم الله الرحيم الرحيم (Nimadeyda aan ugu nicmeeyey) Quraysh\قريش oo ah caadeysigooda ay jideysteen(1)Ay ka caado yeesheen Safarka gu'ga iyo Jiilaaka darteed(2)Ee ha caabudaan Rabbiga Baytkaan (oo yeeyan caabudin asnaam aan u nicmayn)(3)Ahna Rabbiga ka quudiyay gaajo, kana aamin geliyay cabsi(4)".

Al Suhaylii\السهيلى wuxuu yiri:

"Iilaaf\إيلاف wuxuu ka yimid aliftual shay'a\ألفت الشيء oo ah waa bilaabay oo jideeyey, waxaana jira tafsiir taas uga haboon oo ah: safarku waa cad cathaab ah, markaaseyan naftu jeclayn, oo naftu waxay jeceshay inay safarka ka harto oo ay ehelkeeda la joogto ayna gurigeeda joogto. Marka: laa ta'lafuhu al nafsu\لا تألفه النفس, oo ah naftu ma jecla ama kama caado yeelato oo safarka uma barato.

Al Harawii\الهروي wuxuu yiri: "iilaaf\إيلاف macnihiisu waa xarig, xargahaasoo ah heshiisyadii ka dhexeeyey Quraysh\قريش iyo Boqorrada Cajamka ayadoo uu Haashim\هاشم heshiis la lahaa Boqorka Shaam\الشام, Al Mudh-dhalibna\المطلب yu'aalifu oo uu heshiis la lahaa Boqorka Faaris (Ciraq\عراق iyo Iraan\إيران), labada kalena uu midkood Boqorka Masar\مصر, kan kalena Boqorka al xabashah, kuwaan damboo kala ah Cabdi Shams\عبد شمس iyo Nawfal\نوفال, oo yu'aalifu macneheedu waxaa weeye, ayuu yiri: yucaahidu wa yusaalixu\يعاهدوا ويصالحوا (waa saad)(oo ah waa la heshiyyay oo heshiisna waa la galay, nabadgelyana waa kula heshiyyay)". Waa intaas warkiisu.

Markii la gaaray xilliga Xajka, ayuu Camr bin Cabdi Manaaf\عمر بن عبد مناف Quraysh\قريش shiriyay, una khudbeeyey, wuxuuna ku yiri:

"يا معشر قريش إنكم سادة العرب، أحسنها وجوها وأعظمها أحلاما وأوسط العرب أنسابا وأقرب العرب إلى العرب أرحاما. يا معشر قريش إنكم جيران بيت الله أكرمكم الله بولايته وخصكم بجواره دون بني إسماعيل، وإنكم يأتكم زوار الله يعظمون بيته فهم أضيافه، وأحق من أكرم أضياف الله أنتم، فأكرموا ضيفه وزواره فإنهم يأتون شعنا غبرا من كل بلد على ضوامر كالفدح، فأكرموا ضيفه وزوار بيته، فورب هذه البنية (الكعبة) لو كان لي مال يحتمل ذلك لكفيتكموه، وأنا مخرج من طيب مالي وحلالي ما لم يقطع فيه رحم ولم يؤخذ بظلم ولم يدخل فيه حرام.

فمن شاء منكم أن يفعل مثل ذلك فعل. وأسألكم بحرمة هذا البيت أن لا يخرج رجل منكم من ماله لكرامة زوار بيت الله وتقويتهم إلا طيبا لم يؤخذ ظلما ولم يقطع فيه رحم ولم يؤخذ غصبا."

Oo macnihiisu yahay:

Al Xumaydii\الحميدي wuxuu yiri: "Al Shaaficii\الشافعي wuxuu ahaa midka bil walba lixdan goor Quraankoo idil wada akhriya", waana maalintiina mar, habeenkiina mar.

وقال حرمة: "سمعت الشافعي يقول:

"وددت أن كل علم أعلمه تعلمه الناس أوجر عليه ولا يحمدونني."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Xarmalah\حرمة wuxuu yiri: "waxaan maqlay Al Shaaficii\الشافعي oo leh:

"Waxaan jeclaan lahaa inuu dadku barto dhammaan cilmiga aan anigu aqaan, oo ajar la iga siiyo, axadkoodna uusan igu mahdin."

وقال أحمد بن حنبل رحمه الله: "كأن الله تعالى قد جمع في الشافعي كل خير."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Axmad bin Xanbal\أحمد بن حنبل Allaha u naxariistee wuxuu yiri:

"Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى wuxuu u kulmiyay Al Shaaficii\الشافعي oo wada siiyay khayr oo idil."

وقال الشافعي رحمه الله:

"الظرف الوقوف مع الحق حيث وقف."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Al Shaaficii\الشافعي Allaha u naxariistee wuxuu yiri:

"Caqligu wuxuu ku jiraa oo waxaa caqli leh qofka xaq dul istaaga meeshuu istaagaba."

وقال:

"ما كذبت قط ولا حلفت بالله تعالى صادقا ولا كاذبا."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Al Shaaficii\الشافعي wuxuu yiri:

"Waligay been ma sheegin, Ilaahay Tacaalaana uguma dhaaran run iyo been toona."

وقال:

"ما تركت غسل الجمعة في برد ولا سفر ولا غيره."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Kama tegin qubayska maalinta jimce ha qaboobaato maalintu hadday doonto, ama aan socdaal ku jiro iyo intaas ghayrkoodba."

وقال:

"ما شبع منذ ست عشرة سنة إلا شبعة طرحتها من ساعتى"، وفي رواية: "من عشرين سنة."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Tan iyo shan iyo toban sano cunno kama dhergin intaan mar ka ahayn, markaasna isla markiiba waa soo matagay.” Riwaayad kalena waxay warisay inuu yiri: “labaatan sano.”

وقال: "من لم تعزه التقوى فلا عز له."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Qofkayan ka dhawrsashada Ilaahay ayan cizzi siin – waa xoogee – kaasu cizzi ma laha.”

وقال: "ما فزعت من فقر قط."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Waligay faqri – waa saboolnimee – kama baqin.”

وقال:

"طلب فضول الدنيا عقوبة عاقب الله بها أهل التوحيد."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Raadsashada wax dheeri ah ee adduunkaan waa ciqaab uu Ilaahay ku ciqaabay dadka midnimadiisa aaminsan oo muslinka ah.”

وقيل للشافعي:

"ما لك تدمن امساك العصا ولست بضعيف؟"

فقال:

"لأذكر أني مسافر"، اعني في الدنيا."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Al Shaaficii الشافعي ayaa waxaa lagu yiri:

“Maxaad mar walba ul u sidataa adigoo aan tag darrayn?”

Markaasuu wuxuu yiri:

“Inaan xusuusto inaan adduunkaan musaafir ku ahay.”

وقال:

"من شهد الضعف في نفسه نال الإستقامة."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Qofka naftiisa tag darro ka dareema, wuxuu hanta istiqamada oo ah toosnaanta suuban.”

وقال:

"من غلبته شدة الشهوة للدينيا لزمته العبودية لأهلها، ومن رضي بالقتوع زال عنه الخضوع."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Qofkay ka adkaato doonidda adduunku wuxuu addoon u noqdaa oo laazimta dadkeeda, qofkase raalli ku noqda qanaacada intuu Ilaahay u qoondeeyey oo siiyay waxaa ka zuusha addoonnimadaas.”

وقال:

"خير الدنيا والآخرة في خمس خصال: (1) غنى النفس، (2) وكف الأذى، (3) ومكسب الحلال، (4) ولباس التقوى، (5) والثقة بالله تعالى على كل حال."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

:Khayrka adduun iyo midka aakhiraba waxay ku sugan yihiin shan arrimood: (1) inuu qofku naftiisa hodan ka yahay, xattaa hadduusan dhururuq haysan, (2) Dhibka oo laga reebo, (3) xoolahana inuu si xalaal ah ku kasbado, (4) inuu taqwada oo ah cabsida Ilaahay Tacaalaa huwan yahay, (5) Inuu Ilaahay Tacaalaa **الله تعالى** ku kalsoon yahay xaalkiisu siduu doono ha ahaadee.

وقال للربيع:

"عليك بالزهد."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Al Shaaficii **الشافعي** wuxuu Al Rabiic\الربيع ku yiri:

“Adduunkaan zaahid ku noqoto oo ka kaaftoon.”

وقال:

"أنفع الدخائر التقوى وأشرها العدوان."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Waxa la kaysado waxaa ugu waxtar badan taqwada oo ah cabsida Ilaahay, waxaana ugu xun oo ugu shar badan colaadda.”

وقال:

"من أحب أن يفتح الله قلبه أو ينوره، فعليه بترك الكلام فيما لا يعنيه، واجتناب المعاصي، ويكون له خبيثة فيما بينه وبين الله تعالى من عمل"، وفي رواية: "فعليه بالخلوة، وقلة الأكل وترك مخالفة السفهاء، وبغض أهل العلم الذين ليس معهم أنصاف ولا أدب."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Qofka jecel inuu Ilaahay qalbiga u furo oo kormariyo ama uu nuur u geliyo waa inuusan ka hadlin waxaan isaga ku saabsanayn, macaasidana uu ka fogaado, ayna isaga iyo Ilaahay Tacaalaa **الله تعالى** u dhexeyso wax isaga u qarsoon oo camal suuban ah." Riwaayadna sidan ayay warisay: "Waa inuu kaliyoobaa oo uusan dadka dhex gelin, cunnadana yaraystaa, uuna ka fogaado khilaafidda kuwa maangaabta ah, uuna necbaadaa kuwa cilmiga leh aanse cadaalad iyo adab toona lahayn."

وقال:

"يا ربيع لا تتكلم فيما لا يعينك، فإنك إذا تكلمت بالكلمة ملكتك ولم تملكها."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Rabiicow **الربيع** ha ka hadlin waxaan ku khusayn, oo haddaad kalimada ku hadashid ayadaa ku leh ee adigu ma lihid."

وقال ليونس بن عبد الأعلى:

"لو اجتهدت كل الجهد على أن ترضى الناس كلهم فلا سبيل، فإخلص عملك ونيتك لله عز وجل."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Hadaad dadaal kasta u dadaashid inaad dadkoo idil wada raalli gelisid gaari maysid, marka camalkaaga iyo niyadaada khaalis uga dhig Ilaahay Cazza wa Jalla **الله عز وجل**."

وقال:

"لا يعرف الرياء مخلص."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Qofka mukhliska ah is tustus ma yaqaanno."

وقال:

"لو أوصى رجل بشيء لأعقل الناس صرف إلى الزهاد."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Hadduu nin xoolo ka dardaarmo, midka dadka ugu caqli badan wuxuu siin lahaa zuhaadda, ahna kuwa adduunkaanba ka kaaftoomay."

وقال:

"سياسة الناس أشد من سياسة الدواب."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Agaasinka dadku waa ka dhib badan yahay agaasimidda xoolaha."

وقال:

"العاقل من عقله عقله عن كل مذموم."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Caaqil waxaa ah ninkuu caqligiisu ka dabro oo ka celiyo waxa eedeyn iyo ceeb usoo jiidaya oo idil."

وقال:

"لو علمت أن شرب الماء البارد ينقص من مروعتي ما شربته."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Haddaan ogaan lahaa inay kabbo biyo ah naaqusin lahayd dadnimadayda iyo wanaagayga ma cabbeen."

وقال:

"للمروءة أربعة أركان: (1) حسن الخلق، (2) والسخاء، (3) والتواضع، (4) والنسك."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

"Fiicnaantu, ama gobannimadu waxay leedahay afar tiir: (1) Khuluq wanaagsan, waa dhaqanee, (2) Deeqsinnimo, (3) Tawaaduc oo ah isla wayni la'aan, (4) Cibaadaysi."

وقال:

"المروءة عفة الجوارح عما لا يعيها."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Gobannimadu waa xubnaha jirka oo laga fogeeyo waxaan ku saabsanayn.”

وقال:

"أصحاب المروءات في جهد."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Gobannima doonku waxay ku jiraan hawl badan iyo daal.”

وقال:

"من أحب أن يقضى الله بخير فليحسن الظن بالناس."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Qofka doonaya inuu Ilaahay khayr siiyo, Ilaahay wax san ha ka fisho.”

وقال:

"لا يكمل الرجال في الدنيا إلا بأربع: (1) بالديانة، (2) والأمانة، (3) والصيانة، (4) والرزانة."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Raggu adduunka kaamil kuma noqdo intaa afar ahayn: (1) Diinta oo uu u hoggaansamo, (2) Inuu amaano leeyahay, (3) Inuu dhawrsan yahay, (4) Culus yahay oo haybad leeyahay.

وقال:

"أقمت أربعين سنة أسأل اخواني الذين تزوجوا عن أحوالهم في تزوجهم فما منهم أحد قال: "أنه رأى

خييرا."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Waxaan joogay afartan sano anigoo waydiinaya walaalahayga guursaday xaaladohooda guurka, markaasaan ka waayay midkood oo yiraahda: “khayr Ayaan arkay.”

وقال:

"ليس بأخيك من احتجت إلى مدارأته."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Walaalkaa ma aha midkaad u baahatid inaad baahitir waydiisatid, oo macneheedu yahay waa inuu marka horeba xaaladdaada ogyahay markuu baahi kaa arkana uu ku baahi tiro adigoo aan waydiisan.”

وقال:

"من صدق في أخوة أخيه قبل الله، وسد خلله، وغفر زل-له."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Qofka ay walaaltinnimadu dhab ka tahay wuxuu aqbalaa cudur daarka walaalkiis, baahidiisana wuu awdaa, wixii ka dhacana wuu u dhaafaa.”

وقال:

"من علامة الصديق أن يكون لصديق صديقه صديقا."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Calaamadaha saaxiibka lagu garto waxaa ka mid ah inuu saaxiibkiis saxiibkiis saaxiib la yahay.”

وقال:

"ليس سرور يعدل صحبة الاخوان، ولا غم يعدل فراقهم."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Ma jiro farax u dhigma saaxiibnimada walaalaha iyo la dhaqankooda, murug ka waynna ma jirto ka tegiddooda.”

وقال:

"لا تقصر في حق أخيك اعتمادا على مودته."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Ha ka gaabin xaqqa uu walaalkaa kugu leeyahay adigoo jacaylkiisa isku hallaynaya.”

وقال:

"لا تبذل وجهك إلى من يهون عليك ردك."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Wajigaaga ha u jeedin oo ku lumen mid jawaab xun ku siinaya.”

وقال:

"من نم لك نم بك. ومن إذا أرضيته قال فيك ما ليس فيك، وإذا أغضبتة قال فيك ما ليس فيك."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Qofka qof kale warkiisa kuu keena oo kugu dira, adigana war ayuu kaa qaadayaa oo uu mid kale kugu dirayaa, iyo midka haddaad raalli geliso kaa sheega waxaadan lahayn (oo fiicnaan ah), haddaad ka caraysiisana ka sheega waxaadan lahayn (oo xumaan ah).”

وقال:

"الكيس العاقل هو الفطن المتعافل."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Waxaa caaqil ah midka waxa xun is moojiya oo sida ayagoo aan dhicin oo kale ka dhiga oo ka aamusa.”

وقال:

"من وعظ أخاه سرا فقد نصحه، ومن وعظه علانية فقد فضحه وشانه."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

:Qofka walaalkiis si sir ah ula taliya wuu u naseexeeyey, kan dad dhexdiis kula taliyana waa fadeexeeyey oo xumeeyey.”

وقال:

"من سام بنفسه فوق ما يساوي، رده الله إلى قيمته."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Qofka laftiisa geeya meel ka sarreysa intuu yahay, Ilaahay ayaa qiimihiisa hoos ugu soo dhiga oo makaankiisa geeya.”

وقال:

"الفتوة حلي الأحرار."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Fatwadu waa xuliyada dadka xorta ah”. Al Xuliyah: waa waxa qaaliga ah sida dahabka iyo jawaahirta oo ay haweenku xirtaan oo isku qurxiyaan

وقال:

"من تزين بباطل هتك ستره."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“qofka baadhil oo ah wax isku qurxiya wuxuu jeexay daaha ceebtiisa qariya.”

وقال:

"التواضع من أخلاق الكرام والتكبر من شيم اللئام."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Tawaaducu oo ah is jejbinta waxay ka mid tahay akhlaaqda iyo caadada dadka kariimiinta ah, isla wayniduna waa caadada kuwa xunxun.”

وقال:

"التواضع يورث المحبة، والقناعة تورث الراحة."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Tawaaducu wuxuu dhaliyaa jacayl, qanaacaduna waxay dhalisaa raaxo.”

وقال:

"أرفع الناس قدرا من لا يرى قدره، وأكثرهم فضلا من لا يرى فضله."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Dadka waxaa ugu qadar sarreeya midkaan qadarka sarreeya u jeedin, waxaana ugu sarreeya midkaan sarrayntiisa u jeedin.”

وقال:

"إذا كثرت الحوائج فابدأ بأهمها."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Hadday umuurta loo baahan yahay bataan, ka bilow tan ugu muhimsan.”

وقال:

"من كتم سره كانت الخيرة في يده."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Qofka sirtiisa qarsada isagaa kaddib kala doorashada leh.”

وقال:

"الشفاعات زكاة المروعات."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“In dadka loo shafeeco qaado waa zakada gobannimada.”

وقال:

"ما ضحك من خطأ رجل إلا ثبت صوابه في قلبه."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

Wuxuu kaloo yiri:

“Haddii nin galkiisa lagu qoslo, taasu waxay qalbigiisa ku sugtaa sawaabtiisa oo mas’aladaas ma halmaamayo.”

وهذا الباب واسع جدا لكن نبهت بهذه الأحرف على ما سواها.

Imaam Al Nawawii\النوي wuxuu leeyahay:

“Baabkaanna aad ayuu waasic u yahay, laakiin waxaan baraarujin ku sameeyey oo kasoo doortay xuruuftaan (aan soo sheegnay).”

فصل

قد أشرت في هذه الفصول إلى طرف من حال الشافعي رضي الله عنه، وبيان رجحان نفسه وطريقته ومذهبه، ومن أراد تحقيق ذلك فليطالع كتب مناقب التي ذكرتها، ومن أهمها: كتاب البيهقي رحمه الله، وقد رأيت أن اقتصر على هذه الكلمات، لئلا أخرج عن حد هذا الكتاب، وأرجوا بما أذكره وأشيعه من محاسن الشافعي رضي الله عنه، وأدعوا له في كتابتي وغيرها من أحوالي، أن أكون موفيا لحقه أو بعض حقه علي بما وصلني من كلامه وعلمه، وانتفعت به، وغير ذلك من وجوه احسانه إلي رضي الله عنه وأرضاه، وأكرم نذله ومثواه، وجمع بيني وبينه مع أحببنا في دار كرامته، ونفعني بانتسابي إليه وانتمائي إلى صحبته. "إنتهى كلام النووي رحمه الله.

بسم الله الرحمن الرحيم

Warkaas Al Imaam Al Nawawii\الإمام النووي oo af soomaali ah

Al Imaam Al Nawawii\النوي wuxuu yiri:

Magaciise waa Al Imaam Abuu Cabdi Allaahi Muxammad bin Idriis bin Al Cabbaas bin Cuthmaan bin Shaafic ibnu Al Saa’ib bin Cabdu Allaahi bin Cabda Yaziid bin Haashim bin Al Mudh-dhalib bin Cabda Manaaf bin Qusayy Al Qurashiyyi Al Mudh-dhalibiyyi Al Shaaficiyyi Al Xijaazii Al Mudh-dhalibiyyi **إبن شافع ابن** السائب بن عبد الله بن عبد يزيد بن هاشم بن المطلب بن عبد مناف بن قصي القرشي المطلبى الشافعي\الحجازي المطلبى\ , nasabkiisuna wuxuu kan Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam kula kulmaa Cabdu Manaaf\عبد مناف.

Culummadii horreysey way badiyeen kutubbada ay ka allifeen manaaqibta, waa ammaantee, Al Shaaficii\الشافعي\ Allaha u naxariistee iyo xaaladihiisa kala duwan, sida Daauud Al Thaahirii داود\البيهقي\ الظاهري\ iyo kuwo kaleba. Culummada dambaysayna sidoo kale, sida Al Bayhaqii\البيهقي\ iyo khalqii aan la tirin karin.

Kutubbadaas kuwa ugu fiicanna waxaa ka mid ah kitaabka uu allifay Al Bayhaqii\البهقي, oo laba mujallad ka kooban, koobayana oo warinaya wax qiimo badan oo dhan kastoo cilmiga ka mid ah oo uu Al Shaaficii\الشافعي koobay.

Aniga laftaydu waxaan ku dhaqaaqay allifidda kitaab koobaya aanna isugu keenay wararka ay imaamyadu ka yiraahdeen manaqibta Al Shaaficii\الشافعي, aanna ka soo dhex saaray wararka ku jira uurka kutubbada tafsiirka, iyo Xadiithka iyo taariikhda iyo fuqahada iyo zuhaadda\الزهد iyo ghayrkoodba. Wararkaas oo idilna waxaan isugu keenay hal kitaab oo dhexdhexaad ah, aan aadna u gaabnayn, aadna u dheereyn, aanna dhexdiisa ku xusayo nafaa'ista\النفايس, oo ah waxa qaaliga ah oo naadirka ah, uusanna ka maarmin inuu ogaado ninka cilmiga inuu barto doonaya oo Al Shaaficii\الشافعي ku saabsan, gaar ahaan kuwa Xadiithka iyo Fiqiga inay bartaan doonaya, waliba kuwa math-habka\المذهب Al Shaaficii\الشافعي Allaha u naxariistee ku taagan. Waxaanna rajaynayaa inuu Ilaahay deeqdiisa i wafaajaiyo oo ii suurta geliyo inaan u dhammaystiro sida ugu fiican.

Mawduucaan aan hadda dhexdiisa ku jirnase (waana sharaxiisa kitaabka way nee fiqiga shaaficiga ee Al Majmuuc\المجموع oo laba iyo labaatan mujallad ah, oo aan warkaan oo idil kasoo qaadannay) ma suurta gelinayo waxaan ahayn inaan tilmaanno qaar ka mid ah maqaasiddaas\المقاصد (oo ah manaqibta qaaliga ah ee Al Shaaficii\الشافعي) iyo darafyo ka mid ah intaas badan oo la sheegay.

Marka, anigoo Ilaahay la kaashanaya, Isagana talo saaranaya, amarkaygana Isaga u wakiilanaya, waxaan leeyahay:

Al Shaaficii\الشافعي wuxuu u dhashay Quraysh\قريش, kana sii yahay Bani Al Mudh-dhalib\بنو مطلب, siday isku wada waafaqeen dhammaan inta cilmiga soo guurisa (oo noo keentay) math-habkay\مذهب doonayaan ha haystaane, hooyadiisna waxay u dhalatay qabiilka la yiraahdo Azd\الأزد.

Waxaana la wada ogsoon yahay Axaadiith-ta warinaysa sarraynta iyo deeqda Quraysh\قريش, imaamyada ummadduna way isku wada waafaqsan yihiin inay ka sarreeyaan dhammaan qabaa' ilka kale ee carabta ah iyo ghayrkoodba.

Saxiixaynku\الصحيحين (waana Al Bukhaarii\البخاري iyo Muslim\مسلم) waxay wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

"الأئمة من قريش"

Xadiithka manihiisu waxaa weeye:

"Imaamyada (waana hoggaamiyayaasha ummadda, ha ahaado boqor, ama madaxweyne, ama imaamka salaadda dadka tujinaya iyo wixii la midka ahba) waxaa laga soo dhex saarayaa Quraysh\قريش."

Saxiix Muslim\مسلم wuxuu isaguna ka wariyay Jaabir\جابر Allaha raalli ka noqdee inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

"الناس تبع لقريش في الخير والشر."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Dadku wuxuu raacaa oo uga dambeeya Quraysh\قریش\ khayrka iyo shartaba.”

Kitaabka (Xadiithka) Al Tarmathii-na\الترمذی\ waxaa ku sugan Axaadiith ku saabsan sarraynta iyo deeqaha qabiilka Al Azd\الأزد\.

Dhalashada Al Shaaficii\الشافعي\ Allaha raalli ka noqdee iyo dhimashadiisa iyo xusid in yar oo umuurtiisa iyo xaaladihiisa ka mid ah

Waxaa la isku wada waafaqay inuu dhashay sanadka boqol iyo konton, ahna sanadkuu dhintay Abuu Xaniifah\أبوحنيفة\ Allaha u naxariistee. Waxaa kaloo la yiri: “bal wuxuu dhintay maalintuu Al Shaaficii\الشافعي\ dhashay”, mase jiro daliil sugan oo maalintaas lagu hubiyay.

Tan mash-huurka\المشهور\ ah oo inta badan oo dadka qabaan waxay tahay inuu ku dhashay Ghazzah\غزة\, waxaana la yiri Casqalaan\عسقلان\, labadubana waxay ku yaallan arliga muqaddaska\الأراضي المقدسة\ ah daahirka oo uu Ilaahay barakeeyey, oo labadooduba waxay Baytu Al Maqdis\بيت المقدس\ u jiraan laba marxaladood.

Kaddib waxaa loo soo qaaday Makkah\مكة\ isagoo laba sano jira. Wuxuuna ku dhinta Masar\مصر\ sanadka laba boqol iyo afar, isagoo afar iyo konton sano jira.

Al Rabiic\الربيع\ wuxuu yiri:

“Al Shaaficii\الشافعي\ Allaha u naxariistee waxaa la oofsaday habeen jimce maghribka dabadiis anigoo la jooga, waxaana la duugay casar dabadiis maalinta jimce oo ahayd maalinta ugu dambaysa ee bisha Rajab\رجب\ sanadka laba boqol iyo afar.”

Qabrigiisuna Allaha raalli ka noqdee wuxuu ku yaallaa Masar\مصر\ isagoo ay waynaani dul saran tahay oo la wayneeyo, wuxuuna leeyahay xushmayn iyo ixtiraam u dhigma darajada imaamkaas.

Al Rabiic\الربيع\ wuxuu yiri:

“Waxaan ku riyooday isagoo uu (Nabi) Aadan Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam dhintay, markaasaan arrinkaas ka waraystay, markaasaa waxaa la yiri:

“Taasuu waa dhimashada ninka adduunka ugu cilmi badan, ayadoo uu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى\ Aadan\آدم\ baray magacda oo idil.”

In yar kaddib riyadaas waxaa dhinta Al Shaaficii\الشافعي\.” Waa intaas warkiisu.

Habeenkuu Al Shaaficii\الشافعي\ dhintay nin kale ayaa wuxuu ku riyooday mid leh:

“Caawa waxaa dhintay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam.”

Al Shaaficii\الشافعي\ wuxuu koray isagoo agoon ah, waxaana korisay hooyadiis, wuxuuna ku koray nolol xoolo yari daraadeed ciriiri ah, iyo xaalado ayaguna ciriiri ah.

Intuu kurayga ahaa wuxuu la fariisan jiray cullummada, wuxuu ka bartana oo ka faaiidaysto wuxuu ku dhigi jiray lafo (oo waagaas xaashi ma jirin oo waxaa wax lagu dhigi jiray hargo la magday iyo lafaha geela, gaar ahaan garbka oo la caddeeyey) iyo wax la mid ah, ilaa heer uu khaymado ka buuxiyay.

Muscab bin Cabdu Allaahi Al Zubayriي\عبد الله الزبيري wuxuu yiri:

“Al Shaaficiiالشافعي, Allaha u naxariistee, bilowga amarkiisa wuxuu baran jiray gabayada iyo taariikhda carabta iyo suugaanta. Markaas kaddib ayuu fiqiga qaatay.”

Wuxuu yiri:

“Sababta uu cilmiga u qaatayna, waa barashadiisee, waxay ahayd inuu maalin isagoo daabaddiisa saaran uuna xagga dambe ka fadhiyo ninka aabahay wax u dhiga – waa karaanigiisee – ayuu wuxuu ku luqeeyey tix gabay ah, markaasuu karaanigaasu wuxuu ku gaaracay karbaashkiisa, kaddibna uu ku yiri:

“Nin adigoo kale ah miyaa qiimihiisa ku lumiya tanoo kale? Maad fiqiga raacatid?”

Markaasuu warkaasuu Al Shaaficiiالشافعي gilgilay, uuna bilaabay inuu la fariisto Al Zanjii (الإمام فقيه مكة أبو خالد مسلم بن خالد ، المخزومي ، الزنجي ، المكي ، مولى بني مخزوم . ولد سنة مائة ، أو قبلها بيسير)

oo ahaa muftiga Makkah\مكة Kaadiibna annaguu noo yimid oo uu laazimay Maalik bin Anas مالك بن أنس. Waa intaas warkiisu.

Al Shaaficiiالشافعي waxaa laga wariyay inuu yiri:

“Waxaan fiiro u lahaa gabayada, markaasaan maalin waxaan tafay jiid ku taalla Mina\منى, markaasaan waxaan maqlay cod igu leh:

“Fiqiga raaco!”

Al Xumaydiiالحميدي waxaa laga wariyay inuu Al Shaaficiiالشافعي yiri:

“Waxaan raacday naxwaha iyo suugaanta, markaasaa waxaan la kulmay Muslim bin Khaalid Al Zinjii\الزنجي, wuxuuna yiri:

“Wiilo magaaladee ku nooshahay?

Waxaan iri:

“Waxaan ka mid ah dadka Makkah\مكة deggan.”

Wuxuu yiri:

“Gurigaagu xaggee buu ku yaallaa?”

Waxaan iri:

“Ban ku yaalla Al Khayf\الخيف.”

Wuxuu yiri:

“Qabiilkee baad u dhalatay?”

Waxaan iri:

“Cabdu Manaaf\عبد مناف.”

Wuxuu yiri:

“Bakhin\بخ! Bakhin\بخ? (ahna wax la yiraahdo marka la arko wax wayn oo fiican oo loo bogo) Ilaahay adduunka korkiisa iyo aakhiraba wuu ku sharfay, ee maad fahmadaada fiqiga gelisid, taasoo adiga kuu fiicane?”

Kaddib Al Shaaficiiالشافعي Makkah\مكة wuu ka baxay aadayna Al Madiinah\المدينة isagoo doonaya inuu cilmiga ka barto Abuu Cabdu Allaahi Maalik bin Anas\مالك بن أنس Allaha u naxariistee. Safarkiisaasna waxaa ka yaalla kitaab can ah oo la akhriyo.

Markuu u yimid wuxuu ka bartay oo xifdiyay oo korka ka qabtay kitaabkiisa Al Muwadh-dha' الموطأ. Markaasay akhrintiisu Maalik\مالك cajabisay uuna laazimay. Maalik wuxuu ku yiri: “Ilaahay ka dhawrso oo macaasida ka fogow, oo waxaad yeelan doontaa mustaqbal wayn.”

Riwaayad kalena waxay warisay inuu ku yiri:

“Ilaahay Cazza wa Jalla **الله عزوجل** wuxuu qalbigaaga ku riday nuur ee macaasi ha ku damin.”

Markaas uu Maalik\مالك u imaanayo Al Shaaficii\الشافعي wuxuu jiraa saddex iyo toban sano, kaddibna wuxuu degay Yaman\يمن.

Waxaa faaftay suubanaanta siiradiisa iyo siduu dadka ugu xambaaro raacidda sunnada iyo dariiqyada suuban, wax badan oo can ahna waa laga wariyay arrinkaas.

Kaddibna taas wuu iska daayay wuxuuna ku mashquulay barashada cilmiga.

Wuxuu tegay Ciraaq\عراق, waxayna aqoonta cilmiga isugu soo bexee Muxammad bin Al Xasan\الحسن محمد بن محمد iyo ghayrkiisba.

Wuxuu faafiyay cilmiga Xadiithka iyo dariiqaa kuwa raacda, wuxuuna u gargaaray oo nooleeyey sunnada.

Markaasuu magaciisu faafay iyo sarrayntiisuba. Markaasuu Cabdu Al Rraxmaan bin Mihdam\عبد الرحمن بن مدمم, oo ahaa imaamka Ahly Al Xadiith-ka\الديث أهل zamankiisa, wuxuu ka dalbaday inuu u allifo kitaab ku saabsan Usulu Al Fiqhi\أصول الفقه: markaasuu wuxuu u allifay “Kitaabu Al Risaalah\الرسالة”, ahna kitaabka ugu horreeyay oo cilmiga Usulu Al Fiqhi\أصول الفقه lagu dejiyay.

Cabdu Al Rraxmaan\عبد الرحمن iyo Yaxyaa bin Saciid Al Qadh-dhaan\القطان سعيد بن يحيى way jeclaayeen.

Al Qadh-dhaan\القطان iyo Axmad bin Xanbal\أحمد بن حنبل waxaa ayagoo salaadda ku jira u ducayn jireen Al Shaaficii\الشافعي. Dadkuna wuxuu isku raacay fiicnaanta kitaabkiisaas Al Risaalah\الرسالة, waxay ka yiraahdeenna waa can la wada yaqaan.

Al Muzanii\المزني wuxuu yiri:

“Waxaan kitaabka Al Risaalah\الرسالة akhriyay shan boqol oo goor, mana jirto mar aan akhriyay ee waa taan illaa faa’iido cusub mar walba ka helay.”

Riwaayad kalena wuxuu ku yiri:

“Waxaan akhriyay kitaabka Al Risaalah\الرسالة laga bilaabo mar hadda konton sano laga joogo, oo mar kastoo aan akhriyo waxaan ka faa’iidaystaa waxaanan hore u aqoon.”

Waxaa ku faaftay waynaanta qadarka Al Shaaficii\الشافعي Allaha u naxariistee arliga Ciraaq\عراق, magaciisuna adduunkuu ku faafay, ayna sarrayntiisa isku waafaqeen kuwa raacsan iyo kuwa khilaafsanba, ayna aqoonsadeen dhammaan culummadu.

Waxaa ayaduna ku waynaatay darajadisa khulafada iyo amiirrada agtooda uu ku leeyahay, ayna agtooda ku sugaatay waynaantiisu, iyo imaamnimadiisu.

Sarrayntiisa oo inta kale dheer yahay waxaa sii muujiyay isku soo baxa uu la yeeshay dadka Ciraaq\عراق iyo ghayrkoodba, uuna halkaas ku helay darajo ayan ghayrkiis helin.

Wuxuu soo saaray oo caddeeyey qawaacidda usuusha waxaan isaga ghayrkiis loo ogayn.

Waxaa lagu imtixaanay meelo badan oo aan tiradooda lasoo koobi karin oo lagu waydiiyay mas'alado, jawaabihiisuna waxay ahaayeen kuwa asiibay runta iyo sugnaanta ugu sarreysa.

Waxaa agtiisa ku caakifay, ahna laazimay oo ku nagaaday inay cilmiga ka qaataan, kuwa yaryar iyo kuwa waynba, imaamyada iyo akhyaartaba ee culummada Xadiithka iyo Fiqiga iyo ghayrkoodba.

In badan oo kuwaas ka mid ahna waxayba ka noqdeen mathaahibtay\مذاهب haysteen, una soo wareegeen math-habkiisa\مذهب, ayna ku dhegeen dariiqadiisa, sida Abuu Thawr\أبو ثور iyo khalqi aan la tirin karin oo kale.

In badan oo ayagaas ka mid ahna waxay ka tageen inay cilmiga ka qaataan shuyuukhdoodii hore iyo kuwa waawayn oo imaamyada ka mid ah, waxayna u go'een Al Shaaficii\الشافعي, kaddib markay agtiisa ka heleen waxayan isaga ghayrkiis ka heleyn.

Markaasuu Ilaahayga Kariimka ah isaga iyo ayagaba u barakeeyey culuumtaas sarraysa iyo suubanaantaas muuqata, iyo khayraatka sii badanaya, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh, iyo inta kaloo nicmooyinkiisa ah oo aan la tirin karinba.

Ciraaq\عراق wuxuu ku allifay kitaabkiisa “Al Qadiim\القديم” oo loo bixiyay “Kitaabu Al Xujjah\كتاب الحجّة”, ayna ka wariyeen afar ka mid ah kuwa waawayn ee asxaabtiisa ka mid ah, oo kala ah: (1) Axmad bin Xanbal\أحمد بن حنبل, (2) Abuu Thawr\أبو ثور, (3) Al Zacfaraanii\الزعفراني, (4) Al Karaabiisii\الكرابييسي.

Kaddibna wuxuu aaday Masar\مصر sanadka boqol iyo sagaal iyo sagaashan. Abuu Cabdu Allaahi Xarmalah ibnu Yaxyaa\أبو عبد الله حرملة ابن يحيى wuxuu yiri:

“Al Shaaficii\الشافعي wuxuu noo yimid sanadka sagaal iyo sagaashan”.

Al Rabiic-na\الربيع wuxuu yiri:

“sanadka laba boqol.”

Waxaana dhici karta inuu yimid dhammaatka sanadka sagaalaad, si labadaas warinood loo mideeyo.

Halkaas Masar\مصر ayuu ku allifay kutubbadiisa “Al Jadiidah\الجديد/Cusub”. Markaasuu magaciisu dalalka oo idil ku faafay, oo ay markaas dadku uga yimaadeen oo uga soo safreen Al Shaam\الشام iyo Ciraaq\عراق iyo Yaman\يمن iyo dhinac kastoo kale si ay cilmiga uga bartaan, kutubbadiisa cusubna ay dhageystaan oo ay bartaan.

Markaasuu ka sare maray dadka Masar\مصر iyo ghayrkoodba, wuxuuna dhigay kutubbo aan noocooda hore loo dhigin oo uu isagu ugu horreeyey wax cilmigaas dhiga, ayna ka mid yihiin Usuulu Al Fiqhi\أصول الفقه, iyo kitaabka “Kitaabu Al Qasaamah\كتاب القسامة” iyo “Kitaabu Al Jizyah\كتاب الجزية” iyo “Qitaal Ahlu Al Baghyi\قتال أهل البغي” iyo ghayrkoodba.

Al Imaam Abuu Al Xasan Muxammad bin Cabdu Allaahi bin Jaafar Al Raazii محمد أبو الحسن iyo\الإمام أبو الحسن محمد بن عبد الله بن جعفر الرازي wuxuu kitaabkiisa (Manaaqibta Al Shaaficii\الشافعي) ku yiri:

“waxaan maqlay Abaa Camr Axmad bin Calii bin Al Xasan Al Basrii الحسن بن علي بن الحسن oo leh: “waxaan maqlay Muxammad bin Xamdaan bin Sufyaan Al Dharaa’ifii Al Baghdaadii\الطرائفي\ محمد بن حمدان بن سفيان oo leh: “waxaan maalin gob jog ka ahaa (majliska) Al Rabiic bin Sulaymaan\الربيع بن سليمان\ ayadoo aad albaabka daartiis ku furteen toddoba boqol oo rati rag saarnaayeen oo safar ku yimaadeen una yimaadeen inay dhegeystaan kutubbada Al Shaaficii\الشافعي\ Allaha raalli ka noqdee oo la akhrinayo.”

Xaalka Al Shaaficii\الشافعي\ Allaha raalli ka noqdee oo lasoo koobay

Waxaad ogaataa inuu ku sugnaa xaalad suuban iyo makaanka ugu sarreeya oo kor loo fiiriyo, kaddiba markuu Ilaahay khayraatka wada siiyay, uuna waafajiyay sifooyinka qurxoon, uuna u sahlay noocyada kala duwan ee karaamooyinka.

Kuwaas waxaa ka mid ah sharafta nasabkiisa daahirka ah, oo muuqda, uuna Rasuulka Ilaahay Sallaa Allahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam kula kulmo nasabka, taasoo ah sarraynta ugu sarreysa iyo laan dheeraanta iyo gobannimada.

Waxaa kaloo ka mid ah sharafta dhalashada iyo korriimada, oo wuxuu ku dhashay Al Ardu Al Muqaddasah\المقدسة الأرض\ wuxuuna ku koray Makkah\مكة\.

Waxaa kaloo ka mid in intaas dabadeed isagoo hortiis kutubbada la dhigay, axkaamtana la qiray oo la sifeeyey. Markaasuu wuxuu u fiirsaday mathaahibta\المذاهب\, (oo ah dariiqa iyo siday u fasireen axkaamta ku jirta Kitaabka iyo Sunnada, oo Math-hab\مذهب\ waxaa weeye macnihiisu in caalinku markuu xukunka sharxo uu leeyahay “Anigu dariiqaas ayaan maray oo qaaday; erayguna wuxuu ka yimid thahaba\ذهب\ oo ah “waa tegey, qaaday oo maray” marka math-hab\مذهب\ waa “dariiqa la qaaday”) culummada horreysay, wuxuuna cilmiga ka qaatay culummada ugu cadcad, wuxuuna usoo baxay kuwooda ugu sugnaasho badan oo ugu fiiro dheer.

Markaasuu wuxuu eegay mathaahibtooda iyo dariiqyaday mareen iyo hubintooda iyo khabarkooda. Markaasuu wuxuu kasoo saaray dariiqo kooban oo ku saabsan Kitaabka\الكتاب\ iyo Sunnada\السنة\ iyo Al Ijmaac\الإجماع\ iyo Al Qiyaas\القياس\.

Intaasna kuma ekaanine, wuxuu usoo jeestay inuu kala doorto uuna kala miisaamo, uuna dhammaystiro, kalana sifeeyo, isagoo intaasba hadalkiisa macaan ku yeelaya iyo ujeedadiisa sarreysa iyo aqoon dheeridiisa qotada dheer oo uu lahaa laan kasta oo cilmiga ka mid ah, iyo siduu dusha ugu dhigtay oo uu faaqiday faaqidda uga adag.

Isaagana ah midka ugu sarreeya kala soo bixidda axkaamta Kitaabka iyo Sunnada, kuna xeel dheer aqoonta Al Naasikhu\الناسخ\ (oo ah ama Aayadda ama Xadiithka xukunka ku jira ay nasakheen xukun ku sugnaa Aayada ama Xadiith ka horreeyey oo jiray) iyo Al Mansuukh\المنسوخ\ (oo ah Aayad ama Xadiith xukunka ku jiray la nasakhay oo uusan ku dhaqan sharci oo dambe lahayn), al Mujmal\المجمل\ (oo ah xukun duuduuban oo is wata, sida salladda tukada oo kale) iyo Al Mubiinu\المبين\ (oo ah xukunka midkaas isku duuduuban caddaynaya), iyo Al Khaasu\الخاص\ (oo ah xukun qof kali ah loola dan leeyahay oo ku saabsan yahay) iyo Al Caamu\العام\ (oo ah xukun caam ah oo dadkoo idil wada saameeya), iyo intaas ghayrkoodaba oo ka mid ah “Al Khidhaabu\الخطابة\” (oo ah warkuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى\ Kitaabkiisa kusoo

jeedinayo, ama Rasuulkiisu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Xadiith ku sheegayo).

Albaabkanna furiddiisa axadna ugama horrayn, maxaa yeelay isagaa allifay kitaabka ugu horreeyey ee Usuulu Al Fiqhiga\أصول الفقه, taasoo aan la isku khilaafsanayn, shakina uusan ka jirin.

Isagu waana midka uusan axad kale kula midka ahayn, balse uusan uba soo dhowayn, aqoonta Kitaabka Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى iyo Sunnada Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, oo qaarkood (Aayadaha iyo Axaadiith-ta) qaarka kale ku fasiray.

Isaguu wuxuu kaloo uu yahay imaamka xujjada u ah afka carabiga iyo naxwihisaba\النحو, oo wuxuuba ka shaqeyey afka carabiga labaaatan sano, isagoo leh codkarnimo iyo faseexnimo, taasoo ay u dheer tahay inuu afkiisu carabiga yahay, arliga carabtana uu arligiisu yahay, zamankiisuna carabi yahay.

Afka carabiga ayaana Kitaabka iyo Sunnada lagu aqoonsada oo lagu gartaa.

Wuxuuna koobay oo xakameeyey warka wayn oo badan oo ku sugan Quraanka iyo Sunnadaba iyo cilmiga carabtaba, iyo culummada Xadiithkaba, wuxuuna intaasba dul istaajiyay macnooyinka sunnada, uuna dadka ku baraarujiyay, intii baadhilka ahaydna oo sunnada khilaafsanaydna oo barxay oo tag darreeyey, uu runta dul dhigay, uuna nooleeyey oo muujiyay kaddib markay qarsoomeen oo mugdi galay, oo ay markaas kalimadoodu ka adkaatay inta khilaaftay oo idil, ayna ku buriyeen burhaanno iyo xujjooyin cadcad ilaa ay luqumhoodu taas ugu hoos laadlaadaeen.

Muxammad bin Al Xasan\محمد بن الحسن Allaha u naxariistee wuxuu yiri:

“Hadday maalin culummada Xadiithka hadlaan – waana maalin kasta inta Al Shaaficii\الشافعي ka dambaysay – waxay ku hadlayaan carrabka Al Shaaficii\الشافعي”, uuna ka wado wuxuu kutubbadiisa ku dhigay.

Al Xasan bin Muxammad Al Zacfaraanii\الحسن بن محمد الزعفراني wuxuu yiri:

“Culummada Xadiithku way hurdeen markaasaa waxaa hurdada ka kiciyay Al Shaaficii\الشافعي , markaasay hurdada ka keceen.”

Axmad bin Xanbal\أحمد بن حنبل Allaha u naxariistee wuxuu yiri:

“Nin kastoo ay gacantiisu taabato khad ama qalin ee waa tuu illaa Al Shaafici\الشافعي wax kasoo qaatay oo uu ku leeyahay.”

Hadalkaanna waa hadalka imaamka culummada Xadiithka, ayanna dhawrsanaantiisa iyo cabsidiisa Ilaahay iyo sarrayntiisa ayan isku khilaafsanayn.

Waxaa ka mid ah inuu Ilaahay Al Shaaficii\الشافعي baray oo siiyay anwaacda kala duwan ee cilmiga ilaa heer ay culummada qaybaha kala duwan ee culuumtaasu ka cajizeen oo gaari waayeen oo laga aqoon batay markay Al Shaafici\الشافعي isu soo baxeen, ayna aqoonsadeen sarrayntiisa, ayna kuwa waafaqsan iyo kuwa khilaafsanba is dhiibeen fadhiyo can ah oo waawayn, kana kooban imaamyada zamankiisa ee dalalka kala duwan.

Isu soo bixidahaasna waa can la yaqaan, kuna sugan kutubbadiisa Allaha raalli ka noqdee, iyo kutubbada imaamyada horreeyeyba iyo kuwa dambeeyeyba.

Kitaabka “Al Umm\الأم\كتاب” ee Al Shaaficii\الشافعي\ Allaha u naxariistee, waxaa isu soo bixidahaas uga yaalla waxyaalo lala yaabo oo loo bogo iyo calaamado , iyo waxyaalo aad u qiimo badan oo waawayn, iyo qawaacidda laga faa’iidaysto. Meeqa isu soo bixid iyo qaacido ayuu ku goynayaa kulli mid kasta oo dul istaagay oo uu rumaynayaa oo u qaadanayaa inay xaqa tahay, aanna isaga looga hormarin.

Waxaa ka mid ah inuu ka hormaray imaamyada muuqda ee zamankiisa xagga fatwada, baridda cilmiga iyo alifidda kutubbadaba, waxaana taas ku amray sheekhiisa Abuu Khaalid Muslim bin Khaalid Al Zinjii\الزنجي\ خالد مسلم بن خالد imaamka reer Makkah\مكة\ iyo muftigeedaba, wuxuuna ku yiri:

“Adiga Abaa Cabdu Allaahiyow\أبا عبد الله\ waxaa la gaaray waqtigaad fatwoon lahayd.”

Markaasna Al Shaaficii\الشافعي\ wuxuu jiraa shan iyo toban sano!

Wararka dadka zamankiisu arrinkiisaanna ka yiraahdeen way badan yihiin oo can yihiin la wada yaqaanno.

In isagoo da’diisu sidaas u yartahay cilmiga looga qaatay, ayadoo ay culummo badan jiraan zamankaas, waxaa weeye daliillo cadcad oo tilmaamaya waynaantiisa iyo jaliilnimadiisa, iyo sarraynta makaankiisa: intaasoo idilna waa wax can ah oo la wada ogsoon yahay, laguna xusay kutubbada lagu dhigay manaqibtiisa iyo ghayrkoodba.

Waxaa kaloo ka mid ah siduu ugu ijtihaaday u gargaarka Xadiithka iyo raacidda Sunnada, uuna math-habkiisa\مذهب\ ku wada kulmiyay daliilladoo idil, uuna si la hubo oo tifaftiran ugu wariyay, uuna si qoto dheer oo kaamil ah u dhex galay macnooyinka iyo hubaasha, ilaa heer ay reer Ciraaq\عراق\ markuu u yimid ku magacaabeen “Naasiru Al Xadiith\الحديث\ ناصر/Midka u hiilliyay oo guuleeyey Xadiithka”.

Dadka math-habkiisa\مذهب\ raacsanna waxay culummada horreysay iyo fuqahada Khurasaan\خرسان\ u bixiyeen “Asxaabu Al Xadiith\أصحاب الحديث\/asxaabta ku dul sugan Xadiithka”.

Waxaan ka warinnay al imam Abii Bakr Muxammad bin Isxaaq ibnu Khuzaymah\الإمام أبي بكر\ محمد بن إسحاق ابن خزيمة\ oo loo yaqaan “Imaamu Al A’immah\إمام الأئمة\=imaamka imaamyada”, kana mid ahaa kuwa Xadiithka xifthiyay, Sunnadana si heer sare ah u yiqiinnay, in la waydiiyay:

“Ma taqaanna Sunno Saxiix ah oo uusan Al Shaaficii\الشافعي\ kutubbadiisa ku dhigin?”

Wuxuu yiri:

“Maya.”

Sidaasoo ay tahayna Al Shaaficii\الشافعي\ Allaha u naxariistee wuxuu sheegay inaan qofna Sunnada la wada siin oo uusan wada aqoon. Wuxuuna yiri waxa ka sugnaaday Allaha raalli ka noqdee dardaarankiisa ahaa in lagu dhaqmo Xadiith Saxiix ah oo kali, uuna ka tegay warka ay yiraahdeen kuwa khilaafay Xadiith Saxiix ah oo sugan.

Asxaabteenu Allaha u naxariistee way yeeleen dardaarankiisaas, waxayna ugu dhaqmeen oo ugu isticmaaleen mas’alado fara badan, sida “Al Tathwiibu fii Al Subxi\التثويب في الصبح\”, iyo mas’alada shardiga in la xalaaloobo xajka hadduu cudur daar jiro, iyo kuwaas ghayrkoodba,

waxaadna ku arki doontaa meelohooda (kitaabka Al Majmuuc\المجموع) in shaa'a Allaahu Tacaalaa\إن شاء الله تعالى. Waxaa kaloo ka mid ah siduu ugu dhegganaa Axaadiith-ta Saxiixa ah iyo ka jeesiigiisa kuwa taagta daran oo daciifka ah.

Mana naqaanno axad fuqahada ka mid ah oo ku dadaalay oo daneeyey kala saaridda markay daliilsanayaan Xaadiithka Saxiixa ah iyo midka taagta daran siduu isagu u daneeyey oo uu u kala saaray. Axad u dhowna ma aanan arag, marka Ilaahay raalli ha ka noqdo.

Waxaa kaloo ka mid ah Allaha raalli ka noqdee siduu u ilaaliyay arrinkaas waxa ku saabsan Cibaadooyinka (oo la isku addoonsaday, sida salaadda, zakada, iwm.) sida math-habkiisa\مذهب looga yaqaanno.

Waxaa kaloo ka mid ah siduu ugu dadaali jiray oo uu ugu ijtihaadi jiray cibaadada, iyo qaadidda dariiqa cabsida Ilaahay iyo deeqsinnimada iyo zuhdiga xoolaha adduunkaan laga kaaftoomo: taas ayaa ka mid ah siiradiisa iyo khuluqdiisa oo can ah oo la wada yaqaan, taasoo uusan shaki gelin mid aan jaahil ahayn ama daallin xaq ka leexday.

Sidaasuu wuxuu ku sugnaa barta sarraysa iyo sugnaanta ee diinta, ayna kuwa raacsan iyo kuwa khilaafsanba isku waafaqeen cilmigiisaas iyo makaankiisaas.

Caqliguna qaadan maayo shay hadday maalintu u baahato daliil inay maalinn tahay

Deeqsinnimadiisa iyo geesinnimadiisase, kaamilnimada caqligiisa iyo fahmadiisa way wada ogsoon yihiin kuwaa khaaska ah iyo caamkuba, taas daraadeed ayaanan halkaan daliilladooda u keeneyn ayago wada can ah, intaasoo idilna waxay ku sugan yihiin oo lagu wariyay kutubbada manaaqibtiisa oo dariiqyo kala duwan looga wariyay, uuna ka mid yahay Xadiithka caanka ah:

"ان عالم قریش يملأ طباق الأرض علما."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Caalin Quraysh\قریش u dhashay ayaa arligoo idil cilmi ka buuxinaya.”

Culummaddi hore iyo ghayrkoodba waxay caalinkaas ku fasireen inuu yahay Al Shaaficii\الشافعي Allaha u naxariistee, waxayna u daliil sadeen oo yiraahdeen:

* Culummada saxaabada ka midka ahaa Allaha raalli ka noqdee, ahna calammada diinta, lagama warin midkoodba waxaan ahayn arrimo ama masaa'il kooban oo tirsan, oo fatwooyinkoodu waxay ku sinnaayeen wixii markaas dhacay, bal waxayba dadka ka reebi jireen inay waydiiyaan waxaan dhicin (oo ay doonayaan inay ogaadaan waxay diintu ka qabto), dareenkooda iyo ujeedadooduba waxay u jihaysnaayeen la dagaallanka gaalada iyo sare marinta kalimada islaamka, iyo jihaadka naftooda iyo cibaadaysiga, oo sidaasayan waqtiba ugu helin inay kutubbo dhigaan.

* Kuwa ayagaas ka dambeeyeyna oo imaamyadooduna kutubbada allifeen, midkoodna Quraysh\قریش uma dhalan inta Al Shaaficii\الشافعي ka horraysay, sifadaas xadiithkana qofna kuma sifoobin isaga hortiis iyo dabadiis toona.

الإمام أبو زكريا يحيى بن زكريا الساجي Al Saajii wuxuu kitaabkiisa caanka ah ee “Al Khilaaf\الخلاف” ku yiri:

“Waxaan uga bilaabay oo ugu hormariyay Al Shaaficii الشافعي fuqahada oo idil hortood, aanna uga hormariyay, in kastoo ay qaarkood isaga ka horreeyeen raacidda la raacay, raacidda Sunnada daraadeed oo Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

قدموا قريشا وتعلموا من قريش.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Quraysh\قريش hormariya, cilmigana Quraysh\قريش ka barta.”

الإمام أبو نعيم Cabdu Al Malik bin Muxammad ibnu Cadiyy Al Astraabaathii الربيع بن سليمان Al Rabiic bin Sulaymaan Al Muraadii, أبو نعيم عبد الملك بن محمد ابن عدي الأستراباذي\ المرادي saaxiibkiis wuxuu yiri:

“Xadiithkaan waxaa ku sugan oo uu arkayaa oo ogaanayaa qofka fiirada dheer oo wax kala saarta ku fiiriya inay ujeedadu tahay nin culummada ummaddaan ka mid ah oo Quraysh\قريش u dhashay, cilmigiisuna soo if baxay, dalalkana uu ku faafay, kutubbadiisa uu cilmigiisu ku dhigan yahayna loo kala dhigto sida Kitaabka Quraanka Musxafka\المصحف loo kala dhigto oo kale, ayna ku bartaan odayada iyo dhalinyaraduba majaalistoada, ayna warkiisa xifthiyaan oo korka ka bartaan, lagana sheego oo looga dhaqmo majlisayada xukaamta iyo umarada iyo kuwa Quraanka xifdisan iyo culummada Xadiithka iyo ayagaas ghayrkoodba.”

Wuxuu yiri:

“Tanna waa sifo aanan ogayn in axadna laga helay aan Al Shaaficii الشافعي ahayn, oo isagaa ah caalinka Quraysh\قريش oo cilmiga dhigay oo diiwaan geliyay, usuushana\الأصول sharxay iyo furuudcaba\الفروع, qawaacidana u gogol xaaray.”

Al Bayhaqii, البيهقي kaddib markuu wariyay warka ku sugan warinta Abuu Nucaym\أبو نعيم wuxuu yiri:

“Sidaas ayuuna Axmad bin Xanbal\أحمد بن حنبل ku fashiray Xadiithkaas.”

Waxaa kaloo ka mid ah kutubbada uu Al Shaaficii الشافعي allifay oo ku saabsan usuusha\الأصول iyo furuudcaba\الفروع oo aan isaga hortiis la dhigin, tiro badni iyo quruxba, oo kutubbada qoray way badan yihiin oo can yihiin, sida “Al Umm\الأم” oo qiyaas labaatan mujallad ka kooban oo can yahay, iyo “Jaamicu Al Muzanii Al Kabiir\الجامع المزني الكبير” iyo “Jaamicu Al Muzanii Al Saghiir\الجامع المزني الصغير”, iyo “Mukhtasir Jaamicu Al Muzanii Al Kabiir\مختصر جامع المزني الكبير” iyo “Mukhtasir Jaamicu Al Muzanii Al Saghiir\مختصر جامع المزني الصغير” iyo “Mukhtasir Al Buwaydhii\مختصر البويطي” iyo “Al Rabiic\الربيع” iyo “Kitaabu Xarmalah\كتاب حرملة” iyo “Kitaabu Al Xujjah\كتاب الحجة” ahna “Al Qadiim\القديم” iyo “Al Risaalah Al Qadiimah\الرسالة القديمة” iyo “Al Risaalah Al Jadiidah\الرسالة الجديدة” iyo Al Amaalii wa Al Imlaa\الإملاء و الأمالي ahna kuwii yeeriyay oo ardadiisu dhigeen, iyo intaasoo idil ghayrkoodba oo ka mid ah kutubtiisa oo la wada yaqaan, waxaan ku wada xusay Al Bayhaqii\البيهقي kitaabkiisa manaaqibta.

القاضي الإمام أبو محمد الحسين بن محمد المرزوي Al Qadii Al Imaam Abuu Muxammad Al Xusayn bin Muxammad Al Marwazii wuxuu faalladiisa ku yiri:

“Waxaa la yiri inuu Al Shaaficii الشافعي Allaha u naxariistee allifay boqol iyo saddex iyo toban kitaab oo ku saabsan tafsiirka, fiqiga, suugaanta iyo intaas ghyarkoodaba. Fiicnaantoodana waa amar lagu gaaro akhrintooda, oo uusan markaas ka shakiyeeyn wanaagooda mid waafaqsan iyo mid diidanba.” Waa intaas warkiisu.

Kutubta ay asxaabtiisu dhigeenna waa sharaxa ama fasiridda kutubbadiisa iyo erayadiisa, waxayna dhammaantood ku fadhiyaan aasaasku isagu dhigay iyo qawaaciddiisa, kutubbadaas tiradoodana makhluuq ma koobi karo iyo waynaanta faa’iidooyinkooda iyo tiro badnida inta kasii farcantayba iyo waynaanta xajamkoodaba, iyo sida fiican oo ay u nidaamsan yihiin, sida faallada Abii Xaamid Al Asfaraanii\حامد الأصفرائي\ iyo labadiisa saaxiib Qaalli Abii Al Dhayyib\أبي الطيب\ midka kitaabka Al Xaawii\الحاوي\ dhigay iyo Nihaayatu Al Madhlab نهاية المطالب\ uuna allifay Imaamu Al Xaramayni\إمام الحرمين\, iyo labadaas ghyarkoodaba oo can ah oo la wada ogyahay.

Taasna way ka caddahay in caddayn u baahato, kana caansan tahay inay in can laga dhigo u baahato. Intaasoo kitaabna waxay ku tusayaan badnida cilmigiisa iyo fiicnaanta hadalkiisa, iyo suubanaanta niyadiisa cilmigiisa. Suubanaanta niyada cilmigiisana waxaa wariyay kutubbo badan oo can ah, waxaana ku filan oo warku ku go’ayaa akhrinta kutubbadaas oo samida niyadaas u daliil ah.

Al ASaajii\الساجي\ wuxuu bilowga kitaabkiisa “Al Khilaaf\الخلاف\” ku yiri:

“Waxaan maqlay Al Rabiic\الربيع\ oo leh waxaan maqlay Al Shaaficii الشافعي oo leh:

“Waxaan jeclaan lahaa inuu khalqigu cilmigaan barto oo aan anigana hal xaraf la iiga nisbayn!”

Taasna waa warin aan saxiixnimadeeda shaki geli karin, oo kutubta Al Saajii\الساجي\ meel walba waa laga helayaa, wuxuuna ka maqlay imam (Al Saajii\الساجي\ oo ka maqlay imam (Al Rabiic\الربيع\).

Al Shaaficii الشافعي Allaha u naxariistee wuxuu yiri:

“Waligay axadna isuma soo bixin si aan uga adkaado, waxaanna jeclaa in markaan axad isu soo baxno inuu Ilaahay isaga xaqqa uga dhawaajiyo.”

Warkiisaanoo kalena waa badan yahay oo waa can.

Waxaa kaloo ka mid ah qoto dheerida uu ardaydiisa ugu turi jiray iyo ayaga ghyarkoodba, iyo siduu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى\ ugu naseexeeyey (oo ah adeeciddiisa) iyo Kitaabkiisa (ku dhaqankiisa) iyo Rasuulkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam (oo ah adeeciddiisa iyo raaciddiisa) iyo muslimiintaba: diintuna taas weeye, siday uga sugnaatay Sayyidka Mursaliinta Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.

Intaas aan soo sheegay, in kastoo ay yihiin wax can ah oo la wada ogsoon yahay, dhibaato kuma jirto in hadana la tilmaamo, si uu ku ogaado qofkaan hore u arag oo u dul istaagin.

Kitaabkaan Al Majmuuc-na\المجموع\ ujeedadiisu ma aha oo kuma takhasusin caddaynta waxa qarsoon iyo xallinta mushkilooyinka.

Warkaas imam Al Nawawii\النوي\ macnihiisu waxaa weeye:

“Qaybahaan aan soo sheegnay waxaan ku tilmaamay daraf ka mid ah xaaladda Al Shaaficii الشافعي Allaha raalli ka noqdee, iyo caddaynta waynaanta naftiisa iyo dariiqadiisa iyo math-

habkiisa\المذهب. Qofka doonaya inuu taas hubiyana ha akhristo kutubbada aan soo sheegay oo ku saabsan manaqibta, uuna ugu muhimsan yahay kitaabka Al Bayhaqii\البيهقي Allaha u naxariistee. Waxaanna is tusay inaan intaas ku gaabsado si aanan uga bixin ujeedada kitaabkaan (Al Majmuuc\المجموع), waxaanna rajaynayaa waxa aan sheegayo aanna faafinayo oo ku saabsan wanaagga Al Shaaficii\الشافعي Allaha raalli ka noqdee, kutubadayda dhexdoodana waa ugu duceeyaa iyo ghayrkoodba oo xaaladahayga ka midka ah, anigoo rajaynaya inaan noqdo midka u oofiyay xaqqiisa ama xaqqiisa qaarkiisba uu aniga igu leeyahay, uuna iigu yeeshay waxa iga soo gaaray warkiisa iyo cilmigiisa aanna waxtar ka helay, iyo iyo wax intaasba ka baxsan oo ka mid ah ixsaankuu ii falay Allaha raalli ka noqdee isagana siiyee wuxuu raalli ku noqdee, degmadiisana ha karaameeyee iyo xaaladdiisaba, aniga iyo isagana isugu kaaya keeno kuwaan jecelnahay agtoda Daarta Karaamadiisa, iguna waxtaro inaan isaga ku nasab sheegto (xagga math-habka\المذهب ee ma aha xagga dhalashada) iyo la xiriikayga saaxiibtinnimadiisa.” Intaasuu ku egyahay warka Al Imaam Al Nawawii\الإمام النووي Allaha isagana dambigiisa dhafo, u naxariisto raallina ka ahaadee.

رحلته إلى اليمن وولايته بأرض نجران

Safarkiisa Yaman iyo Guddoomiyannimadiisa gobolka Najraan

لما مات الإمام مالك (179 هجرية)، وأحس الشافعي أنه نال من العلم أشطرا، وكان إلى ذلك الوقت فقيرا، اتجهت نفسه إلى عمل يكتسب منه من يدفع حاجته، ويمنع خصاصته، وصادف في ذلك الوقت أن قدم إلى مكة المكرمة والي اليمن، فكلمه بعض القرشيين في أن يصحبه الشافعي، فأخذه ذلك الوالي معه، ويقول الشافعي في ذلك:

”ولم يكن عند أمي ما تعطيني من أتحمل به، فرهنت دارا فتحملت معه، فلما قدمنا عملت له على عمل.“ (184 هجرية) وفي هذا العمل تبدو مواهب الشافعي، فيشيع ذكره عادلا ممتازا. ويتحدث الناس باسمه في بطاح مكة، ولما تولى الشافعي ذلك العمل أقام العدل، وكان الناس يصنعون الولاة والقضاة ويتملقونهم، ليجدوا عندهم سبيلا إلى نفوسهم، ولكنهم وجدوا في الشافعي عدلا لا سبيل إلى الاستيلاء على نفسه بالمصانعة والملق، ويقول هو في ذلك:

”وليت نجران وبها بنو الحارث بن عبد المدان، وموالي ثقيف، وكان الوالي إذا أتاهم صانعوه، فأرادوني على نحو ذلك فلم يجدوا عندي.“ (الشافعي، محمد أبو زهرة ص21، الشافعي، محمد أبو زهرة 25)

Socdaalkiisa Yaman\يمن iyo Guddoomiyennimadiisa gobolka Najraan\نجران

Markuu imam Maalik\مالك dhintay sandka boqol sagaal iyo toddobaatanka Hijriga, Al Shaaficina\الشافعي uu dareemay inuu cilmiga qaybo ka qaatay, isagoo ilaa markaasna ahaa nin faqiir ah, ayay naftiisu waxay u jeesatay raadsiga shaqo uu ka kasbado waxa dabooli kara baahidiisa, saboolnimadana ka dhawra.

Markaasuu waxaa dhacay inuu markaas Makkah Al Mukarramah\المكة المكرمة yimid\يمن Guddoomiyaha Yaman.

Markaasaa ninkaan waxaa la hadlay rag Quraysh\قريش ka mid ah inuu raaco Al Shaaficii\الشافعي uuna shaqo siiyo. Markaasuu guddoomiyahaasu watay.

Al Shaaficii الشافعي wuxuu arrinkaas ka yiri:

“Hooyadayna ma haysan xoolo ay iigu gado daabad aan u fuulo safarkaas, markaasay waxay rahantay daar oo ay markaas daabad ii gaday, oo aan sidaas guddoomiyahaas ku raacay. Markaan Yaman\يمن nimid wuxuu ii xilsaaray shaqo aan u qabtay (waana sanadka boqol afar iyo sideetan -184 – Hijriga).”

Hawshaas waxaa kusoo ifbaxday oo ku muuqatay wanaagga Al Shaaficii الشافعي oo uu ka faafay warka inuu yahay caadil aad u fiican.

Markaasuu dadka magaciisa ku sheekeystay Makkah Al Mukarramah\مكة المكرمة.

Al Shaaficii الشافعي markuu xilkaas qabtay wuxuu meel mariyay cadaalad. Dadku waagaas waxay Guddoomiyayaalka iyo qaalliyadaba way faanin jireen, waxay siin jireen xoolo, waana laaluush, si ay raalli uga noqdaan oo waxay doonayaan uga helaan, laakiin Al Shaaficii الشافعي agtiisa waxay ka heleen cadaalad ayan laaluush ku kasbin ay amaan toona.

Al Shaaficii الشافعي wuxuu arrinkaas laftiisu ka yiri:

“Waxaan qaaday xilka Najraan\نجران, halkaasuu dego qabiilka Banuu Al Xaarith bin Cabdu Al Madaan\المدان, iyo Mawaali raacsan qabiilka Thaqiif\ثقيف (oo Al Dhaa’if الطائف dega).

Guddoomiyaha Yaman\يمن wuxuu ahaa mid markay u yimaadaan ay faaniyaan oo laaluushaan. Markaasay aniga damceen inay sidaasoo kale iila dhaqmaan, anigana taas way iga waayeen. " محمد أبو Zuhrah الشافعي\محمّد أبو زهرة oo ahaan jiray muftiga Masar\مصر iyo Sheekha Jaamacadda Al Azharba\الأزهر bogga kow iyo labaatay iyo shan iyo labaatay).

رحلته إلى بغداد ومحنته

Safarkiisa Baghdaad iyo mixnadiisa

لما نزل الشافعي باليمن، ومن أعمالها نجران، كان بها وال ظالم، فكان الشافعي يأخذ على يديه، أي ينصحه وينهاه، ويمنع مظلّمه أن تصل إلى من تحت ولايته، وربما نال الشافعي ذلك الوالي بالنقد، فأخذ ذلك الوالي يكيد له بالدس والسعاية والوشاية. وفي ذلك الزمان الذي كان فيه الحكم للعباسيين، كان العباسيون يعادون خصومهم العلويين، لأنهم يدلون بمثل نسبهم، ولهم من رحم الرسول محمد – صلى الله عليه وسلم – ما ليس لهم، فإذا كانت دولة العباسيين قامت على النسب، فأولئك يمتون بمثله، وبرحم اقرب، ولذا كانوا إذا رأوا دعوة علوية قضوا عليها وهي في مهدها، ويقتلون في ذلك على الشبهة لا على الجزم واليقين، إذ يرون أن قتل بريء يستقيم به الأمر لهم، أولى من ترك متهم تجوز أن يفسد الأمن عليهم. (الشافعي، محمد أبو زهرة ص22)

جاء والي نجران العباسيين من هذه الناحية، واتهم الشافعي بأنه مع العلوية، فأرسل إلى الخليفة هارون الرشيد: "إن تسعة من العلوية تحركوا، ثم قال في كتابه: "إني أخاف أن يخرجوا، وإن هاهنا رجلا من ولد شافع المطلي لا أمر لي معه ولا نهى".

وقيل أنه قال في الشافعي:

"يعمل بلسانه ما لا يقدر عليه المقاتل بسيفه."

فأرسل الرشيد أن يحضر أولئك نفر التسعة من العلوية ومعهم الشافعي. ويقال قتل التسعة، ونجا الشافعي بقوة حخته، وشهادة القاضي محمد بن الحسن الشيباني، أما قوة حخته فكانت بقوله للرشيد وقد وجه إليه التهمة بيه النطع والسيف:

"يا أمير المؤمنين، ما تقول في رجلين أحدهما يراني أخاه، والآخر يراني عبده، أيهما أحب إلي؟"

قال: "الذي يراك أخاه."

قال:

"فذاك أنت يا أمير المؤمنين، إنكم ولد العباس، وهم ولد علي، ونحن بنو المطلب، فأنتم ولد العباس تروننا إخوانكم، وهم يروننا عبيدهم." (الشافعي، محمد أبو زهرة ص 22-23)

أما شهادة محمد بن الحسن الشيباني فذلك لأن الشافعي استأنس لما رآه في مجلس الرشيد عند الإتهام، فذكر بعد أن ساق ما ساق أن له حظا من العلم والفقه، وأن القاضي محمدا بن الحسن يعرف ذلك. فسأل الرشيد محمدا، فقال: "له من العلم حظ كبير، وليس الذي رفع عله من شأنه." قال:

"فخذة إليك حتى انظر في أمره."

وبهذا نجا. (الشافعي، محمد أبو زهرة ص 24)

قال محمد عفيف الزعبي في مقدمة ديوان الشافعي:

قال الشافعي:

"فسري ما كان به فاستوى جالسا فقال:

"يا ابن إدريس: كيف علمك بالقرآن؟"

"عن أي علوم تسألني؟ عن حفظه قد حفظته ووعيته بين جنبي وعرفت وقفه وابتدائه، وناسخه ومنسوخه وليليه ونهاريه ووحشيه وأنسيه وما خوطب به العام يراد به الخاص، وما خوطب به الخاص يراد به العام."

فقال لي:

"والله يا ابن إدريس لقد ادعيت علما، فكيف علمك بالنجوم؟"

فقلت:

"إني لأعرف منها البري من البحري والسهلي والجبلي والفيلقي والمصبح وما تحب معرفته."

قال:

"فكيف علمك بانساب العرب؟"

قال: فقلت:

"إني لأعرف أنساب اللنام وأنساب الكرام ونسبي نسب أمير المؤمنين."

قال:

"لقد ادعيت علما فهل من موعظة تعظ بها أمير المؤمنين؟"

قال:

فذكرت موعظة لطاؤوس اليماني فوعظته بها، فبكى وأمر لي بخمسين ألفا وحملت على فرس وركبت من بين يديه وخرجت، فما أن وصلت الباب حتى فرقت الخمسين ألفا على حجاب أمير المؤمنين وبوابيه."

قال:

فحقتي هرثمة وكان صاحب هارون الرشيد، فقال:

"أقبل هذه مني."

قال: فقلت له:

إني لا آخذ العطية ممن هو دوني وإنما آخذها ممن هو فوقي."

قال:

"فوجد في نفسه."

قال:

"وخرجت كما أنا حتى جئت منزلي فوجهت إلى كاتب محمد بن الحسن بمائة دينار وقلت:

"اجمع الوراقين الليلة على كتب محمد بن الحسن وانسخها لي ووجه بها إلي."

قال:

"فكتبت لي ووجه بها إلي."

محنته\ Safarkiisa Baghdaad\ بغداد\ iyo mixnadiisa

Al Shaaficii\ الشافعي\ markuu Yaman\ يمن\ degay iyo gobolka Najraan\ نجران\ waxaa guddoomiye ka ahaa nin daallin ah. Markaasuu Al Shaaficii\ الشافعي\ waanin jiray, dulmigana ka reebi jiray inuu dadka uu guddoomiyaha u yahay gaaro. Waxaana dhici kartay inuu Al Shaaficii\ الشافعي\ guddoomiyaahaas si xoog leh wuxuu falay uga hor imaan jiray.

Markaasuu guddoomiyahaasu Al Shaaficii\ الشافعي\ xumaan u qorsheeyey iyo inuu been ka sheego oo masabido iyo inuu boqorka dawladda ku diro.

Zamankaasna boqornimada waxaa hayay Cabbaasiyiinta\ العباسيين\, kuwaanoo colaadin jiray Calawiyiinta\ العلويين\ oo xukunka ku qabsada ama kula tartama. Sababtuna ay tahay inay Calawiyiintu\ العلويين\ nasabkooda oo kale leeyihiin (oo labaduba waa Ahlu Al Bayti\ أهل البيت\ oo waxay ku abtirsadaan Haashim bin Cabdu Manaaf\ هاشم بن عبد مناف\ oo waa Haashimiyiin\ هاشميين\), Rasuulka Muxammadna Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam way uga rixin dhow yihiin (oo Calawiyiintu\ العلويين\ waa caruurta Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo caruurta gabadhiisa Faadhimah\ فاطمة\ Sallaa Allaahu Calayhaa Wa Sallam), taasoo ayan ayagu lahayn.

Markay hadday dawladda Cabbaasiyiintu\ العباسيين\ ku dhisantay oo ku istaagtay nasabka, Calawiyiintuna\ العلويين\ xooggaas oo kale ayay leeyihiin iyo rixin kasi dhow.

Sidaas daraadeed ayay waxay ahaayeen in hadday arkaan wark kasoo yeeray Calawiyiinta\ العلويين\ way dili jireen intuu warkaas yaryahayba, oo waxay sidaas ugu dili jireen tuhun oo aan ahayn wax la hubo, ayagoo u arkay in dilidda qof dambi laawe ah oo ay boqornimadoodu kusii jirayso ka mudan tahay iska daynta qof la tuhmay ay dhici karto inuu amnigooda fasaadiyo." (waxaa wariyay Mxammad Abuu Zuhra\ أبو زهرة\ محمد\, kitaabkiisa Al Shaaficii\ الشافعي\ bogga laba iyo labaatan).

Markaasuu guddoomiyaha Yaman\يمن wuxuu uga yimid Cabbaasiyiinta\العباسيين dhankaas, ay u jilicsan yihiin, wuxuuna u sheegay inuu Al Shaaficii\الشافعي ku tuhunsan yahay inuu Calawiyiinta\العلويين la jiro.

Markaasuu wuxuu qoraal u diray Khaliifada/boqorka Haruun Al Rashiid\هارون الرشيد uuna ku leeyahay:

“Sagaal Calawiyiinta\العلويين ka mid ah ayaa dhaqdhaqaaq sameeyey”, kaddibna wuxuu isla qoraalkaas ku yiri:

“waxaan ka baqayaa inay daacadda (boqorka) ka baxaan (ama ay dooniddooda xukunkaba soo if bixiyaan), halkaanna waxaa jooga nin ka mid ubadka Ahtu Al Mudh-dhalibii\أهل المطلب oo aan amarkaygana yeeleen iyo waxaan ka reebo midna.”

Waxaa kaloo la yiri inuu Al Shaaficii\الشافعي ka yiri:

“Wuxuu carrabkiisa ku qabanayaa hawl uusan karin midka seeftiisa ku dagaallamaya.”

Markaasuu Al Rashiid\الرشيد wuxuu usoo diray oo soo amray guddoomiyaha Yaman\يمن inuu Baghdaad\بغداد usoo diro sagaalkaas nin oo Calawiyiinta\العلويين ah uuna Al Shaaficii\الشافعي la socdo.

Waxaana la yiri inuu sagaalkaas wada dilay, Al Shaaficiina\الشافعي uu badbaaday, kuna badbaaday xoogga xujjadiisa, iyo markhaati kaca qaalliga Muxammad bin Al Xasan Al Shaybaanii\القاضي محمد بن الحسن الشيباني.

Xoogga xujjadiisu waxay ahayd inuu Al Rashiid\الرشيد u yimid oo uu markaas waxa lagu tuhmay kusoo rogay, isagoo seef gacantana ku haysta – waana isagoo ay agtiisa joogaan rag seefo gacanta ku sita – darin harag laga sameeyey iyo seef (oo madaxa la gooyo ku dul dhaco, dhiiggiisuna ku daato):

“Amiiru Al Mu’miniinow\أمير المؤمنين, maxaad ka leedahay laba nin oo midkood uu ii arko inaan walaalkiis ahay, kan kalena uu ii arko inaan addoonkiisa ahay: keebaan labadoodaas jeclahay?

Wuxuu yiri:

“midka kuu arka inaad walaalkiis tahay.”

Wuxuu yiri:

“Kaasuu waa adiga Amiiru Al Mu’miniinow\أمير المؤمنين, oo adinku waxaad tihiin dhasha Al Cabbaas\العباس, ayaguna dhasha Cali\علي, annaguna waxaan nahay dhasha Al Mudh-dhalib\المطلب, marka adinku haddaad tihiin dhasha Al Cabbaasu\العباس waxaad noo aragtaan inaan nahay walaalihiin, ayaguna waxay noo arkaan inaan addoontooda nahay.”

(Muxammad Abuu Zuhrah\محمد أبو زهرة ayaa ku wariyay kitaabkiisa Al Shaaficii\الشافعي bogga laba iyo labaatan iyo saddex iyo labaatan).

Markhaati kaca Muxammad bin Al Xasan Al Shaybaanii\محمد بن الحسن الشيباني waxay ahayd inuu Al Shaaficii\الشافعي u bogay oo degay markuu arkay isagoo majliska Al Rashiid\الرشيد fadhiya marka tuhunka loo soo jeediyay.

Markuu Al Shaafici الشافعي yiri wuxuu yiri ayuu wuxuu raaciyay oo ku daray inuu cilmi badan leeyahay iyo fiqi, qaali Muxammad bin Al Xasan-na\الحسن\ محمد بن القاضي inuu taas ogyahay.

Markaasuu Al Rashiid\الرشيد\ Muxammad\محمد\ waydiiyay, kanna uu yiri:

“Wuxuu cilmiga ka qaatay sad wayn, waxa lagu soo dacweeyeyna ma aha waxa uu galo.”

Markaasuu wuxuu ku yiri:

“Marka adigu wado oo ha kula joogo ilaa aan amarkiisa ka fiirsanayo.”

Sidaas ayuuna Al Shaafici الشافعي ku badbaaday (Muxammad bin Abuu Zuhrah\أبو زهرة\ محمد بن أبي زهرة: Al Shaaficii\الشافعي\, bogga afar iyo labaatan).

Maxmmad Cafiif Al Zacbi\الزبي\ محمد عفيف wuxuu hordhaca kitaabka gabayada ee Al Shaaficii الشافعي “Diiwaanu Al Shaaficii\ديوان الشافعي\” ku wariyay qisadaan, wuxuuna ku daray oo yiri:

Al Shaaficii\الشافعي\ wuxuu yiri:

“Markaasaaa tuhunkii ku jiray ka baxay, oo uu markaas fariistay uuna yiri:

“Ina Idriisow\إدريس\, يا ابن إدريس, cilmigaaga Quraanka ka warran?

Wuxuu yiri:

“Cilmigee baad iga waraysanaysaa? Xifthintiisa, waan xifthiyay aanna qalbiga ku weeleeyey labadayda dhinac dhexdooda, waxaana aqaanna meesha lagu istaago iyo bilowgiisa, iyo naasikhiisa\الناسخ\ iyo mansuukhiisa\الممنسوخ\, kan habeenka soo degay iyo midka maalinta soo degay, midka cabsidu ku jirto iyo midka kuu wheel yeela, midka caamka\عام\ lagula hadlay oo khaas\خاص\ loola dan leeyahay, iyo midka khaaska\الخاص\ lagula hadlay oo ujeedadiisu caamka\العام\ tahayba.

Markaasuu wuxuu igu yiri:

“Wa Allaahi\الله\ ina Idriisow\إدريس\ waxaad sheegatay cilmi, ee bal cilmigaaga xiddigaha ka warran?”

Markaasaan waxaan iri:

“Waxaan aqaanna kuwa barriga anfaca oo lagu hanuuno iyo kuwa badda anfaca, midka bananka fidsan anfaca iyo kuwa buuraha anfaca, Al Faliq\الفليق\ (oo la yiri waa eray greek ah), kuwa waagu u baryo oo subixii muuqda iyo waxaad jeceshahay inaad ogaataba.”

Wuxuu yiri:

“Cilmigaad u leedahay nasabka carabta bal ka warran?”

Wuxuu yiri: waxaan iri:

“Waxaan aqaanna nasabka kuwa xunxun iyo nasabka kuwa kariimiinta ahba, nasabkayguna waa nasabka Amiiru Al Mu’miniina\أمير المؤمنين\.”

Wuxuu yiri:

“Waxaad sheegatay cilmi! Mase haysaa waano aad Amiiru Al Mu’miniina\أمير المؤمنين\ ku waanisid?”

Wuxuu yiri:

“Markaasaan soo xusuustay waano uu lahaa Dhaawuus Al Yamaanii\اليماني\, oo aan markaas ku waaniyay, markaasuu booyay oo amray in la i siiyo konton kun, isaga hortiisa ayaana la faras la i saaray oo aan la maray oo aan baxay.

Intaanan albaabka gaarin ayaan kontonka kun u qaybiyay xaajibyadiisa iyo kuwa albaabadiisa ilaaliya.”

Wuxuu yiri:

“Markaasaa waxaa iga daba yimid Harthamah\هزيمة oo ahaa saaxiibka Haaruun Al Rashiid
 هارون الرشيد\ wuxuuna yiri:
 “Intaanna aniga iga oggolow.”
 Wuxuu yiri: waxaan ku iri:
 “Wax la isi siiyo anigu kama qaato nin iga hooseeya ee waxaan ka qaataa kuwa aniga iga korreeya.”
 Wuxuu yiri:
 “Markaasuu taas ka carooday.”
 Wuxuu yiri:
 “Sidaas aan ahay ayaan kusoo baxay oo markaan gurigayga imid ayaan karaaniga Muxammad bin Al Xasan\محمد بن الحسن waxaan u dhiibay boqol diinaar aanna ku iri:
 “Caawa waxaa isu keentaa kuwa waraaqaha gada oo waraaqo iiga gad waxaadna iigu soo guurisaa kutubta Muxammad bin Al Xasan\محمد بن الحسن, kaddibna ii keen (ama ii soo dir).”
 Wuxuu yiri:
 “Markaasaa la ii soo dhigay, lana ii soo diray.”
 Waa intaas warkaan kasoo qaadannay Al Zacbi\الزعي Allaha dambigiisa dhaafee.

ذرية الشافعي

Caruurta Al Shaaficii

أنجب الشافعي أربعة أبناء هم: محمد (أبو عثمان)، وفاطمة، وزينب من أم واحدة، ومحمد (أبو الحسن) من جاريته المسماة دنانير.
 أما محمد بن الشافعي: فهو الشيخ أبو عثمان القاضي، وهو أكبر أولاد الشافعي، ولما توفي والده كان بالغاً مقيماً بمكة، وهو الذي قال له الإمام أحمد بن حنبل:
 «إني لأحبك لثلاث خلال: أنك ابن أبي عبد الله، وأنك رجل من قريش، وأنك من أهل السنة.»
 قيل أنه ولي القضاء ببغداد، وقيل أن هذا غير صحيح، إنما ولي القضاء بالجزيرة العربية وأعمالها، وولي أيضاً القضاء بمدينة حلب، وبقي بها سنين كثيرة، وأعقب ثلاثة بنين منهم: العباس بن محمد بن محمد بن إدريس.
 وقد قيل للشافعي: «ما اسم أبي عثمان؟»، فقال:
 «سميته أحب الأسماء إلي: محمداً.»
 ولأبي عثمان مناظرة مع الإمام أحمد بن حنبل في جلود الميتة إذا دُبغت. وعن محمد بن إدريس الشافعي أنه قال: قال لي أحمد ابن حنبل:
 «أبوك أحد الستة الذين أدعو لهم في السحر.»
 توفي بالجزيرة بعد سنة أربعين ومائتين.
 وللشافعي ولد آخر يسمى محمداً أيضاً، وكنيته أبو الحسن، وهو من جارية اسمها دنانير، قيل أنه قدم مصر مع أبيه وهو صغير، فتوفي بها في شعبان سنة إحدى وثلاثين ومائتين (231 هـ). وأما ابنته فاطمة فقد روي أنها لم تعقب.

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

الشافعي Caruurta Al Shaaficii

Al Shaaficii الشافعي wuxuu dhalay afar cunug oo kala ah: (Kow) Muxammad (Abuu Cuthmaan) محمد أبو عثمان, (Laba) Faadhimah فاطمة, (Saddex) Zaynab زينب oo saddexdaasu waa isku hooyo, (Afar) Muxammad (Abuu Al Xasan) محمد أبو الحسن ayna u dhashay addoon uu lahaa oo la yiraahdo Danaaniir دنانير.

Muxammad bin Al Shaaficii محمد الشافعي waa qaalliga Al Shaykhu Abuu Cuthmaan القاضي القاضي, isagaana caruurta Al Shaaficii الشافعي ugu wayn, marka aabihiis la oofsadayna wuxuu ahaa qaan gaar, wuxuuna degganaa Makkah مكة, waana midka uu Al Imaam Axmad bin Xanbal حنبل الإمام أحمد بن حنبل ku yiri:

“Anigu waxaan kugu jeclahay saddex sababood: (kow) Waxaad tahay wiilka Abuu Cabdu Allaahi أبو عبد الله, (Laba) Waxaad tahay nion Quraysh قريش ah, (Saddex) Waxaad ka mid tahay Ahlu Al Sunnah أهل السنة.”

Waxaa la yiri inuu qaalli ka noqday Baghdaad بغداد, waxaana la yiri inayan taasi saxiix ahayn, bal wuxuu qaalli ka noqday Al Jaziirah Al Carabiyah الجزيرة العربية (kuna taalla dalka Ciraaq عراق) iyo deegaankeeda, wuxuu kaloo qaalli ka noqday magaalada Xalab حلب (ee arliga Suuriya سورية) oo uu sanooyin badan joogay.

Wuxuuna ka tegay oo ka haray saddex wiil ayna ka mid yihiin Al Cabbaas bin Muxammad bin Muxammad bin Idriis العباس بن محمد بن محمد بن إدريس.

Waxaa Al Shaaficii الشافعي lagu yiri:

“Waa maxay magaca Abuu Cuthmaan أبو عثمان?”

Wuxuu yiri:

“Waxaan u bixiyay magacaan magacda ugu jeclahay oo ah Muxammad محمد.”

Abuu Cuthmaan أبو عثمان waxay isugu soo bexeen imam Axmad bin Xanbal حنبل الإمام أحمد بن حنبل axkaamta hargaha xoolaha dhintay ku saabsan marka la magdo.

Waxaa Muxammad bin Muxammad bin Idriis Al Shaaficii محمد بن إدريس الشافعي laga wariyay inuu yiri:

“Axmad bin Xanbal حنبل الإمام أحمد بن حنبل ayaa wuxuu igu yiri:


“Aabahaa waa mid ka mid ah lixda qof aan waqtiga suxuurta u duceeyo.”

Waxaa Abuu Cuthmaan أبو عثمان lagu oofsaday Al Jaziirah الجزيرة kaddib sanadka laba boqol iyo afartan.

Al Shaaficii الشافعي wuxuu kaloo leeyahay wiil kale oo isagana Muxammad محمد la yiraahdo, kuniyadiisuna tahay Abuu Al Xasan أبو الحسن, ayna u dhashay gabar addoon u ahayd oo magaceedu yahay Danaaniir دنانير.

Waxaa la yiri inuu Masar مصر yimid isagoo aabihiis la socda oo yar, ayaduuna ku dhintay bisha Sahcbaan شعبان ee sanadka laba boqol kow iyo soddon Hijriga.

Gabadhiisase Faadhimah فاطمة waxaa la wariyay inayan cirib ka harin.



Masjidka Imaam Al Shaaficii **الإمام الشافعي** ee Al Qaahira, arliga Masar **مصر**: qabrigiisu masjidkaan dhexdiisuu ku yaallaa, Allaha u naxariistee.



Qabriga Al Imaamu Al Shaaficii\الإمام الشافعي\ Allaha u naxariistee raallina ka ahaadee.

الترفض

ما الرفض ديني ولا إعتقادي
خير إمام وخير هادي
فإن رفضي إلى العباد

1. قالوا: ترفضت قلت: كلا
2. لكن توليت – غير شك -
3. إن كان حب الولي رفضا

Waxay i yiraahdeen: shiico ayaad noqotay

- 1.Waxay yiraahdeen: waxaad noqotay shiico waxaanna iri: maya // shiicadu diintayda iyo caqiidadayda midna ma aha
- 2.Laakiin waxaan Wali ka dhigtay imaamka ugu khayr badan iyo ugu khayr badan kuwa wax hanuuniya.
- 3.Hadduu jacaylka Waligu qofka shiico ka dhigaya // waxaan diidanahay addoommada.

(Al Raafidah\الرافضة\ macneheedu luqad ahaan waa diidmada, isla markaasna waa magac kale oo shiicada la yiraahdo shiicana loogu bixiyay inay kuwa caqiidadaas qaba ay yiraahdaan waxaan raacsannahay Al Imaam Cali bin Abii Dhaalib\أبي طالب\ Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo halkaanna shiico\شيعة\ macneheedu waxaa weeye: kuwaa raacsan, looguna bixiyay in rag reer Ciraaq\عراق\ ah ay u yimaadeen Zaydo bin Calii bin Al Xusayn bin Calii bin Abii Dhaalib\أبي طالب\ زيد بن علي بن الحسين بن علي بن أبي طالب\, Ilaahay dhammaantood raalli ka noqdee, una soo jeediyeen inay u dagaallamayaan oo boqornimada islaamka u caleemo saarayaan oo boqorka Amawiga\أمويدي\ ah ridayaan, ee barii ka noqo Abu Bakr\أبو بكر الصديق\ iyo Cumar\عمر\ . Markaasuu ka diiday.

Caqiidada shiicadana waxaa ka mid ah inay Abu Bakr Al Ssiddiiqu\أبو بكر الصديق\ iyo Cumar bin Al Khadh-dhaab Allaha\أبو بكر الصديق\ labadoodaba raalli ka noqdee Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dabadiis ay gaaloobeen oo diinta ka baxeen,

ayna Calii bin Abii Dhaalib **علي بن ابي طالب صلى الله عليه وسلم** oo xukunka lahaa ay ka xogeen. Markaasay labadoodaas caayaan oo habaaraan.

Waxaa kaloo caqiidooda ka mid ah inay yiraahdaan inuu Calii **علي** lahaa khilaafada Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dabadiis oo uu isagu imaamkooda yahay oo ay jecel yihiin oo raacsan yihiin: sidaasaa shiico\شيعة\ loogu bixiyay.

Markaasay Zayd **زيد** imtixaaneen oo ka wareysteen wuxuu ka qabo Abuu Bakr Al Siddiiq **أبو بكر الصديق** iyo Cumar bin Al Khadh-dhaab **عمر بن الخطاب**.

Markaasuu u sheegay inuu jecel yahay labadoodaba ayna yihiin raga ugu khayr badan Nabi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dabadiis, ayna waliyadiisa yihiin uu u hoggaansan yahay. Wuxuuna ku daray inay labadoodaas ahaayeen wasiirrada awoowihis Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo uusan diidayn wax xunna ku sheegayn.

Markuu Zayd **زيد** warkaas yiri ayay raggaas diideen oo ka tageen: waa diideen afka carabiga waa rafadu\رفضوا\, markaasaa ayagana loobixiyay Al Raafidah\الرافضة\ kuwa diiday Zayd **زيد**.

Zayd **زيد** qaar yar ayaa raggaas ka raacay, waana kuwa la yiraahdo shiicada Al Zaydiyah\الزيدية\, oo ay qaarkood Yaman\يمن\ wax badan xukumeen ilaa kun sagaal boqol iyo lixdanka bilowgiisa. Kaddibna Zadiyada\الزيدية\ Yaman\يمن\ waxay ku darsameen oo galeen math-habka Al Shaaficiyah\الشافعية\.

Marka wuxuu guddoomiyaha Yaman\يمن\ imam Al Shaaficii **الشافعي** ku dacweeyey inuu ku tuhunsan yahay inuu Calii **علي** jecel yahay oo uu sidaas shiico\شيعة\ yahay. Markaasuu al imaamu Al Shaaficii **الشافعي** wuxuu gabayadaan ku leeyahay in hadduu jecaylka Calii **علي** iyo Abuu Bakr **أبو بكر** iyo Cumar **عمر** shiico ka dhigayo uu isagu shiico\شيعة\ yahay, laakiin ayan shiicadu\شيعة\ diintiisa iyo caqidadiis toona ahayn: bal jecelkeedu wuxuuba ka mid yahay diinta islaamka ayuu leeyahay.

يا راکبا

واهتم بقاعد خيفها والناهض
فيضا كملتطم الفرات الفانض
فليشهد الثقلان أني رافضي

1.يا راکبا قف بالمحصب من منى
2.سحرا إذا فاض الحجيج إلى منى
3.إن كان رفضا حب آل محمد

Jacaylka Aali Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

- 1.Midkaagaan daabadda saaranow joogso Al Muxassib\المحصب\ ee Mina\منى\ ku taalla // codkaagana kor ugu qaad (duco) markaad Mina\منى\ taaggeeda tafaysid kana soo degeyside
- 2.Aroorta hore markay xujaydu (Carafo ka) soo gaddoomaan // sida mawjado biya oo ah oo isku dhacdhacaya sida wabiga Al Furaat\الفرات\ biyihisa oo buuxa oo kale
- 3.Hadduu jacaylka Aali Muxammad\آل محمد\ shiico yahay // Jinniga iyo insiguba markhaati ha ka ahaadaan inaan anigu shiico ahay

شهادة حق

- | | |
|-----------------------------|-----------------------------|
| 1. شهدت بأن الله لا رب غيره | وأشهد أن البعث حق وأخلص |
| 2. وأن عرى الإيمان قول مبين | وفعل زكي قد يزيد وينقص |
| 3. وأن أبا بكر خليفة ربه | وكان أبو حفص على الخير يحرص |
| 4. وأشهد ربي أن عثمان فاضل | وأن عليا فضله متخصص |
| 5. أئمة قوم يهتدى بهداهم | لحي الله من إياهم ينتقص |

Shahaadada runta ah

- 1.Waxaan marag ka ahay inuusan jirin Rabbi Ilaahay ghayrkiis ah // waxxaanna makhaati ka ahay inuu bacthika\البعث isoo noolaynta maalinta qiyaame run tahay
- 2.Iyo inuu qaybaha iimaanka isku xiro hadal cad // iyo ficil suuban, iimaankuma waa kordhaa waana naaqusaa
- 3.Iyo Abaa Bakr\أبا بكر yahay Khaalifka Rabbigiis // Abuu Xafsana\أبو حفص wuxuu ahaa, waana Cumar\عمر, mid mar walba khayrka ilaaliya
- 4.Waxaanna markhaati ka ahay inuu Cuthmaan\عثمان sarreeyo // iyo inay Calii\علي sarrayntiisu gooni tahay
- 5.Waana imaamyada qawm hanuunkooda lagu hanuuno // Ilaahay ha lacnado kuwa ayagaas naaqusnimo ku sheega.

آل النبي ذريعتي

- | | |
|--------------------|--------------------|
| 1. آل النبي ذريعتي | وهموا إليه وسيلتي |
| 2. أرجو بهم أعطى | بيدي اليمين صحيفتي |

Aali Muxammad\آل محمد Waa Xarigayga

- 1.Qoyska Nabigu waa xarigga i gaarsiinaya hoyga fiican iyo dariiqa toosan // ayaaganna isaga ku gaarayaa oo i gaarsiinaya
- 2.Jacaylkooda iyo inay raalli iga yihiin daraadood ayaan rajaynayaa in maalinta berrito qiyaame la iga siiyo // gacantayda midig kitaabkayga.

حب أبي بكر وعلي رضي الله عنهما

- | | |
|--------------------------------|------------------------------|
| 1. إذا نحن فضلنا عليا فإننا | روافض بالتفضيل عند ذوي الجهل |
| 2. وفضل أبي بكر إذا ما ذكرته | رميت بنصب عند ذوي الجهل |
| 3. فلا زلت ذا رفض ونصب. كلاهما | بحبيهما حتى أوسد في الرمل |

Jacaylka Abuu Bakr\أبو بكر\ iyo Calii\علي\ Allaha raalli ka noqdee

- 1.Haddaan Calii\علي\ sare marinno waxay noo arkaan kuwa jaahiliinta ahi inaan annagu nahay // shiico inaan sare marinnay daraadeed
- 2.Markaan Abuu Bakr\أبو بكر\ sarrayntiisa xusana // waxaa la igu tilmaamaa inaan colaadiyay Aali Baytka\أهل البيت\ markaan sarrayntaas xuso
- 3.Marka waxaan ahay shiico oo jecel Calii iyo Ahlu Al Baytka\أهل البيت\ isla markiiba colaadiyay (siday jaahiliinta ka qabaan qofka Abuu Bakr\أبو بكر\ jecel –oo ay shiicadu tiraahdo inuu Calii\علي\ xukunka ka xoogay - // oo jacaylkoodaan ku taagnanaya ilaa ciidda la i huwiyo oo la ii barkiyo (oo qabriga la i dhigo).

آل بيت رسول الله صلى الله عليه وسلم حبكم فرض

فرض من الله في القرآن أنزله
من لم يصل عليكم لا صلاة له

1.يا آل بيت رسول الله حبكم
2.يكفيكم من عظيم الفخر أنكم

Qoyska Nabi Muxammadow Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam jacaylkiinu waa fardi

- 1.Aalu Baytka\أهل البيت\ Rasuulka Ilaahayow jecelkiinnu waa // waajib uu Ilaahay fardi ka yeelay Quraanka dhexdiisa uu soo dejiyay
- 2.Faan wayn waxaa idiinku filan inaad adinka // qofkaan idinku sallin ayan salaaduu tukaday waxba ka jirin.

حب الفاطمية

وسبويه وفاطمة الزكية
فهذا من حديث الرافضة
يرون الرفض حب الفاطمية

1.إذا في المجلس نذكر عليا
2.يقال تجاوزوا يا قوم هذا
3.برنت إلى المهيمن من أناس

Jacaylka Faadhimah\فاطمة\

- 1.Marka fadhiga aan ku xusno Calii\علي\ // iyo labadiisa wiil // iyo Faadhimah\فاطمة\ midda Daahiradda ah
- 2.Waxaa la yiraahdaa: kan iska daaya ragow // oo wuxuu ka mid yahay warka shiicada
- 3.Ilaahay Al Muhayminu\المهيمن\ hortiiisa ayaa dambi laawe ka ahay dad // u arka inuu shiicannimo tahay in Faadhimah\فاطمة\ la jeclaado.

نور الله لا يهدى لعاص

فأرشدني إلى ترك المعاصي
ونور الله لا يهدى لعاصي

1. شكوت إلى وكيع سوء حظي
2. وأخبرني بأن العلم نور

Nuurka Ilaahay caasi lama siiyo

1. Wakiic\وكيع (oo saaxiibkiis ahaa) ayaan uga dacwooday siday xifdintaydu u xumaatay // Markaasuu iigu caqli celiyay oo uu igula taliyay inaan macaasida ka fogaado
2. Wuxuuna ii sheegay inuu cilmigu nuur yahay // iyo inaan nuurka Ilaahay caasi la tusin oo la siin.

لمن نعطي رأينا؟

فلا أنت محمود ولا الرأي نافع

ولا تعطين الرأي من لا يريد

Yaan taladeenna siinnaa?

Hana siin talo midaan doonayn // oo markaas adiguna aadan mahadsanayn taladuna ayan wax tarayan

الحب الصادق

هذا محال في القياس بديع
إن المحب لمن يحب مطيع
منه وأنت لشكر ذاك مضيع

1. تعصي الإله وأنت تظهر حبه
2. لو كان حبك صادقا لأطعته
3. في كل يوم يبتديك بنعمة

Jacaylka runta ah

1. Ilaahay ayaad caasiyaysaa adigu jacaylkiisa muujinaya oo dadka ku leh waa jeclahay // taasna qiyaasta waa waxaan suurta gal ahayn, ayadoo ayan qalbiga mu'mimka ku kulmi karin jacaylka Ilaahay iyo in la caasiyo, oo qofka jecel uu hore ayuu ka adeecaa
2. Hadduu jecaylkaagu run yahay waad adeeci lahayd // oo qofku wax jecel kuu jecel yahay waa adeecaa
3. Maalin kasta ayuu Ilaahay nicmooyinkiisa iskiis kuu siinayaa // adiguna nicmooyinkaas ka mahad celin maysid.

القناعة رأس الغنى

فصرت بأذيالها ممتسك
ولا ذا يراني به منهمك
أمر على الناس شبه الملك

1. رأيت القناعة رأس الغنى
2. فلا ذا يراني على بابه
3. فصرت غنيا بلا درهم

Qanaacadu waa madaxa hodantinnimada

1. Waxaan arkay inay qanaacadu tahay madaxa hodantinnimada // Markaasaan saynteeda ku dhigay
2. Markaasuusan kaasu albaabkiisa igu arkayn, anigoo adduun ka doonaya, // uusan kaas kalena igu arkayn anigoo isagaas ku dadaalaya araggiisa
3. Markaasaan anigoo aan hal dirham lahayn ayaan hodan noqday // Dadkana aan ag maraa sida anigoo boqor la i moodo.

الناس والكلاب

1. ليت الكلاب لنا كانت مجاورة وأنا لا نرى مما نرى أحدا
2. إن الكلاب لتهدى في مواطنها والخلق ليس بهاد، شرهم أبدا
3. فأهرب بنفسك واستأنس بوحدتها تبقي سعيدا إذا ما كنت منفردا

Dadka iyo eeyahay

1. Fiicnaan lahaydaa hadday eeyuhu dariskeen yihiin meeshuu dadka daris nala yahay // Aanna dadka aana aragno midna aanan ka arag
2. Eeyaha meeshay ku nool yihiin (dhawaaqooda) ayaa lagu hanuunaa // dadkuna ma aha wax lagu hanuuno, oo shartoodu waa joogto aan damayn oo dab ah
3. Marka naftaada la carar keligeedna wehesho // markaasaad nolol fiican heleysaa markaad keligaa tahaye.

Waa hore ayuu ninka carabta ah oo deeqsinnimadiisa maahmaah ku noqday oo magaciisu ahaa Xaatim Al Dhaa'ii حاتم الطائي, ahna aabahay dhalay soomaalida Reer Baraawe, ayuu eygiisa wuxuu ka bixiyay gurigiisa dhexdiisa oo uu dibadda dhigay si ay dadka baadiyahaas maraya oo gargaar doonaya ay qayladiisa maqlaan dabkiisana arkaan, oo dab ayuu dhidi jiray, oo ay kusoo leexdaan ayagoo codka eyga iyo dabkiisa soo raacaya.

عدو يتمنى الموت للشافعي

1. تمنى رجال أن أموت وإن أمت
 2. وما موت من قد مات قبلي بضائر
 3. لعل الذي يرجو فنائي ويدعى
- فتلك سبيل لست فيها بأوحد
ولا عيش من قد عاش بعدي بمخلد
به قبل موتي أن يكون هو الردي

Al Shaaficii الشافعي cadawgiis oo inuu dhinto jeclaaday

Ibnu Cabdu Al Xakam\ابن عبد الحكم\ ayaa wuxuu wariyay inuu maqlay ninka la yiraahdo Ash-hab\أشهب\ oo Al Shaaficii الشافعي\ habaaraya, markaasuu taas Al Shaaficii الشافعي\ u sheegay, markaasuu saddexdaan tixood tiriyay:

1. Rag ayaa waxay jeclaadeen inaan dhinto, haddaan dhintana // taasu waa dariiq aanan keligay ku ahayn, oo qof kastoo nool waa dhimanayaa
2. Qofka aniga hortay dhintayna dhimashadiisu wax dhimi mayso // noolida midka aniga dabayday uu nool yahayna isaga waarin mayso
3. Waxaa dhici karta midka jecel dhimashadayda oo i habaaraya // dhimashadayda horteed inuu isagu ahaado kan aniga hortay dhinta, oo nolol iyo geeriba Gacanta Ilaahay ayay ku jiraan

من تجارب الإمام

(مع الأيام - مع النفس - مع القضاء)

التجربة الأولى - مع الأيام:

1. دع الأيام تفعل ما تشاء وطب نفسا إذا حكم القضاء
2. ولا تجزع لحادثة الليالي فما لحوادث الدنيا بقاء
3. وكن رجلا على الأهوال جلدا وشيمتك السماحة والوفاء

التجربة الثانية - مع النفس:

4. وإن كثرت عيوبك في البرايا وسرك أن يكون لها غطاء
5. تستر بالسخاء فكل عيب يغطيه - كما قيل - السخاء
6. ولا تر للأعداء قط ذلا فإن شماتة الأعداء بلاء
7. ولا ترج السماحة من بخيل فما في النار للظمان ماء
8. ورزقك ليس ينقصه التأنى وليس يزيد في الرزق العناء
9. ولا حزن يدوم ولا سرور ولا بوؤس عليك ولا رخاء
10. إذا أنت كنت ذا قلب قنوع فأنت ومالك الدنيا سواء

التجربة الثالثة - عندما ينزل بنا الموت:

11. ومن نزلت بساحته المنايا لا أرض تقيه ولا سماء
12. وأرض الله واسعة ولكن إذا نزل القضاء ضاق الفضاء
13. دع الأيام تغدر كل حين فما يغني عن الموت الدواء

Tajribooyinka/Waayo aragnimada Al Imaam Al Shaafici الشافعي

Tajribada koowaadn: Tajribooyinka ayaamaha

1. Iska daa ayaamuhu ka falaan waxay doonaane // naftaaduna ha ku raaxaysato xukunkuu qadarku xukumay

(tixdaan waxaa ku sugan in la isugu yeerayo inuu qofku raalli ku noqdo wuxuu Ilaahay xukumo, kaddib markuu qofku dadaalo oo asbaabuhu ku gaari lahaa wuxuu doonayo la wada yimaado: intaas kaddib raalli ha ku noqdo xukunka loo xukumay).

3. Hana ka nixin waxyaalaha xun oo habeenkii (waana zaman kasta) dhaca // maxaa yeelay waxaa adduunkaan ka dhaca ma nagaadid ma laha

(dad badan ayaa naxa oo argagaxa markay kusoo degaan dhacdooyinka habeenkii, hase is weydiiyo sidaas miyuu adduunkuu waligiis ahaanayaa? Marka waxaa kuu haboon inaad nixin oo cabsan maxaa yeelay dhacdooyinka habeen ma waaraan cusrigana waxaa la socda yusri إن مع

(العسر يسرا).

Tajribada labaad: Tajribada Nafta

4. Waxaadna ahaata nin dhacdooyinka naxdinta leh xoog u leh // khluqdaaduna ha noqoto cafinta iyo oofinta ballamadaiyo heshiisyadaad gashay

(Markay wax naxdin leh oo laga baqo dhacaanna waxaa soo baxaysa dunta raggu ka samaysan yahay ee marka ha lagaa arko inaad labisatay deeqsinnimo iyo oofin ballamada iyo heshiisyada).

4. Hadday ceebahaagu bataan khalqiga dhexdiisa // aadna ku farxaysid in dabool loo yeelyo daboola

5. Waxaad isku asturtaa deeqsinnimada ayadoo ceeb walba // uu daboosho sida la yiri deeqsinnimadu

(kulligeenna waxaan ku dadaalnaa inaan ceebeheenna dadka ka qarinnno, waxa ugu khayr badan oo ceebaha qaryana waa deeqsinnimada, marka xoolo bixi oo deeqsi noqo markaasuu dadku ceebahaaga asturayaaye).

6. Waligaana cadawgaagu yuusan kaa arkin dullinnimo // ayadoo ay ku farxayaan taasoo belo ah (Islaamkuna wuxuu muslimiinta farayaa inay rizqiga iyo cizziga uu Ilaahay siiyay ay si kaamil ah u muujiyaan, si ayan cadawgoodu ugu farxin hadday saboolnimo iyo baahi ka muuqato: marka marna yeeyan dulli kaa arag).

7. Hana ka filan cafis mid baxhiil ah // ayadoo uusan dabka ku jirin wuxuu kan oomani ka harraad baxo

(Baxhiilku waa cadawga Ilaahay iyo cadawga dadka oo wax rajo ah lagama qabo, markay baahi timaadana wuxuu la mid yahay siduu dabku u yahay qof ooman: qof ooman dab ma carraad tiri karaa? Waa maya!)

8. Rizqigaanu kuma yaraado hadduu soo daaho // kuma kordho rizqigu ku daalidda raadintiisu (rizqigaaga Ilaahay ayaa damaana qaaday, in si fiican lagu raadsana waa la doonayaa: marka maxaa colaad loogu doonayaa ama loogu murugoonayaa? Sabir darro oo aad sugi waydid ha la imaanin)

9. Calool xumana ma nagaaddo iyo farax toona // sidoo kale saboolnimo iyo hodannimaba (waaba sidaas caadada ayaamuhu: murug iyo farax, saboolnimo iyo hodantinnimo, oo kuma jiro mid waaraya, taasoo yididiilo na siinaysa)

10. Haddaad tahayna mid leh qalbi qanca // markaas adiga iyo midka adduunkoo idil milkiya oo leh waad siman tihiiin
(qanaacadu waa sirta nolosha fiican, oo qofka qanca iyo midka maalka adduunkoo idil milkiya way siman yihiin!)

Tajribada Saddexaad: Tajribada markay geeridu nagu soo degato

11. Qafkay daydkiiisa geeridu kusoo degatana // ma jiro arli ka celin kara iyo samaba
12. Arliga Ilaahayna waa waasac // laakiin markuu xukunku soo dego arligu wuxuu noqonaya ciriiri
13. Iska daa maalmuhu waxay doonaan ha sameeyaan // oo daawadu geerida waxba kama tarto
(Mar hadday geeridu soo degato wax celin karaa ma jiraan iyo meel looga cararo toona: geerida ah cudurka aan daawo lahayn ee maxaad ugu talo gashay oo aad u meel dhigatay maalinta la is kulminayo?)

هذه هي الدنيا

ولحم الضأن تأكله الكلاب

وذونسب مفارشه التراب

1. تموت الأسد في الغابات جوعا

2. وعبد قد ينام على حرير

Adduunku waa kan

1. Libaaxyadiina gaajay duurka ugu dhimanayaan // hilibkii idahana eeyaa cunaya
2. Nin addoon ahna wuxuu ku seexanayaa xariir // midka laan dheer ahna gogoshiisu waa ciidda.

العبرة باللابس لا بالملابس

بفلس لكان الفلس منهن أكثر

نفوس الورى كانت أجل وأكبر

إذا كان عضبا حيث وجهته فرى

فكم من حسام في غلاف تكسرا

1. علي ثياب لو تباع جميعها

2. وفيهن نفس لو تقاس ببعضها

3. وما ضر نصل السيف إخلاق غمده

4. فإن تكن الأيام أزرت ببيزتي

Cibradu kuma jirto dharka ee waxay ku jirtaa qofka labisan

- 1.Waxaan labisanahay dhar haddii lagu iibiyo dhammantood // hal dhururq uu dhururuqu ka qiimo badan yahay
- 2.Dharkaasna waxaa ku dhex jira naf haddii lagu qiyaasu oo la barbar dhigo kuwa kale // ee dadka way ka jaliil santahay oo ka wayntahay
- 3.Seefta wax uma dhimo hadduu galkeedu jeexjeexan yahay // hadday af badan tahay oo mmeesha lagu dhuftaba ay goynayso
4. Marka hadaay ayaamuhu dharkayga ka dhigeen wax la yaso // meeqaa seefo af badan oo wax gooya ku dhex jira gal jeexjeexaan.

قليل الحمل للدنس

- | | |
|------------------------------|--------------------------------|
| يا من يعد عليه العمر بالنفس | 1.يا واعظ الناس عما أنت فاعله |
| إن البياض قليل الحمل للدنس | 2.إحفظ لشبيك من عيب يدنسه |
| وثوبه غارق في الرجس والنجس | 3.كحامل لثياب الناس يغسلها |
| إن السفينه لا تجري على اليبس | 4.تبغي النجاة ولم تسلك طريقها |
| ما كنت تتركب من بغل و من فرس | 5.ركوبك النعش ينسبك الركوب على |
| وضمة القبر تنسي ليلة العرس | 6.يوم القيامة لا مال و لا ولد |

Wasakh yar ayay qaaddaa

- 1.Midkaagaan dadka waaninayow maxaad falaysaa // midkaagaan cumrigiisa lagu tiranayo inta goor oo uu neefsanayo
- 2.Ka ilaali odaynimadaada ceeb wasakhaysa // oo midabka cadu wax yar ayuu wasakhda ka qaadaa (oo waa la arkayaa oo muuqanaysaa)
- 3.Sida midka dadka dharkiisa qaada oo usoo dhaqa // isaga maradiisuna ay ku maashoonayso qurun iyo najaaso
- 4.Waxaad doonaysaa inaad badbaadid dariiqeedana ma aadan qaadin // doonto kuma socoto dhul qallalan oo yaabis ah
- 5.fuulidda nacashka lagugu qaadayo wuxuu ku halmaansiinaya // waxaad fuuli jirtay oo baqal ama faras ahaa
- 6.Maalinta qiyaame maal iyo wiil toona ma jiraan (wax ku anfaca) // ciriiga qabrigu markuu kugu dhego wuxuu ku halmaansiinayaa habeenkii arooskaaga.

المثل الأعلى للفقير والرئيس والغنى

- | | |
|-------------------------|--------------------------------|
| ليس الفقيه بنطقه ومقاله | 1. إن الفقيه هو الفقيه بفعله |
| ليس الرئيس بقومه ورجاله | 2. وكذا الرئيس هو الرئيس بخلقه |
| ليس الغني بملكه وبماله | 3. وكذا الغني هو الغني بحاله |

Tusaala ugu sarreeya ee Faqiiha, Madaxweynaha iyo hodanka

1. Faqiih waxaa ah mid camalkiisa faqiih ku ah // Faqiih ma aha midka faqiih ku ah carrabkiisa iyo hadalkiisa (oo faqiih waxaa ah midka diinta Ilaahay barta, kuna dhaqma una adeega, oo Al Shaaficii wuxuu u arkaa inuu iimaanku yahay caqiido iyo camal, oo khayr ma laha hadal uusan camal la socon)
2. Sidoo kale madaxweynuhu wuxuu madaxweyne ku yahay khulqdiisa iyo dhaqankiisa // ee madaxweyne ma aha midka madaxweyne ku ah tolkiis iyo raggiisa oo ah ciidankiis (oo madaxweynaha ugu khayr badan waa midka akhlaaq iyo dhaqan fiican leh, dadkuna ay ku arkaan oo uu markaas dadka sidaas naftooda ku kasbo, tiisana ka adag, Ilaahay ka baqa, dadkana ka baqa, cadaaladna sameeya, oo uusan kursiga ku hayn tolkiis iyo xizbigiisa iyo raggiisaba)
3. Sidoo kale midka hodanka ahi waa midka sidiisa hodanka u ah // ee ma aha midka hodan ku ah wuxuu leeyahay iyo maalkiisa (oo hodantinnimadu waa deeqsinnimada iyo dadka oo xoolo la siiyo, iyo gobannimada nafta, ka fogaanshaha damaca iyo faanka iyo is muujinta: hodan waxaa lagu yahay deeqsinnimada iyo xoolo bixinta).
- 4.

فضل العلم

1. رأيت العلم صاحبه كريم ولو ولدته آباء لنام
2. وليس يزال يرفعه إلى أن يعظم أمره القوم الكرام
3. ويتبعونه في كل حال كراعي الضأن تتبعه السوام
4. فلو لا العلم ما سعدت رجال ولا عرف الحلال ولا الحرام

Deeqaha cilmiga

1. Waxaan arkay inuu ninka cilmi lehi uu kariim yahay // haba dhalaan aabayaal liita oo xune
2. Markaasuu cilmigu sare usii qaadayaa ilaa uu gaarsiiyo // inuu amarkiisu ku waynaado ragga kariimiinta ah agtooda
3. Oo ay markaas xaalad walba ku raacaan // siday ariga daaqsiinta daaqa u raacaan ari jirka oo kale
4. Hadduusan cilmiga ahaan lahaynna rag nolol fiican ma heleen // lamana aqoodeen xalaasha iyo xaaraanta.

من فضل العلم

1. العلم من فضله، لمن خدمه أن يجعل الناس كلهم خدمه
2. فواجب صونه عليه كما يصون في الناس عرضه ودمه
3. فمن حوى العلم ثم أودعه بجهله غير أهله ظلمه

Deeqaha cilmiga

1. Cilmiga deeqihiisa waxaa ka mid ah in qofka u adeega //uu dadkoo idil ka yeelo kuwo isaga u adeega
2. Marka waajib weeye in qofka cilmiga lehi uu cilmiga u dhawro siduu // dadka dhexdiisa ugu dhawro sharaftiisa iyo dhiiggiisa
3. Qofka inta cilmi barta kaddibna u dhiiba // aqoon darradiisa cid aan istaahilin oo ehelka cilmiga ahayn, cilmiga ayuu dulmiyay.

بم ينال العلم

1. أخي: لن نتال العلم إلا بسة سأتبنيك عن تفصيلها ببيان
2. ذكاء، وحرص، واجتهاد، وبلغه وصحة أستاذ، وطول زمان

Sida cilmi lagu helo

1. Walaalkayow: cilmi laguma helo lix mooyee // tafaasiisheedaan kuugu sheegayaa si cade
2. Fahmo, doonid iyo ilaalin, ijtihaad oo dadaal ah, iyo inta kugu filan oo aad ku noolaan karti aad ka qaadati // iyo macallin aad ka baratid, iyo waqti dheer oo aad wax baratid.

العلم مغرس كل فخر

1. العلم مغرس كل فخر فافتخر واحذر يفوتك فخر ذاك المغرس
2. واعلم بأن العلم ليس يناله من همه في مطعم أو ملبس
3. إلا أخو العلم الذي يعنى به في حلتيه عاريا أو مكتسي
4. فاجعل لنفسك منه حظا وافرا واهجر له طيب الرقاد وعبس
5. فلعل يوما إن حضرت بمجلس كنت الرئيس وفخر ذاك المجلس

Cilmigi waa ciidda faan oo idil lagu tallaalo

1. Cilmigu waa ciidda lagu tallaalo faan oo idil oo faan // kana digtoonow inuu ku dhaafo faanka ciidda lagu tallaalo
2. Waxaadna ogaataa inuusan cilmi hananayn oo helayn// mid hammigiisuba yahay inuu helo cunno iyo dhar uu xirto
3. Walaalka cilmiga saaxiibka u ah oo la doonayo // waa midka doona cilmiga ha qaawanaado ama dhar ha labbisnaadee
4. Marka cilmiga ka qaado sad balaaran // isaga uga guur macaanka hurdada iyo cabuusnimadaba
5. Markaasaa waxa dhici karta in haddaad maalin majlis timaadid // aad adigu madaxa majliskaas noqotid iyo midkuu ku faanaba.

دعوة إلى التعلم

1. تعلم فليس المرء يولد عالما
 2. وإن كبير القوم لا علم عنده
 3. وإن صغير القوم إن كان عالما
- وليس أخو علم كمن هو جاهل
صغير إذا التفت عليه الجحافل
كبير إذا ردت إليه المحافل

Cilmi barasho la isugu yeerayo

1. Cilmiga baro oo qofna isagoo cilmi leh ma dhasho // ninka cilmiga leh iyo kan jaahilka ahina ma sinna
2. Ninka tol madax u ah oo ugu wayn hadduusan cilmi lahayn // wuu yaraanayaa marka majaalista la fadhiyo oo loo soo jeesto xaggiisa
3. Midka tolka ugu yarna hadduu caalin yahay // wuu waynaanayaa markay majlisyadu isaga xaggiisa usoo jeestaan.

إن الجواب مفتاح

1. قالوا سكت وقد خوصمت قلت لهم // إن الجواب لباب الشر مفتاح
2. والصمت عن جاهل أو أحمق شرف // وفيه أيضا لصون العرض إصلاح
3. أما ترى الأسد تخشى وهي صامته؟ // والكلب يخشى لعمرى وهي نباح؟

Jawaabiddu waa fure

1. Waxay yiraahdeen waad aamustay adigoo muran lagu soo jeediyay, waxaanna ku iri // jawaabtu waxay fure u tahay oo furtaa albaabka sharta
2. In mid jaahil ah ama doqon ah laga aamusana waa sharaf // waxaana ugu sugan ilaalinta sharafta dan
3. Soo uma jeedid in libaaxa laga baqo isagoo aamusan? // eygana la dhagaxyeyo isagoo qaylinaya?

البخل..والظلم

1. بلوت بني الدنيا فلم أر فيهم
 2. فجردت من غمد القناعة صارما
 3. فلا ذا يراني واقفا في طريقه
 4. غني بلا مال عن الناس كلهم
 5. إذا ما ظالم استحسن الظلم مذهبها
 6. فكله إلى صرف الليلي فإنها
 7. فكم رأينا ظالما متمردا
 8. فعمما قليل وهو في غفلاته
 9. فاصبح لا مال ولا جاه يرتجى
 10. وجوزي بالأمر الذي كان فاعلا
- سوى من غدا والبخل ملء إهابه
قطعت رجائي منهم بذبابه
ولا ذا يراني قاعدا عند بابيه
وليس الغنى إلا عن الشيء لآبيه
ولج عتوا في قبيح اكتسابه
ستدعي له ما لم يكن في حسابه
يرى النجم تيهها تحت ظل ركابه
أناخت صروف الحادثات ببابه
ولا حسنات تلتقي في كتابه
وصب عليه الله سوط عذابه

Bakhiilnimo..dulmiga

1. Waxaan jarribay oo imtixaanay oo u guur galay dadka adduunkaan jooga kumana aanan arag // waxaan ahayn mid waabariistay isagoo ay bakhaylnimo haraggiisa buuxisay
2. Markaasaan seefta afka badan ee qanaacada galkeeda kasoo siibay // oo markaasaan aan afkeeda ku gooyay rajo kasta oo aan midkaas bakhiilka ah ka qabay
3. Markaasuusan kaasna i arkayn anigoo isaga u taagan dariiqiisa oo wax ka raba// kaas kalena uuxsan igu arkayn anigoo albaabkiisa fadhiya oo wax ka raba
4. Markaasaan waxaan noqday mid hodan ah anigoo aan maal lahayn oo aan ku ahay inaan dadka ka kaaftoomay oo aanan u baahan dadka kulligood // hodantinnimaduna ma aha waxaan ahayn inaad shayga ka hodantay oo aadan u baahan oo aad ka kaaftoontay, ee ma aha inaad shay aad haysato hodan ku tahay: waxaa hodan ah midka nafta hodan ka ah. (nin reer miyi ah ayaa wuxuu yimid magaalada Al Basrah\البصرة ee arliga Ciraaq\عراق ku taalla markaasuu wuxuu madaxdooda wuxuu waydiid: “Yaa sayiidka iyo madaxa degmadaaan ah?” Markaasay waxay yiraahdeen: “Al Xasan Al Basriyii\الحسن البصري.” Markaasuu wuxuu yiri: “Muxuuna uga wada kormaray ddkiiisa oo uu madax ugu noqday?” Waxay yiraahdeen: “Waxay leeyihiin oo xoolo ah ayuu ka kaaftoomay, oo ay ayaguna u baahdeen wuxuu isagu haysto oo umuurta diintooda ku saabsan.” Kuwase nafta faqiirka ka ah xoolo kastoo ay haystaan dadkay dulminayaa cabsi ay ka qabaan saboolnimo: gudahay faqiir iyo sabool ka yihiin oo marka isha banii Adan ma buuxiso waxaan ciid ahayn!)
5. Hadduu daallinku dulmigiisa u arko wax suuban oo uu la fiicnaado oo uu taas caado ka dhigto iyo dariiqiisa // kuna madax adkaysto sida xun iyo dulmiga oo uu xoolaha ku kasbado
6. Midkaas u daa oo u wakiilo gadgaddoonka iyo isbeddellada habeennada kuwaasaa // u keenaya waxaan xisaabtankiisa ku jirine
7. Meeqaan aragnay mid daallin ah oo dulmigiisa ku madax adkaystay oo ka hari waayay // oo ay la ahayd inay xidiguhuba ka hooseeyaan oo rukuubkiisa hoostooda inay yihiin ay la ahayd
8. Markaasaa in yar kaddibba isagoo xaaladaha mooganaanta ku sugan // ayay dhacdooyinku albaabkiisa kusoo furteen
9. Markaasuu wuxuu waabariistay isagoo aan maal lahayn iyo darajo loo soo aado toona // kitaabkiisana ayan ugu oollin wax xasanaat oo uu samaystay
10. Markaasaa laga abaal mariyay wuxuu fali jiray // Ilaahayna uu kusoo kor shubay cathaabtiisa

دفع الشر

- | | |
|--------------------------|-------------------------------|
| أرحت نفسي من هم العداوات | 1. لما عفوت ولم أحقد على أحد |
| لأدفع الشر عني بالتحيات | 2. إني أحبي عدوي عند رأيتيه |
| كما إن قد حشا قلبي محبات | 3. وأظهر البشر للإنسان أبلغه |
| وفي اعتزالهم قطع المودات | 4. الناس داء وداء الناس قربهم |

Sharta iska celinteeda

Imaam Al Shaaficii **الشافعي** wuxuu noo sheegayaa sida cadawga loola dhaqmo oo shartooda la isaga celiyo, wuxuuna yiri:

1. Markaan dadka iska cafiyay oo aanan axadna nacayb qalbigayga u gelin // waxaan naftayda uga raaxeeyay xalool xumada colaadda
2. Anigu markaan cadawgeyga arko waan salaamaa // si aan salaantaas sharttiisa isaga celiyo
3. Dadka aan necbahayna waxaan u muujiyaa bashaashnimo // sida ayadoo uu qalbigayga jecaylkiisu ka buuxo oo kale
4. Dadku waa cudur aan daawo lahayn, cudurka dadkuna wuxuu ka yimaadaa u dhowaanshohooda // haddii laga fogaadana waxaa go'aya xarigga jacaylka dadka isku xira.

آداب التعليم

- | | |
|---------------------------------------|------------------------------|
| 1. اصبر علي مر الجفا من معلم | فإن رسوب العلم في نفراسته |
| 2. ومن لم يذق مر التعلم ساعة | تجرع ذل الجهل طول حياته |
| 3. ومن فاتته التعليم وقت شبابه | فكبر عليه أربعا لوفاسته |
| 4. وذات الفتى – والله – بالعلم والتقى | إذا لم يكونا لا اعتبار لذاته |

Edebta tacliinta

Imaam Al Shaaficii **الشافعي** macallimiin badan ayuu wax ka bartay, markuu wuxuu nagu geesi gelinayaa inaan wax baranno oo u sabirno oo u adkaysanno canaanta iyo kharaarka nooga imaanaysa macallimiinta, gaar ahaan kuwa Quraanka iyo diinta laga barto.

1. U adkayso qallaylka iyo xaraarka macallinka ka yimaada // oo waxaas aad kahaynayso ayaa qalbigaaga ku dhigaya oo ku sugaya cilmiga
2. Qofkaan saacadna dhedhemin kharaarka wax barashadana // wuxuu noloshiisa oo idil cabbaa oo qurquriyaa dulliga jaahilnimada
3. Qofka wax barashadu seegtana intuu dhallinta yar yahay // ku dul akhri afar Takbiirood (sida maydka oo kale oo isaguna ma noola) oo kaasu wuu dhintaye
4. Ninka qiimaha lehna – wa Allaahi **والله** – wuxuu qiimo ku leeyahay cilmiga iyo cabsida Ilaahay // oo hadduusan labadaas lahayn iskiisu qiimo ma laha.

هموم الغد

- | | |
|----------------------------|---------------------------|
| 1. إذا أصبحت عندي قوت يومي | فخل الهم عنى يا سعيد |
| 2. ولا تخطر هموم غد ببالي | فإن غدا له رزق جديد |
| 3. أسلم إن أراد الله أمرا | فأترك ما أريد لما ما يريد |

Ka walwalidda berrito

1. Haddaan waabariisto anigoo haysta cunnada maalintaas // kurbada igala har Saciidow
2. Hana igu soo qaadin kurbo cunnada burrito ku saabsan // oo berrito waxay leedahay rizqi cusub
3. Hadduu Ilaahay amar doono waan isu dhiibayaa oo yeelayaa // oo waxaan doonayay waan ka tegayaa oo raacayaa wuxuu isagu doonayo.

التوكل على الله

- | | |
|---------------------------------|-----------------------------|
| 1. توكلت في رزقي على الله خالقي | وأيقنت أن الله لا شك رازقي |
| 2. وما يك من رزق فليس يفوتني | ولو كان في قاع البحار |
| 3. سيأتي به الله العظيم بفضله | ولو لم يكن مني اللسان بناطق |
| 4. ففي أي شيء تذهب النفس حسرة | وقد قسم الرحمن رزق الخلائق؟ |

Ilaahay oo la tala saarto

1. Rizqigayga waxaan u talo saartay Ilaahay Midka i abuuray // waxaanna hubsaday inuusan shaki ku jirin inuu Ilaahay rizqigayga i siinayo
2. Oo waxa rizqi ii qoran i seegi mayo oo waan helayaa // ha ku jiro salka moolka badaha hadduu doonee
3. Ilaahayga Wayn ayaa deeqdiisa ku keenaya // in kastoo uusan carrabkaygu ku dhawaqine
4. Markay maxay naftu u walwalaysaa // ayadoo Al Rraxmaanu **الرحمن** uu ruzqiga khalqigiisa qaybiyay?

إياكم وأبواب الملوك والحكام

- | | |
|---------------------------------|-----------------------------|
| 1. إن الملوك بلاء حيثما حلوا | فلا يكن لك في أبوابهم ظل |
| 2. ما ذا تؤمل من قوم إذا غضبوا | جاروا عليك وإن أرضيتهم ملوا |
| 3. فاستعن بالله عن أبوابهم كرما | إن الوقوف على أبوابهم ذل |

Ha istaagina albaabbada boqorrada iyo kuwa xukunka haya

1. Boqorradu waa belo iyo imtixaan iyo musiibo meel kastoo ay joogane // Marka albaabadooda har ha ka raadsan oo ha harsan, waana wax ha ka doonan oo baryin
2. Maxaad ka filanaysaa oo khayr ah rag markay caroodaan // ku weerarayaa oo kugu xad gudbaya oo ku dulminaya, haddaad raalli gelisidna ku nabad gelinaya
3. Marka Ilaahay la kaasho inuu kaa karaameeyo tegidda albaabadooda // oo istaagidda albaabadooda iyo baryadoodu waa dullinnimo.

عندما تقترب نهاية الإنسان ويشتعل الرأس شيئا

- | | |
|----------------------------------|------------------------------|
| 1. خبت نار نفسي باشتعال مفارقي | وأظلم ليلي إذ أضاء شهابها |
| 2. أيا بومة قد عششت فوق هامتي | على الرغم مني حين طار غرابها |
| 3. رأيت خراب العمر مني فزرتني | ومأواك من كل الديار خرابها |
| 4. أنعم عيشا بعد ما حل عارضي | طلانع شيب ليس يغني خضابها |
| 5. وعزة عمر المرء قبل مشيبيه | وقد فنيت نفس تولى شبابها |
| 6. إذا اصفر لون المرء وابيض شعره | تنغص من أيامه مستطابها |
| 7. فدع عنك سوءات الأمور فإنها | حرام على نفس التقي ارتكابها |
| 8. وأد زكات الجاه واعلم بأنها | كمثل زكات المال تم نصابها |
| 9. وأحسن إلى الأحرار تملك رقابهم | فخير تجارات الكراء اكتسابها |
| 10. ولا تمش في منكب الأرض فاخرا | فعما قليل يحتويك ترابها |
| 11. ومن يذق الدنيا فاني طعمتها | وسيق إلينا عذبها وعذابها |
| 12. فلم أر إلا غرورا وباطلا | كما لاح في ظهر الفلاة سرابها |
| 13. وما هي إلا جيفة مستحيلة | عليها كلاب همهن اجتذابها |
| 14. فإن تجتنبها كنت سلما لأهلها | وإن تجتذبها نازعتك كلابها |
| 15. فطوبى لنفس أولعت قعر دارها | مغلقة الأبواب مرخي حجابها |

Markay qofka geeridu usoo dhowaato madaxuna cirro la cadaado

1. Dabkii naftaydu wuu damay madaxayguna cirruu la caddaaday //habeenkaygiina wuu dumay oo madoobaaday markuu madixii cirro la iftiimay
2. Shimbirka Buumah la yiraahdo ayaa aqal ka dhisatay madaxayga – waana shimbir meelaha burburay dega // markuu tukeheedu ka duulay – ahna madowga timaha oo midabka tukaha leh –
3. Shimbirow – waana buumah – waxaad aragtay burburka cumrigayga markaasaad isoo booqatay // daar kastana waxaad ka degtaa kuwa kharaabka ah oo burburay
4. Ma waxaan ku noolaan karaan nolol fiican kaddib marka hareedkayga iyo labadayda dhaban cirro la caddaadeen oo xinniga iyo waxa lagu madoobeeyaba ay qaban waayeen? // hareedkii cirroobay wixii lagu madoobayn lahaa way qaban waayeen oo qarín waayeen oo wax ka tari waayeen (oo hoos ayaa cirro kasoo dhalanaysaa!)
5. Qofka cumrigiisana waxaa ugu xoog badan intuusan cirroobin oo markaas ha kasbado khayrkuu u baahan yahay markuu gaboobo // wayna galbatay oo dhammaatay naf ay dhallin yaranimadeedu ka gaddoontay oo dhammaatay
6. Markuu midabka qofku hurdi noqdo timuhuna ay cadaadaan // maalmihiisii fiicnaan jiray waxay isu beddelaan xumaan
7. Marka ka fogow oo ka tag arrimaha xunxun maxaa yeelay kuwaasu // qofka Ilaahay ka cabsada waa ka xaaraan inuu ku kaco
8. Waxaadna bixisaa zakada jaaha ogowna inay // la mid tahay zakada maalka oo nisaabkeedu , waana muggi ay zakadu waajib ku noqon lahayd, waa dhammaystirmay
9. Una ixsaan fal oo si fiican ula dhaqan dadka xorta ah waad milkinaysaaye // ganacsi la galena waxaa ugu khayr badan kasbidda kuwa xorta ah

10. Arliga korkiisana ha ugu socon adigoo faanaya // oo in yar kaddibba waxaa lagu dhex gelinaya ciideeda
11. Qofka adduunkaan dhedhemiyana – oo anigu waa dhedhemiyay - // waxaana nala cabsiiyay macaankeeda iyo cadaabteedaba
12. Markaasaan waxaan arkay inayan ahayn waxaan ahayn dhalanteed iyo wax xun // siduu ugu muuqdo dhalanteedku kulaykeedu barqadii iyo duhurkiiba oo kale
13. Addunkuna ma aha waxaan ahayn neef bakhtigiis oo kale oo gorofsan // ayna dul joogaan oo ku dagaallamayaan eeyo doonaya inay kala jiitaan
14. Haddaad ka fogaatid waxaad ka nabad geleysaa dadka adduunkaan // haddaad bakhtigaas inaad adiguna wax kajiidatid doonaysid waxaa kugula dagaallamaya eeyeheeda
15. Waxaa khayr helay qof daartiis gudeheeda laazimay // albaabkeedana xiratay daahyadana soo wada daayay.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

Aali Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam

Ahlu Al Bayti

آل محمد صلى الله عليه وعلى آله وسلم – أهل البيت

Waa kuwee oo yaa ka mid ah Aali Muxammadin, qoyska Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?

الإمام الشافعي\Al Imaamu Al Sh-shaaficii

Imaam Al Shaaficii\الإمام الشافعي, Allaha raalli ka noqdee, oo dhintay sanadka laba boqol iyo laba ee Hijriga, wuxuu kitaabkiisa Culuumu Al Quraani\علوم القرآن, uuna uruuriyay Al Imaamu Al Bayhaqii\الأمم البيهقي, Allaha u naxariistee, Juzka koowaad bogga sideed iyo sideetanaad ku yiri:

"Ilaahay Jalla\جل Thanaa'uhu\ثناؤه wuxuu fardi ka dhigay in Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu salliyo, wuxuuna yiri:

" إِنَّ اللَّهَ وَمَلَائِكَتَهُ يُصَلُّونَ عَلَى النَّبِيِّ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا صَلُّوا عَلَيْهِ وَسَلِّمُوا تَسْلِيمًا (56) "

Inna Allaaha wa Malaa'ikatahu yusalluuna calla Al Nabiyyi yaa ayyuhaa allathiina aamanuu salluu calayhi wa sallimuu tasliiman(56)."

Aayadda oo ku jirta Suuratu Al Axzaab\سورة الأحزاب macneheedu waxaa weeye:

"Ilaahay iyo Malaa'iktiisu waxay ku sallinayaan Nabiga, ee kuwa iimaanka laga helayow ku salliya korkiisa, kaddibna salaan salaama(56)."

Fardigaas in lagu salliyaana meel ay uga habboon tahay Salaadda dhexdeeda ma jirto, marka la tukanayo, daliilkeedana waxaan ka helay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam sidaan usoo sifeeyey inay in Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu salliyo ay Salaadda dhexdeeda fardi ku tahay. Wa Allaahu aclamu."

Wuxuu Imaam Al Shaafici\الإمام الشافعي kitaabkiisa Al Ummu\الأم, mujalladka koowaad bogga laba boqol iyo sideed iyo labaan uga wariyay Cabdu Allaahi ibnu Cabaas\عبد الله ابن عباس, Allaha raalli ka wada noqdee, inuu yiri:

"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Tashahhudka\التشهد (Attaxyaadka) noo bari jiray si la mid ah siduu Quraanka noo bari jiray oo kale".

Imaam Muslim-na\الإمام مسلم waa waraiyay. Waana ayada marka Attaxyaadka la akhriyo, hadana Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu salliyo oo la salaamo.

Wuxuu Muslim\مسلم Xadiithkiisa saddex boqol iyo afar iyo sideetan ku wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"من صلى علي صلاة صلى الله عليه بها عشرا."

"Man sallaa calayya salaatan sallaa Allaahu calayhi bihaa cashran."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Qofkii mar aniga igu salliya, Ilaahay wuxuu daraadeed ugu salliya toban salaadood".

Salaadda uu Ilaahay addoonkiisa Muslinka ah ku salliya macneheedu waxaa weeye naxariis uu u naxariisto iyo danbigiisa oo uu dhafo. Erayga Salaad halkaas ayuuba ka yimid, oo macnihiisu waa Alle Bari, oo soo ma aragtid in intaad tukanaysidba aad Ilaahay baryeysid oo aad wax weydiisanaysid, sida markaad Faataxada akhrineysid oo aad Ilaahay ka baryeysid taageero (oo aad leedahay Wa Iyyaaka Nastaciinu\واياك نستعين) iyo inuu dariiqa toosan kugu hanuuniyo?

Al Shaaficii\الشافعي, Allaha u naxariistee, oo hadalkiisa uu kitaabkiisa Culuumu Al Quraani علوم القرآن ku yiri sii wata wuxuu yiri:

"Waxaan dariiqaas u qaaday, oo aan sidaas u iri (oo erayga math-hab\مذهب halkaasuuba ka yimid, oo waa dariiq la qaado oo eraygu wuxuu ka bilowdaa miim\م oo tilmaamaya qofka iyo Thahaba\ذهب oo ah waa aaday) anigoo arkay inuu Ilaahay, Cazza wa Jalla\الله عزوجل, marka hore Isagu iska bilaabay ku sallinta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddibna uu Mu'miniinta ku amray inay ayaguna ku salliyaan", sidaan Aayadda lix iyo kontonaad ee Suuratul Axzaab\سورة الأحزاب ugu soo aragnay."

Wuxuu Ilaahay xusay kuwuu khalqigiisa ka doortay, kaddibna wuxuu shaaca ka qaaday oo uu dadka ogeysiyyay inay Anbiyadiisa yihiin (Wa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Anbiyada kale oo idil). Kaddibna wuxuu xusay kuwa uu qoysaskooda doortay, wuxuuna sheegay inay yihiin kuwa Anbiyadiisa u hoggaansan oo raacsan, wuxuuna, Tacaalaa, Aayadda saddex iyo soddonaad ee Suuratu Aali Cimraana\سورة آل عمران ku yiri:

إِنَّ اللَّهَ اصْطَفَىٰ آدَمَ وَنُوحًا وَآلَ إِبْرَاهِيمَ وَآلَ عِمْرَانَ عَلَى الْعَالَمِينَ (33)

"Inna Allaaha Isdhafaa Aadama wa Nuuxan wa Aala Ibraahiima wa Aala Cimraana calaa al caalamiina(33)."

Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu caalamiinta ka doortay Aadan\آدم iyo Nuux\نوح iyo qoyska Ibraahiim\إبراهيم iyo qoyska Cimraan\عمران(33)."

Marka, Xadiithka Abii Mascuud\أبي مسعود oo aan soo aragnay wuxuu sheegay inuu xusay ku sallinta Muxammad\محمد, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Aali Muxammad\آل محمد, oo ah qoyskiisa, taasoo shabbahda oo u eg macnaha Kitaabka (oo ah Aayadda saddex iyo soddonaad ee Suuratu Aali Cimraana\سورة آل عمران oo aan kor ku soo sheegnay)".

Al Shaafici\الشافعي, oo hadalkiisa sii watana wuxuu yiri:

"Aniguna waxaan jeclahay inaan Aali Muxammad\آل محمد, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo dhex geliyo haweenkiisa iyo ubadkiisa, si loo helo wixii Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga wariyay."

Wuxuuba Al Bukhaarii\البخاري Abu Xumayd Al Saacidi\أبو حميد الساعدي ka wariyay inuu yiri: "Waxay yiraahdeen: Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sidee baan kuugu sallinnaa? wuxuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"قولوا اللهم صلي على محمد وأزواجه وذريته كما صليت على آل إبراهيم وبارك على محمد وأزواجه وذريته كما باركت على إبراهيم إنك حميد مجيد."

"Quuluu (waxaad tiraahdaan) Allaahumma salli calaa Muxammadin wa azwaaajihii wa thurriyatihii kamaa sallayta calaa Aali Ibraahiima wa baarik calaa Muxammadin wa azwaaajihii wa Thurriyatihii kamaa baarakta calaa Ibraahiima Innaka Xamiidun Majiidun."

Xadiithkaan oo ah midka lix kun iyo saddex boqol iyo lixdan ee Al Bukhaarii\البخاري iyo Xadiithka afar boqol iyo toddoba ee uu Muslim\مسلم wariyay, macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahayow ku salli Muxammad\محمد korkiisa iyo haweenkiisa korkooda iyo dhashiisa korkooda sidaad ugu salliday qoyska Ibraahiim\إبراهيم, barakeena Muxammad\محمد korkiisa iyo haweenkiisa korkooda iyo dhashiisa korkooda sidaad u barakeysay qoyska Ibraahiim Adigu waxaad tahay mid lagu wada Xamdiyo\حميد oo Wayne\مجيد."

Al Shaaficii\الشافعي wuxuu yiri:

"Haddii ninka qoyskiisa lagu tiriyo ilmaha uu isagu dhalay oo isaga ku abtirsada iyo inta gurigiisa ku hoyata oo ah xaasaskiisa, ama kuwa midigtiisa ku jira oo uu isagu leeyahay, ama mawle isaga la xiriisan ama caruur uu ciyaalkiisa ku soo biiriyay (uusanse isagu dhalin), ayna ka mid yihiin qaar qaraabadiisa ah oo uga timid xagga aabihiis, ayanse ku jirin qaraabadiisa uga timid xagga hooyadiis, qaraabannimana ay kulmiso qaar ka mid ah qaraabada xagga aabihiis, qaarkoodna ayan qaraabannimo ka dhexeyn. Marka hadday xaaladdu sidaas tahay, ma ayan bannaana in wuxuu Ilaahay doonayo, Cazza wa Jalla\الله عزوجل, kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu doonayo (oo ah Aali Muxammad\آل محمد) loo isticmaalo wixii Sunnada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku sugnaatay mooyee, taasoo ah inuu (Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) yiri:

"إن الصدقة لا تحل لمحمد ولا لآل محمد، وإن الله حرّمها علينا الصدقة وعوضنا منها الخمس."

"Inna al sadaqata laa taxillu li Muxammadin wa laa li Aali Muxammadin, wa inna Allaaha xarramahaa calaynaa al sadaqata wa cawwadanaa minhaa al Khumusa."

Xadiithkaan macnihiisu waxaa weeye:

"Sadaqadu (oo ah maalka zakada maalka laga soo aruuriyay) Muxammad\محمد xalaal uma aha, qoyska Muxammadna\آل محمد, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xalaal uma aha, oo Ilaahayna korkeenna sadaqada waa xaaraantimeeyey, wuxuuna cawil celin nooga dhigay Khumuska\الخمس (oo ah maalka gaalada dagaal hubaysan looga soo furto marka shan meelood loo dhigo meel)."

Taasi waxay tilmaantay inay yihiin Aali Muxammad\محمد\ آل kuwa uu Ilaahay ka xaaraantimeeyey sadaqada, uuna khumuska cawil celin uga dhigay." Waaba ayada uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda kow iyo afartanaad ee Suuratu Al Anfaali\الأنفال\ ku yiri:

وَأَعْلَمُوا أَنَّمَا غَنِمْتُمْ مِنْ شَيْءٍ فَإِنَّ لِلَّهِ خُمُسَهُ وَلِلرَّسُولِ وَلِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسْكِينِ وَابْنِ السَّبِيلِ

"Wa aclamuu annamaa ghanimtum min shay'in fa anna Lillaahi khumusahu wa lil Rrasuuli wa lithii al qurbaa wa al yataamaa wa al masaakiina wa ibni al ssabiili(41)". Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Ogaadana waxaad ghaniimeysataan inuu Ilaahay shan meelood meel leeyahay, iyo Rasuulku, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo qaraabada (Rasuulka, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam), iyo agoonta iyo masaakiinta iyo kuwa socdaalka ah."

Imaam Al Shaafici\الشافعي\, Allahau u naxariistee, wuxuu sii yiri:

"Waxaa taas daliil u ah inuusan jirin arrin dambiga gooya, culummadana waajib ku ah inay qaataan (wa Allaahu aclamu) oo aan ahayn Xadiithka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Marka, markuu Ilaahay Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa ku fardi yeelay in qaraabada xaqeeda la siiyo, uuna u sheegay inuu Ilaahay Khumus\الخمس\ leeyahay iyo Rasuulka, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo qaraabada, wuxuu (Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) sahmigii qaraabada siiyay reer Bani Haashim\بنی هاشم\ iyo reer Al Mudh-dhalib\المطلب\, taasna waxay daliil u noqotay inay kuwa uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, khumuska\الخمس\ siiyay ay yihiin Aali Muxammadin\آل محمد\ oo ah kuwa uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amray in korkooda isaga lagula salliyo, ahna kuwa (uu Ilaahay) khalqigiisa ka doortay, Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddib, siduu ugu yiri Aayadda saddex iyo soddonaad ee Suuratu Aali Cimraana\سورة آل عمران\:

إِنَّ اللَّهَ اصْطَفَىٰ آدَمَ وَنُوحًا وَآلَ إِبْرَاهِيمَ وَآلَ عِمْرَانَ عَلَى الْعَالَمِينَ (33)

"Inna Allaaha Isdhafaa Aadama wa Nuuxan wa Aala Ibraahiima wa Aala Cimraana calaa al caalamiina(33)."

Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu caalamiinta ka doortay Aadan\آدم\ iyo Nuux\نوح\ iyo qoyskii Ibraahiim\إبراهيم\ iyo qoyska Cimraan\عمران\ (33)."

Nabi Muxammadna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isla markaasna wuxuu ka tirsan yahay Qoyska Ibraahiim\إبراهيم\, oo waaba awoowihis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Sidaas ayuu Ilaahay shaaca ka qaaday inuu marka hore Anbiyada (khalqigiisa) ka doortay, Calyhimussalaamu, ayaga dabadoodna uu qoysaskooda doortay."

Imaam Shaafici\الإمام الشافعي\ wuxuu yiri Aali Muxammad\آل محمد\ waa:

Kow. Dhasha Haashim\هاشم\بني, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, awoowaha aabihiis.

Labo. Ubadka Al Mudh-dhalib\المطلب\بني, Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, awoowihis Haashim\هاشم\walaalkiis.

Saddex. Hooyooyinka Mu'miniinta\المؤمنين\أمهات, haweenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Afar. Dhasha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam (oo ah Ashraafta).

Imaam Al Sh-shaaficii\الإمام الشافعي\wuxuu kaloo daliil ka dhigtay Xadiithka soo socda oo uu Al Bukhaarii\البخاري\Jubayr bin Mudhchim\مطعم\جبير بن ka wariyay.

Xadiithka waxaa kaloo wariyay Al Bayhaqii\البيهقي\Imaam Al Nawawii\النووي\ sidaas ayuu isaguna kitaabkiisa Al Majmuuc\المجموع\ ku sugay, Mujalladka saddexaad baabka ku sallinta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, marka Attaxyaadka loo fadhiyo, bogga afar boqol iyo toddoba iyo labaatan iyo inta ka dambeysa.

Wuxuu Al Bukhaarii\البخاري\Jubayr bin Mudhchim\مطعم\جبير بن, Allaha raalli ka noqdee, ka wariyay inuu yiri: (waana markuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ghaniimadii Khaybar\خيبر\ oo yuhuudda laga furtay qaybinayey):

"Cuthmaan bin Caffaan\عثمان بن عفان\ iyo aniga ayaa is raacnay (markaasaan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam aan u tagnay) waxaanna niri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Banii Al Mudh-dhalib\المطلب\بني ayaad siisay, annagana waad naga tagtay, ayadoo annaga iyo ayagu aan kuu wada simannahay (oo reer Al Mudh-dhalib\المطلب\ waxaa dhalay Cabdi Manaaf\عبد مناف\, Cuthmaan bin Caffaanna\عثمان بن عفان\ waxaa u awoowe ah Haashim\هاشم\walaalkiisii mataankiisa ahaa Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf\عبد شمس بن عبد\ iyo Cabdu Shams bin Cabdi Manaaf\عبد شمس بن عبد\ iyo Al Mudh-dhalibu bin Cabdu Manaaf\المطلب بن\ iyo Cabdu Manaaf\عبد مناف\ ayaa kala dhalay)".

Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"إنما بنو هاشم وبنو المطلب شئ واحد."

"Innamaa Banuu Haashim wa Banuu Al Mudh-dhalib shay'un waaxidun",

oo macnihiisu yahay:

"Ilma Haashim\هاشم\بنو iyo ilmaha Al Mudh-dhalib\المطلب\بنو waa shay waaxid ah (oo waa mid, culummada qaarkoodna waxay sheegeen inay labadaas jilib islaamka hortiisba heshiis sir ah lahaayeen, wa Allaahu Aclamu\الله أعلم\)."

Wuxuu yiri: waqti dheer ayuu aamusnaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ilaa aan ka damacnay inaan mar kale la hadalno. Wuxuu yiri: Markaasey Zaynab زينب Xijaabka gadaashiisa nooga tilmaantay "Ha hadlina".

Wuxuu yiri: Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"إن الصدقة لا تنبغي لآل محمد، إنما هي أوساخ الناس. أدعوا لي محمية ونوفل بن الحارث بن عبد المطلب."

"inna al ssadaqata laa tanbaghii li Aali Muxammadin, innamaa hiya awsaakhu al nnaasi. Udcuu lii Maxmiyata wa al Nawfala bin Al Xaarith bin Cabdu Al Mudh-dhalib."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Zakadu uma bannaana qoyska Muxammad محمد , Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ayadu waa wasakhda dadka. Iigu yeera Maxmiyata (oo u xilsaarnaa oo hayey maalka Khumuska) iyo Nawfal bin Al Xaarith bin Cabdu Al Mudh-dhalib عبد المطلب. Zakadu waa wasakhda dadka macneheedu waxaa weeye inay daahiriso oo ay dhaqdo maalkii laga bixiyo, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa الله سبحانه وتعالى, ugu yiri Aayadda boqol iyo saddexaad ee Suuratu Baraa'ah سورة براءة:

خُذْ مِنْ أَمْوَالِهِمْ صَدَقَةً تُطَهِّرُهُمْ وَتُزَكِّيهِمْ بِهَا وَصَلِّ عَلَيْهِمْ إِنَّ صَلَاتَكَ سَكَنٌ لَهُمْ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ (103)

"Khuth min amwaalihim sadaqatan tudhahiruhum wa tuzakkihim bihaa(103)."

Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Ka qaad xoolohooda xaggooda sadaqo (Zakada) oo aad ku daahirineysid, kuna nadiifineysid(103)."

Wuxuu yiri:

"Markaasey u yimaadeen (waa Maxmiyata محمية iyo Nawfal bin Al Xaarith bin Cabdu Al Mudh-dhalib عبد المطلب).

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu Maxmiyata ku yiri:

"أنكح هذا الغلام إبتك."

"Ankix haathaa al ghulaama ibnataka"

oo ah:

"- الفضل بن العباس - Wiilkaan gabadhaada ku nikaax- wiilkuna waa Al Fadlu ibnu Al Cabbaas Markaasuu ku nikaaxay.

Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Nawfal bin Al Xaarith نوفل بن الحارث ku yiri:

"أنكح هذا الغلام إبتك."

"Ankix haathaa al ghulaama ibnataka"

oo ah:

"Wiilkaan gabadhaada ku nikaaxi", wiilkuna waa aniga. Markaasuu igu nikaaxiyay.

Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Maxmiyata\محمية ku yiri:

"أصدق عنهما من الخمس كذا وكذا."

"Asdiq canhumaa mina Al Khumusi kithaa wa kithaa"

oo macneheedu yahay:

"Meher ahaan labadaba intaas iyo intaas Al Khumusi\الخمس uga bixi".

Al Zuhriyyi\الزهري, oo uu Xadiithkaan Maalik\مالك ka wariyay wuxuu yiri:

"Meherku intuu ahaa iima magacaabin". Waana Xadiithka Muslim\مسلم ee kun iyo laba iyo toddobaatan.

Marka dadka aan maalka Zakada cuni karin, oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qaraabadiisa ah, sida labadaan wiil oo kale, waxay ka tirsan yihiin Aali Muxammad\آل محمد, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu kaloo na baray siyaalo kale oo badan oo loogu salliyo, oo la wada yaqaanno, waxaana ka mid ah Xadiithkaan uu Al Bukharii\البخاري ka wariyay Kacbu ibnu Cujrata\كعب بن حجرة:

**"اللهم صلي على محمد وعلى آل محمد كما صليت على إبراهيم وبارك على محمد وعلى آل محمد كما
باركت على إبراهيم وعلى آل إبراهيم في العالمين إنك حميد مجيد."**

**"Allaahumma salli calaa (Sayyidinaa) Muxammadin wa calaa Aali (Sayyidinaa)
Muxammadin kamaa sallayta calaa (Sayyidinaa) Ibraahiima wa calaa Aali (Sayyidinaa)
Ibrahiima**

**wa baarik calaa (Sayyidinaa) Muxammadin wa calaa Aali (Sayyidinaa) Muxammaden
kamaa**

**baarakta calaa (Sayyidinaa) Ibraahiima wa calaa Aali (Sayyidinaa) Ibrahiima fii al
caalamiina**

Innaka Xamiidun Majiidun".

Waana Xadiithka lix kun iyo saddex boqol iyo toddoba iyo konton ee Al Bukhaarii\البخاري, oo macnihiisu yahay:

"Ilaahyow ku salli (oo ah u naxariiso darajadiisa jannada kor usii qaad) (sayyikeenna) Muxamad محمد iyo qoyska (Sayyidkeenna) Muxammad محمد sidaad ugu saaliday (Sayyidkeenna) Ibraahiim إبراهيم iyo qoyska (Sayyidkeenna) Ibraahiim إبراهيم, barakeena oo barako kusoo shub korka (Sayyidkeenna) Muxammad محمد iyo Qoyska (Sayyidkeenna) Muxammad محمد idaas ugu shubtay korka (Sayyidkeenna) Ibraahiim إبراهيم iyo aoyaska (Sayyidkeenna) Ibraahiim إبراهيم . Adigu waxaad tahay Midka lagu Mahdiyo oo Weyn حميد مجيد ."

Abii Mascuud Al Ansaarii\أبي مسعود الأنصاري wuxuu yiri:

"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa noo yimid annagoo joognay majliska Scad bin Cubaadah\سعد بن عبادة, markaasuu Bashiir bin Sacd\بشير بن سعد wuxuu ku yiri:

"Ilaahay wuxuu na amrya inan kugu sallinno Rasuulka Ilaahyow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, e sidee baan kuugu sallinnaa?"

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aamusay ilaa heer aan ka jeclaannayba inuusa su'aashaba weydiin! Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"قولوا اللهم صلى على محمد وعلى آل محمد كما صليت على آل إبراهيم وبارك على محمد وعلى آل محمد كما باركت على آل إبراهيم في العالمين إنك حميد مجيد."

"Quuluu: Allaahumma salli calaa Muxammadin wa calaa Aali Muxammadin kamaa sallayta calaa Aali Ibraahiima, wa baarik calaa Muxammadin wa calaa Aali Muxammadin kamaa baarakta calaa Aali ibraahiima, fii al caalamiina Innaka xamiidun Majiidun. Wa Al Ssalaamu kamaa qad calimtum."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaad tirahdaan: "Ilaahyow ku salli Muxammad\محمد (oo macneheedu yahay u naxariiso darajadiisa jannada kor u sii qaad) iyo qoyska Muxammad\محمد sidaad ugu salliday qoyska Ibraahiim\إبراهيم, barakeena Muxammad\محمد korkiisa iyo qoyska Muxammad\محمد sidaas u barakaysay qoyska Ibraahiim\إبراهيم. Adigu waxaad tahay Midka lagu Mahdiyo oo Weyn\حميد مجيد." Waana Xadiithka afar boqol iyo shan ee Muslim\مسلم.

Waa intaas warka Al Sh-shaaficii\الشافعي.

Al Imaamu Al Shaaficii\الإمام الشافعي wuxuu ka mid yahay Aali Muxammad\محمد, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo wuxuu ku abtirsadaa Al Mudh-dhalib bin Cabdi Manaaf\المطلب بن عبد مناف, awoowihiiisa loo nisbeeyo Shaafic bin Al Ssaa'ib bin Cubayd bin Cabda Yaziid bin Haashim bin Al Mudh-dhalib bin Cabdi Manaaf bin Qusayy\عبد مناف بن هاشم بن المطلب بن عبد مناف بن قصي wuxuu ahaa saxaabi, waxayna qayb ku lahaayeen oo la siin jiray khuuska ghaniimada.

زين العابدين\Zaynu Al Caabidiina

Kitaabka la yiraahdo Fadlu Aala Al Bayti\فضل آل البيت waxaa allifay Abuu Al Cabbaas Al Xusaynii Al Cubaydii Axmad bin Calii bin Cabdu Al Qaadir ibnu Muxammad Taqiyyu Al Ddiini Al Maqriizii\أبو العباس الحسيني العبيدي أحمد بن علي بن عبد القادر ابن محمد تقي الدين المقرئزي, taariikh yahanka arliga Masar\مصر, asalkiisuna uu yahay gobolka Bacalbak\بعلبك ee Lubnaan\لبنان, looma nisbeeyey tuulada Al Maqaarizah\المقارزة, siduu Al Zereklee\الزركلي wariyay.

Wuxuu ku dhashay, wax ku bartay kuna dhintay Al Qaahirah\القاهرة, arliga Masar\مصر, halkaasoo uu xilal badan oo diini ah ka qabtay, sida Imaamnimada, Khadhiibnimada iyo kuwo kaleba. Sanadka sideed boqol iyo toban wuxuu tegey Dimishiq\دمشق isagoo uu la socdo wiilkiisa Al Naasir\الناصر, halkaasoo loogu soo jeediyey inuu Qaallinnimada Dimishiq qabto, uuna diiday.

Wuxuu noolaa inta u dhexeysa toddoba boqol iyo lix iyo toddobaatanka ilaa sideed boqol iyo shan iyo afartanka Hijriga ah, una dhigantah kun iyo saddex boqol iyo shan iyo lixdan ilaa kun iyo afar boqol iyo kow iyo afartan miilaadiga. Ilaa laba boqol oo kutub ayuuna allifay. Al Maqriizii waa dhashay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo ku abtirsada Al Xusayn bin Faadhimah **الحسين بن فاطمة**, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam.

Kitaabkaan waxaa lagu faafiyay oo daabacay Daaru Al Ictisaami\الإعتصام ee ku taalla Bayruut dalka Lubnaan sanadka kun saddex boqol laba iyo soddon Hijriga una dhiganta kun sagaal boqol laba iyo toddobaatan Miilaadiga.

Kitaabka waxaa xaqiijiyay faallana ku daray Doktor Muxammad Axmad Caashuur **د.محمد أحمد** عاشور. Waana kitaab yar oo qiimo badan oo boqol kow iyo toban bog ka kooban.

Al Maqriizii\المقريزي (bogga toddoba iyo labaatan) wuxuu wariyay inuu Al Suddiyyu\السدي ka wariyay Abii Al Ddaylam\الديلم inuu yiri:

“Calii bin Al Xusayn\علي بن الحسين (waana Zaynu Al Caabidiina\زين العابدين ninka kali ah oo ubadka Al Sh-dhahiidu Al Xusaynu\الشهيد الحسين ka badbaadiyay marka Ahlu Al Baytka **أهل البيت** lagu laayay Karbalaa\كربلاء ee dalka Ciraaq\عراق, waana taabicii, uuna laayay Yaziid bin Mucaawiyah bin Abii Sufyaan bin Xarb bin Umayyah bin Cabdu Shams bin Cabdu Manaaf **يزيد (بن معاوية بن أبي سفيان بن حرب بن أمية بن عبد شمس بن عبد مناف** Allaha u naxariistee wuxuu nin reer Shaam ah ku yiri: “miyaadan ka akhrin Al Axzaab

إِنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ لِيُذْهِبَ عَنْكُمُ الرِّجْسَ أَهْلَ البَيْتِ وَيُطَهِّرَكُمْ تَطْهِيرًا (33)

Wuxuu yiri:

“kuwaasu ma adinkaa?”

Wuxuu yiri:

“haa.”

Wuxuu kaloo bogga kow iyo toddobaatan ku yiri:

“Al Suddiyyu\السدي wuxuu Abii Al Ddaylam\الديلم ka wariyay inuu yiri:

“Marka Calii bin Al Xusayn\علي بن حسين oo qafaal ah (oo xirxiran) la mariyay lana istaajiyay dariiqyada Dimishaq\دمشق ayuu nin reer Shaam\الشام ah wuxuu ku yiri:

“al xamdu li Allaahi\الحمد لله Midka idin laayay, xididdana idiin siibay fitnadana madaxa ka gooyey.”

Markaasuu Calii\علي wuxuu ku yiri:

“Adigu Quraanka ma akhriday?”

Wuxuu yiri:

“haa.”

Wuxuu yiri:

“hadaba ma akhriday Aali Xaa Miim\آل حم?”

Wuxuu yiri:

“Quraanka waa akhriyay kumana arag Aali Xaa Miim\آل حم.”

Wuxuu yiri:

“ma akhriday:

قُلْ لَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا إِلَّا الْمَوَدَّةَ فِي الْقُرْبَى (23)

“Qul laa as’alukum calayhi ajran illaa al mawaddata fii al qurbaa(23)”

Waana Aayadda saddex iyo labaatan ee Suuratu Al Sh-shuuraa\سورة الشورى oo macneheedu yahay:

“waxaad ku tiraahdaa waxaan aan idiinku yeerayo (ahna diinta islaamka) ijaar idiinkama rabo, waxaan ahayn inaad qaraabinnamada naga dhexeysa aad igu ilaalisaan, iguna jeclaataan qaraabadaydana aad jeclaataan oo ilaalisaan(23).”

حديث زيد بن أرقم للبغوي\Xadiithka Zayd bin Arqam\البغوي: Al Baghawii

Al Baghawii\البغوي tafsiiirka Aayaddaan aan soo sheegnay wuxuu yiri:

“Zayd bin Arqam\زيد بن أرقم ayaa waxaa la waydiiyay: “waa kuwee Ahlu Baytku\أهل البيت?” Wuxuu yiri:

“waxaa weeye Calii\علي بن أبي طالب\عقيل (bin Abii Dhaalib\علي\qoyskiisa iyo Caqii\عقيل (bin Abii Dhaalib\علي\qoyskiisa, iyo Jacfar (bin Abii Dhaalib oo ah Calii walaalkiis ay isku hooyo iyo isku aabe yihiin)\جعفر بن أبي طالب\qoyskiisa iyo Cabbaas\العباس reerkiisa.”

Intaasba waa adeerrada iyo ilmo adeerrada Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waana caruurta Haashim bin Cabdu Manaaf\هاشم بن عبد مناف.

الثعلبي\Al Thaclabii

Al Thaclabii\الثعلبي (waana Abuu Isxaaq Axmad bin Muxammad bin Ibraahiim Al Thaclabii ama Al Thacaalibii Al Niisaabuuri\أبو إسحاق أحمد بن محمد بن إبراهيم الثعلبي-الثعلبي النيسابوري, ahaana mid isagoo kale uusan jirin zamankiisa xagga cilmiga tafsiiirka wuxuuna dhintay sanadka hijriga ee afar boqol toddoba iyo labaatan; waana caalinka ay tafsiiirkiisa ka qaateen ibnu Kathiir\ابن كثير, Al Baghawii\البغوي iyo kuwa kaleba) wuxuu yiri:

“waxaa la yiri waa Banuu Haashim\بنو هاشم, taasaa waxayna daliil u tahay in Ahlu Baytka\أهل البيت\loola dan leeyahay Baytka nasabka.

Sidaasuu Al Cabbaasu\العباس iyo adeerradiis iyo ilmo adeerradiis Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam uga wada mid yihiin oo ay Ahlu Baytka\أهل البيت\uga tirsan yihiin.”

Sidaasoo kalena wuxuu ka wariyay Zayd bin Arqam\زيد بن أرقم Allaha raalli ka noqdee.

الرجس\Al Rijsu

Al Maqriizii\المقريزي wuxuu yiri (bogga lix iyo soddon):

“al rijsu\الرجس waa magac ama eray koobaya wixii shar ah oo idil iyo naaqusnimo iyo dambi iyo dhawrsanaan la’aan. Guud ahaan waa shar iyo naaqusnimo. Intaasoo idil waxay soo hoos gelayaan rijsiga guud oo laga qaaday (Ahlu Baytka\أهل البيت).

Marka sidaasaa waxaa u sugnaanaysa inay sawaabta haleelaan oo xagga Ilaahay ka dhawrsan yihiin markay hadlan, marka ficil ku kacaan iyo caqiidadooduba. Waxaa intaas u dheer in ayagoo

uu Ilaahay daahiriyaay uuna daahirintooda masdarkii kusii adkeeye (waa tadh-hiiran\تطهيرا ee Aayadda ku jirta) Isagoo yiri:

وَيُطَهِّرْكُمْ تَطْهِيرًا (33)

oo macneheedu yahay wuxuu idinka daahirayay rijsiga iyo ghayrkiisba daahirin run ah. Taasoo ah daahirintooda guud lagana daahiriyaay wax kasta oo loo baahan yahay in laga daahirsanaado xagga curfiga la isla yaqaanno ama caqliguba sheegayo in laga daahir sanaado, ama shareecaduba ay amrayso in laga daahir sanaado.

Marka dambiga iyo dhawrsanaan la'aantu waxay soo hoos gelayaan waxaas laga daahiriyaay oo sidaasay ku yihiin kuwa ka daahirsan. Taas waxaa ka dhalanaysa inay sawaabta haleelayaan guud ahaan ayna dhawrsan yihiin (waa cismat\عصمة). Waxaana u daliil ah inuu Nabigu Sallaa Allahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

"إني تارك فيكم ما إن تمسكتم به لن تضلوا: كتاب الله وأهل بيته وإنهما لن يفترقا حتى يردا علي الحوض."

“innii taariku fiikum maa in tamassaktum bihi lan tadilluu: Kitaaba Allaahi wa citratii Ahla Baytii wa innahumaa lan yaftariqaa xattaa yaridaa calayya Al Xawda.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Anigu waxaan idiinka tegey labo haddaad ku dheggenaataan aydnaan baadiyoobayn: (Kow) Kitaabka Ilaahay.

(Laba) Caruurtayda Ahlu Baytkayga **أهل البيت**.

Labaadaasu ma kala tegayaan oo way wada jirayaan ilaa ay aniga Xawdkayga **حوضي** (waa maalinta qiyaame) ayagoo wada socda iigu yimaadaan.”

Xadiithkaanu wuxuu daliil ku yahay isagoo Nabigu Sallaa Allahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Quraanka Macsuumka\معصوم ah ku lammaaniyaay oo laazimiyay Ahlu Baytkiisa **أهل البيت**, qofka macsuum laazimana isaguna waa macsuum\معصوم.

Marka hadday sugnaatay inay Ahlu Baytku **أهل البيت** macsuumiin yihiin waxaa waajibaysa inuu ijmaacoodu xujjo u yahay ka dhawrsanaanta dambiyada.

Marka waxaa habboon inuu qof kastoo muslin ah inuu rumeeyo Ilaahay markuu yiri:

إِنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ لِيُذْهِبَ عَنْكُمُ الرِّجْسَ أَهْلَ الْبَيْتِ وَيُطَهِّرَكُمْ تَطْهِيرًا (33)

oo uu markaas rumeeyo in waxa Ahlu Baytku **أهل البيت** ka dhaca oo idil Allaha raalli ka wada noqdee uu Ilaahay ka wada cafiyay.” Waa intaas warkiisu.

Al Maqriizii\المقريزي wuxuu kaloo yiri:

“al istaath Abuu Al Xasan Calii bin Ismaaciil bin Sayyidihi\سیده\ابو الحسن علي بن سیده Allaha u naxariistee wuxuu yiri:

“Al rijsu\الرجس waa waxa xun”.

Ibnu Durayd\إبن دريد wuxuu yiri:

“waa najaasada.”

Al Rijsu\الرجس waana cathaabta sida al rijzu\الرجز oo kale. Rijs\رجس waxaa kaloo la yiraahdaa shaydaanka waswaasintiisa.

Al Imaamu Abuu Jacfar Al Dhabarii\أبو جعفر الطبري wuxuu yiri:

“waa waxa xun iyo al faxshaa’u oo ah waxa fool xun oo dhan (sida zinada oo kale): Ahla Baytka Muxammadow\أهل البيت محمد wuxuuna idinka daahirinaya wasakhda ay leeyihiin kuwa macaasida Ilaahay ku dhex jira wuxuuna idinka daahirinayaa daahirin.”

Wuxuuna silsilad uu isagu leeyahay ku xusay inuu Saciid\سعيد ka wariyay Qataadah\قتادة in hadalka Ilaahay ee “innamaa\إنما” ay yihiin Ahlu Baytka\أهل البيت uuna Ilaahay ka daahiriyay xumaanta uuna raxmaddiisa ayaga ku gooni yeelay.

Ibnu Wahb\وهب waxaa laga wariyay inuu ibnu Zayd\زيد yiri: “al rijsu meeshaan ayada ah waa shaydaanka, inta kasoo hartana waa shirkiga iyo gaalnimada.”

Al Daylamii\الديلمي

Al Daylamii\الديلمي wuxuu wariyay inuu Calii\علي Allaha raalli ka noqdee yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”خير الناس العرب، وخير العرب قريش، وخير قريش بنو هاشم.”

“khayru al nnaasi al carabu, wa khayru al carabi Quryashun, wa khayru Qurayshin Banuu Haashim.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“dadka waxaa ugu khayr badan carabta, carabtana waxaa ugu khayr badan Quraysh\قريش, Qurayshna\قريش waxaa ugu khayr badan Banuu Haashim\بنو هاشم.”

Abuu Bakr Al Ssiddiiqu\أبو بكر الصديق

Al Bukhaarii\البخاري wuxuu wariyay inuu Abuu Bakr Al Ssiddiiqu\أبو بكر الصديق yiri:

”إرقبوا آل محمد في أهل بيته.”

“irqabuu Aala Muxammadin fii Ahli Baytihi”

oo macnihiisu yahay:

“Aali Muxammad\آل محمد u ilaaliya Ahlu Baytkiisa\أهل البيت.”

Abuu Bakr\أبو بكر wuxuu Calii\علي ku yiri:

“wa Allaahi inaan qaraabada Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam xiriiriyo ayaan ka jeclahay inaan aniga qaraabadayda xiriiriyo.”

Ibnu Maajah|ابن ماجة

Abuu Turaab\أبو تراب (Xadiithkaan waxaan kasoo qaadannay kitaabka uu dhigay Abuu Turaab Al Thaahirii\الظاهرى laguna daabacay Daaru Al Qiblah\دار القبلة ee Jiddah\جدة, arliga sucuudiga bisha Ramadan 27 1404 Hijrada/1984. Kitaabku wuxuu ka kooban yahay qabyta hore oo ah kitaab uu ibnu Taymiyah\ابن تيمية dhigay oo la yiraahdo ”Fadlu Ahli Al Bayti wa Xuquuqihim\فضل آل البيت وحقوقهم”.

Qaybaha dambena wuxuu kasoo qaatay kutubbo kale, sida Imaam Axmad\أحمد, Abuu Daaud\داود, iyo kuwo kale oo fara badan) wuxuu wariyay inuu Ibnu Maajah\ابن ماجة ibnu Cumar\ابن عمر: “Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”الحسن والحسين سيدا أهل الجنة وأبوهما خير منهما.”

“Al Xasanu wa Al Xusaynu sayyidaa ahli al jannati wa abuumamaa khayrun minhumaa.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Al Xasanu\الحسن iyo Al Xusaynu\الحسين waa madaxda dadka jannada ku jira, aabohoodna waa ka khayr badan labadoodaba.”

Ibnu Casaakir\ابن عساكر

Abuu Turaab\أبو تراب wuxuu ibnu Casaakir\ابن عساكر ka wariyay inay Calii\علي iyo ibnu Cumar\ابن عمر yiraahdeen:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”إبني هذان الحسن والحسين سيدا شباب أهل الجنة وأبوهما خير منهما.”

“ibnaaya haathaani Al Xasanu\الحسن wa Al Xusaynu\الحسين sayyidaa shabaabi ahli al jannati (waxaa la yiri waa dadka ayagoo dhallinyaro ah dhinta wa Allaahu aclamu) wa buuumamaa khayrun minhumaa.”

macnihiisu waxaa weeye:

“labadaydaan wiil Al Xasanu\الحسن iyo Al Xusaynu\الحسين waa madaxda dhallinyarada ahlu al jannada aabohood ayaana labadoodaba ka khayr badan.”

Al Shiiraazii\الشيرازي

Abuu Turaab\أبو تراب wuxuu bogga boqol kow iyo soddon ku wariyay inay Ummu Salamah\أم سلمة Allaha raalli ka noqdee haweenta Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ay tiri:

“Ilaahay ma aha Midka isugu kiin daraya laba waxyaalood: Nabinnimada iyo khilaafada.” Waxaa wariyay Al Sh-shiiraazii\الشيرازي kuna wariyay “Al Alqaab\الألقاب.”

Wuxuu kaloo wariyay inay Calii\علي iyo Faadhimah\فاطمة iyo Al Xasanu\الحسن iyo Al Xusaynu\الحسين ay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam usoo galeen oo ay markaas khilaafada waydiisteen oo uu markaas sidaasoo kale ku yiri:

"ما كان الله ليجمع فيكم أمرين: النبوة والخلافة."

"maa kaana Allaahu li yajmaca fiikum amrayni: Al Nubuwwata wa al khilaafata"

oo macnihiisu yahay:

"Ilaahay ma aha Midka isugu kiin daray laba waxyaalood: Nabinnimada iyo khilaafada."

waa al imaamu al xaafith al mujawwad Abuu Bakr Axmad ben Cabdu Al الشيرازي\ Al Shiiraazii Rraxmaan ibnu Axmad bin Muxammad bin Muusaa Al Sh-shiiraazii الإمام الحافظ المجود أبو بكر أحمد بن عبد الرحمن ابن أحمد بن محمد بن موسى الشيرازي\ "Al Alqaab الالفاب", ahna midka allifay kitaabka "Wuxuu ku dhashay Hamthaan همدان\ halkaasoo uu ku dhintay sanadka afar boqol iyo toddoba ama afar شيرانا\ Shiiraaz magaalada boqol iyo afar hijriga. Al Xaafith Shiirawayh Al Daylamii الحافظ شيرويه الديلمي\ wuxuu yiri:

"waa thiqqo lagu kalsoon yahay, runlow ah xaafith ah (oo xifthisan in ka badan boqol kun oo Xadiith iyo axaadiithu warinayaba), cilmigaanna aad ayuu ugu fiicnaa."

Warkaan waxaan kasoo qaadannay kitaabka Al Imaamu Al Th-thahabii\الذهبي ee "Siyaru Aclaami Al Nubalaa'i\سير أعلام النبلاء\ i\ mujalladka saddex iyo tobnaad bogga boqol sagaal iyo afartanaad, tirsiga saddex kun toddoba boqol saddex iyo lixdan.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

أهل البيت Deeqaha Ahlu Al Bayti

Kitaabka Ixyaa'u Al Mayti bi Fadaa'ili Ahli Al Bayti ee Al Ssayuudhii
إحياء الميت بفضائل أهل البيت للسيوطي

Kitaabkaan waxaa dhigay Al Imaamu Al Ssayuudhii\الإمام السيوطي (oo dhintay sanadka sagaal boqol kow iyo toban Hijriga). Kitaabkaan oo farta Al Sayuudhii ku dhigan waxaa hubiyay kaddibna daabacay Al Ssayyid Cabbaas Axmad Saqar Al Xusaynii السيد عباس أحمد صقر الحسيني (waana shariif: xasanwali) sanadka kun afar boqol labaatan ee Hijriga waxaana faafisay Daar Al Madiinah Al Munawwarah Lil Nashri wa Al Tawziici\التوزيع والنشر. Dalka sucuudiga iyo dalal kaloo carbeedba ashraafta waxaa la yiraahdaa saadah oo ah jamaca sayyid oo isla macnaha shariif ah. Marka shariifkaan waa Xusayni.

Kitaabkaan waxaan ka kooban yahay lixdan Xadiith, waana kuwaan soo socda.

Xadiithka Koowaad: Saciid bin Mansuur\منصور سعيد بن wuxuu kitaabkiisa “sunanka\السنن” Saciid bin Jubayr\جبير سعيد بن Allaha raalli ka noqdee uga wariyay inuu macnaha Aayadda

قُلْ لَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا إِلَّا الْمَوَدَّةَ فِي الْقُرْبَى (23)

uu yahay:

“waa qaraabada Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.”

Xaddithka Labaad: Ibnu Al Munthir\المنذر ابن iyo ibnu Abii Xaatim\حاتم أبي iyo ibnu Marduwayh ابن مردويه waxay tafaasiirtooda ku wariyeen, Al Dhabraanii\الطبراني uu “Al Mucjimu Al Kabiiru\المعجم الكبير” ku wariyay, ayna ka wada wariyeen ibnu Cabbaas\عباس ابن markay soo degatay Aayadda

قُلْ لَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا إِلَّا الْمَوَدَّةَ فِي الْقُرْبَى (23)

waxay yiraahdeen:

“Rasuulka Ilaahayow Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waa kuwee qaraabadaadaas ay waajib nagu tahay inaan jeclaanno?”

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

“علي وفاطمة وولداهما.”

“Caliyyun wa Faadhimah wa waladaahumaa”

oo macnihiisu yahay:

“waa Cali\علي iyo Faadhimah\فاطمة iyo labadooda wiil.”

Xadiithka saddexaad: Ibnu Abii Xaatim\حاتم\ ابن أبي wuxuu ka wariyay ibnu Cabbaas\ابن عباس\ Allaaha labadoodaba raalli ka noqdee inuu hadalka Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى\

وَمَنْ يَقْتَرِفْ حَسَنَةً نَّزِدْ لَهُ فِيهَا حُسْنًا (23)

“Wa man yaqtarif xasanatan nazid lahu fiihaa xusnan(23).”

ahna Aayadda saddex iyo labaatanaad ee Suuratu Al Shuuraa\سورة الشورى\ oo macneheedu yahay:

أي : من يزد طاعة نزد له فيها حسناً

“waxaa weeye jeceylka Aali Muxammad\آل محمد\ Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam la jeclaado.”

Waxaa wariyay Al Dhabraanii\الطبراني\ (8:21) iyo Al Samhuudii\السمهودي\ kuna wariyay “Jawaahiru Al Caqdayni\جواهر العقدين\ (2:13).

Xadiithka afaraad: Imaam Axmad\أحمد\, Al Tarmathii\الترمذي\ oo saxiix ka dhigay, Al Nasaa’ii\النسائي\ iyo Al Xaakim\الحاكم\ waxay ka wariyeen Al Mudh-dhalib bin Rabiicah\المطلب بن ربيعة\ Allaaha labadoodaba raalli ka noqdee inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”والله لا يدخل قلب إمرأ مسلم إيمان حتى يحبكم الله ولقرايتي.”

“wa Allaahi laa yadkhulu qalba imri’in muslimin iimaanun xattaa yuxibbakum li Allaahi wa li qaraabatii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“wa Allaahi\والله\ inuusan iimaan geleyneyn qalbiga qof muslin ah jeer uu adinka idiin jeclaado Ilaaday daraadiis iyo aniga qaraabannimadayda.”

Xadiithka Shanaad: Muslim\مسلم\, Al Tirmithii\الترمذي\ iyo Al Nasaa’ii\النسائي\ waxay Zayd bin Arqam\زيد بن أرقم\ ka wariyeen inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”أذكركم الله في أهل بيتي.”

“uthakkirikumu Allaaha fii Ahli Baytii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Waxaan idinkala dardaarmayaa Ilaahay daraadiis inaad wanaajisaan qoyskeyga .”

Xadiithka Lixaad. Al Tarmithii\الترمذي wuxuu wariyay Xadiith uu Xasan\حسن ka dhigay, Al Xaakim-na\الحاكم uu isaguna ku wariyay Al Mustadrik\المستدرک ay ka wariyeen Zayd bin Arqam زيد بن الأرقم Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”إني تارك فيكم ما إن امسكتم به لن تضلوا بعدي: كتاب الله، وعترتي أهل بيتي. ولن يتفرقا حتى يردا علي الحوض، فانظروا كيف تخلفون فيهما.“

“Inni taarikun fiikum maa in tamassaktum bihi lan tadilluu bacdii: Kitaaba Allaahi, wa citratii Ahla Baytii. Wa lan yatafarraqaa xattaa yaridaa calayya al xawda. Fa anthuruu kayfa takhlufuuni fiihimaa.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Waxaan idiinka dhex tegayaa wax haddaad ku dhegtaan aydnaan aniga dabaday baadiyoobayn: Kitaabka Ilaahay iyo caruurta, Ahlu Baytkayga, qoyskeyga. Labadoodaasna kala tegi mayaan waxayna iigu wada imaanayaan labadooduba xawdkayga (maalinta qiyaame), eek a fiirsada sidaad labadoodaas iiga dambeyneysaan.”

Xadiithka waxaa kaloo wariyay Al Haythamii\الهيثمي kuna wariyay “Majmacu Al Zawaa’idi مجمع الزوائد” waxaana warintiisaan ka mid ah:

”إني تارك فيكم خليفتين...“

“Inni taarikun fiikum khaliifatayni.”

Oo macnihiisu yahay:

“waxaan idiinka dhex tegayaa laba khaliifo...”

Al Tirmithii\الترمذي wuxuu kaloo kaddib warka ah ”لن تضلوا بعدي“ “Lan tadilluu bacdii Abadan” ku wariyay:

أحدهما أعظم من الآخر: كتاب الله، جبل ممدود من السماء...“

“Axaduhumaa Acthamu mina al aakhar: Kitaabu Allaahu Xablun mamduudun mina Al Ssamaah’....”

Oo macnihiisu yahay:

“oo midkoodba kan kale waa ka wayn yahay: Kitaabka Ilaahay waa xariga kasoo laadlaada Samada....).

Waxaana ku waafaqay Al Thahabii\الذهبي.

Xadiithka Toddobaad. Cabdu bin Xumayd\عبد بن حميد wuxuu “Musnadkiisa” Zayd bin Thaabit زيد بن ثابت uga wariyay Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”إني تارك فيكم ما إن تمسكتم به بعدي لن تضلوا: كتاب الله، وعترتي أهل بيتي. إنهما لن يتفرقا حتى يردا علي الحوض.“

“Innii taarikun fiikum maa in tamassaktum bihi bacdii lan tadilluu: Kitaaba Allaahi, wa citratii Ahla Baytii. Innahumaa lan yatafarraqa xattaa yaridaa calayya al xawda.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Waxaan idiinka tegayaa wax haddaad ku dhegtaan oo raacdaan aniga dabaday aydnaan baadiyoobeen, waana Kitaabka Ilaahay, iyo aniga caruurtayda Ahlu Baytkayga **أهل البيت**. Labadoodaasna kala tegi mayaana ilaa ay aniga iiga yimaadaan oo ay xawdka yimaadaan.”

Xadiithka sideedaad: Axmad\أحمد\ iyo Abuu Yaqlaa\أبو يعلى\ waxay Abuu Saciid Al Khudriyyi\ أبو سعيد الخدري\ Allaha raalli ka noqdee ka wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

“إني أوشك أن أدعى فأجيب، وإني تارك فيكم الثقلين كتاب الله وعترتي أهل بيتي، وإن اللطيف الخبير خبرني أنهما لن يتفرقا حتى يردا علي الحوض، فأنظروا كيف تخلفوني فيهما.”

“innii uushaku an udcaa fa ajiiba, wa innii taarikun fiikum al thaqalayni: Kitaaba Allaahi wa citratii Ahla Baytii, wa inna Al Lladhiifa Al Khabiira khabaranii annahumaa lan yatafarraqa xattaa yaridaa calayya Al Xawda, fa unthuruu kayfa takhlufuunii fiihimaa.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“mar dhow waa la ii yeeri doonaa, oo Ilaahay xaggiisa ayaa la iiga yeerayaa, markaasaan aniguna yeelayaa oo tegayaa. Aniguna waxaan idiinka tegayaa laba culus oo kala ah Kitaabka Ilaahay iyo caruurtayda Ahlu Baytkayga **أهل البيت**. Ilaahayna Al Lladhiifu **اللطيف** Al Khabiiru **الخبير** wuxuu ii sheegay inayan labadoodaas kala tegeyn ilaa ay iiga wada yimaadaan Xawdkayga **حوضي**. Marka ka fiirsada sidaas aniga dabaday labadaas iiga dambeyneysaan oo aad ula dhaqmaysaan.”

Xadiithka sagaalaad: Al Tarmithii\الترمذي\ oo “xasan” ka dhigay iyo Al Dhabraanii\الطبراني\ waxay ibnu Cabbaas\إبن عباس\ labadoodaba Allaha raalli ka noqdee ka wariyeen inuu yiri: “Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

“أحبوا الله لما يغذكم به من نعمه، وأحبوني لحب الله، وأحبوا أهل بيتي لحبي.”

“axibbuu Allaaha limaa yaghtuukum bihi min nicamihi, wa axibbuunii li xubbii Allaahi, wa axibbuu Ahla Baytii li xubbii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ilaahay u jeclaada siduu nicmooyinkiisa idiin siinayo, anigana ii jeclaada jecelkaad Ilaahay u haysaan daraadiis, Ahlu Baytkeygana **أهل البيت** u jeclaada jeceylkaad aniga i jeceshihiin daraadiis.”

Xadiithka Tobanaad. Al Bukhaarii\البخاري wuxuu Abuu Bakr Al Ssiddiiqu\الصدیق أبو بكر الصديق Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

"ارقبوا محمدا صلى الله عليه و سلم في أهل بيته."

"Irqabuu Muxammadan Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam fii Ahli Baytihi."

Xadiithka kow iyo tobnaad: Al Dhabraanii\الطبراني iyo Al Xaakim\الحاكم waxay wariyeen inuu ibnu Cabbaas\ابن عباس Allaha labadoodaba raalli ka noqdee uu yiri:

"Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

"يا بني عبد المطلب، إني سألت الله فيكم ثلاث أن يثبت قلوبكم، وأن يعلم جاهلكم، ويهدي ضالكم، وسألته أن يجعلكم جوداء، نجداء، رحماء. فلو أن رجلا صفن بين الركن والمقام فصلى وصام ثم مات وهو مبغض لأهل بيت محمد دخل النار."

"yaa Bani Cabdu Al Mudh-dhalib! Innii sa'altu Allaaha fiikum thalaathan: an yuthabbita quluubakum, wa an yucallima jaahilakum, wa yahdiya daallakum, wa sa'altuHu an yajcalakum juudaa'a, nujadaa'a, ruxamaa'a. Fa law anna rajulan safana bayna Al Rrukni wa Al Maqaami fa sallaa wa saama thumma maata wa huwa mubghidun li Ahla Bayti Muxammadin dakhala al nnaara."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"caruurta Cabdu Al Mudh-dhalibow\عبد المطلب يا بني عبد المطلب ! Anigu waxaan Ilaahay idiin weydiyay saddex:

(Kow) inuu quluubtiinna xoojiyo oo sugo,

(Laba) inuu midkiinna jaahilka ah uu wax baro,

(Saddex) midkiinna baadiyeysan inuu hanuuniyo. Waxaan kaloo weydiistay inuu idinka dhigo deeqsiyaal, geesiyaal, kuwo naxariis badan. Marka hadduu nini badsado ku tukashada iyo fadhinta inta u dhexeysa Xajaru Al Aswadka\الحجر الأسود iyo Maqaamu Ibraahiim\إبراهيم مقام, uuna salaadaha tukado oo soomo kaddibna uu dhinto isagoo Ahlu Baytka\أهل البيت caruurta Muxammad\آل محمد neceb wuxuu gelayaa naarta."

Xadiithka laba iyo tobnaad: Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu wariyay inuu ibnu Cabbaas\ابن عباس yiri inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

"بغض بني هاشم والانتصار كفر وبغض العرب نفاق."

"bughdu Bani Haashim wa Al Ansaari kufrun wa bughdu Al Carabi nifaaqun."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"neceybka reer Bani Haashin\هاشم بني iyo Ansaartu\الأنصار waa gaalnimo, neceybka carabtuna waa munaafqimo."

Xadiithka Saddex iyo Tobnad: Ibnu Cadiyy\إبن عدي wuxuu kitaabkiisa “Al Iklilu\الإكليل” uga wariyay Abuu Saciid Al Khudriyyi\أبو سعيد الخدري\Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:
“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”من أبغضنا أهل البيت فهو منافق.“

“man abghadanaa Ahla Al Bayti fa huwa munaafiqun.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“qofka na neceb haddaan Ahlu Al Bayti\أهل البيت\qoyskeyga nahay waa munaafaq.”

Xadiithka afar iyo tobnaad: Ibnu Xabbaan\إبن حبان wuxuu “Saxiixiisa” ku wariyay, iyo Al Xaakim\الحاكم ayna ka wariyeen Abuu Saciid Al Khudriyyi\أبو سعيد الخدري\Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”والذي نفسي بيده لا يبغضنا أهل البيت رجل إلا أدخله الله النار.“

“wa Allathii nafsii bi YadiHi la yabghadunaa Ahla Al Bayti rajulun illaa adkhalahu Allaahu al nnaara.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“waxaan ku dhaartay Midka naftaydu Gacantiisa ku jirto ee ninka nacayb noo haya haddaan nahay Ahlu Al Bayti\أهل البيت\qoyskeyga ee waa illaa tuu Ilaahay naarta geliyo.”

Xadiithka shan iyo tobnaad: Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu Al Xasan bin Calii\علي\الحسن بن معاوية بن خديج\معاوية بن خديج\Allaha labadoodaba raalli ka noqdee ka wariyay inuu ku yiri Mucaawiyah bin Khudayj\بن معاوية بن خديج\ “Mucaawiyah bin Khudayjow! Iska ilaali inaad na naacdid oo Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”لا يبغضنا أحد ، لا يحسدنا أحد إلا زيد يوم القيامة عن الحوض بسياط من نار.“

“laa yabghadunaa axadun, la yaxsadunaa axadun illaa thiida yawma al qiyaamati cani Al Xawdi bi siyaadhin min naari.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“ma jiro axad na naca, ma jiro axad na xasda oo noo quuri waaya ee waa illaa midka karbaash dab ah looga dhalaaliyo oo looga fogeeyo Xawdka\الحوض\maalinta qiyaame.”

(Kaas maalintaas Xawdka\الحوض\ ka cabi mayo, waana hoogay oo khasaaray!!!: xasanwali)

Xadiithka Lix iyo tobnaad. Ibnu Cadiyyi\إبن عدي\ iyo Al Bayhaqii\البهقي waxay Calii\علي\Allaha raalli ka noqdee ka wariyeen inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calaihi Wa Sallam wuxuu yiri:

“من لم يعرف حق عترتي والأنصار، فهو لأحدى ثلاث: إما منافق، وإما لزنينة، وإما لغير طهور. ” يعني: حملته أمه على فير طهر.”

“Man lam yacrif xaqqa citratii wa al Ansaari, fa huwa li ixdaa thalaathin: immaa munaafiq, wa immaa li zaniyatini, wa immaa li ghayri dhuhuurin.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Qofkaan aqoonsan xaqqa ay leeyihiin caruurteydu iyo xaqqa ay leeyihiin Ansaartu waa saddex midkood: ama waa munaafaq, ama waxaa dhashay haweeney zinaysata, ama wuxuu calool galay daahir nimo la’aan.”

Qaalli Ciyaad\عياض\القاضي شفاء' wuxuu Al Shifaa' ku yiri:

“Culummada qaarkood waxay yiraahdeen: “waa aqoonsigooda; aqoonsiga makaankay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ku leeyihiin agtiisa; marka markuu qofku taas aqoonsado wuxuu ogaanayaa oo aqoonsanayaa waajibnimada xaqqooda iyo xurmayntooda isaga daraadiis.”

Waxaa kaloo wariyay (9:163 مجمع الزوائد) iyo Al Dhabraanii\الطبراني\ (2251# 3:122 المعجم الأوسط).

Xadiithka toddoba iyo tobnaad: Al Dhabraanii\الطبراني\ wuxuu “Al Awsadh\الأوسط\” ibnu Cumar Allaha labadoodaba raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

“waxa ugu dambeeyey oo uu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ku hadlay waxay ahayd isagoo yiri:

“أخلفوني في أهل بيتي.”

“akhlafuunii fii Ahli Baytii” oo macnihiisu yahay:

“iiga dambeeya oo ka warqaba oo wanaajiya Ahlu Baytkeyga\أهل البيت\.”

Xadiithka sideed iyo tobnaad: Al Dhabraanii\الطبراني\ wuxuu Al Xasanu bin Cali\الحسن بن علي\ Allaha labadoodaba raalli ka noqdee “Al Awsadh\الأوسط\” uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

“ألزموا مودتنا أهل البيت، فإنه من لقي الله وهو يودنا دخل الجنة بشفاعتنا، والذي نفسي بيده لا ينفع عبدا عملا عمله إلا بمعرفة حقتنا.”

“alzimuu mawaddatanaa Ahla Al Bayti, fa innahu man laqiya Allaaha wa huwa yawaddunaa dakhala al jannata bi shafaacatinaa, wa Allathii nafsii bi Yadihi laa yanfacu cabdan camalun camilahu illaa bi macrifati xaqqinaa.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“laazima oo ku taagnaadaa jeceylkeenna Ahlu Al Bayti\أهل البيت\, oo qofka Ilaahay la kulma – kaddib markuu dhinto oo maalinta qiyaame lasoo saaro- isagoo na jecel wuxuu jannada ku

gelayaa annaga shafaacadeenna. Waxaan ku dhaarta Midkay naftaydu gacantiisa ku jirto inuusan addoon (Ilaahay) camal uu falay anfacayn oo wax tarayn inuu xaqeenna aqoonsado mooyee.”
 Qaalli Ciyaad عياض القاضى Allaha u naxariistee wuxuu “Al Shifaa\الشفاء” (2/48) ku yiri: “culummada qaarkood waxay yiraahdeen aqoonsigoodu waxaa weeye aqoonsiga makaankooda ay ku leeyihiin Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Marka hadduu taas u aqoonsado wuxuu ogaanayaa xaqqooda iyo xurmadooda loo geysanayo isaga Sallaa Allaahu calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam daradiis.”

Xadiithka Sagaal iyo Tobnaad. Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu Al Awsadh\الأوسط Jaabir bin Cabdu Allaahi\عبد الله\جابر بن عبد الله uga wariyay Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

“Waxaa noo kudbeeyey Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, markaasaan maqlay isagoo leh:

“أيها الناس، من أبغضنا أهل البيت، حشره الله تعالى يوم القيامة يهوديا.”

“Ayyuhaa al nnaasu, man abghadanaa Ahla Al Bayti, xasharahu Allaahu Tacaalaa yawma al qiyaamati yahuudiyan.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Dadow, qofka na necbaada haddaan Ahly Al Bayti\أهل البيت nahay, Ilaahay wuxuu keenaa maalinta qiyaame isaguu yuhuudi ah.”

Xadiithka labataanaad: Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu “Al Awsadh\الأوسط” Cabdu Allaahi bin Jacfar\جعفر\عبد الله بن جعفر Allaha labadoodaba raalli ka noqdee uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

“يا بني هاشم إني قد سألت الله أن يجعلكم نجداً، رحماً. وسألته أن يهدي ضالكم، ويؤمن خائفكم، ويشبع جانعكم. والذي نفسي بيده لا يؤمن أحد حتى يحبكم بحبي أترجون أن تدخلوا الجنة بشفاعتي ولا برجوها بنو عبد المطلب؟”

“yaa Bani Haashim innii qad sa’altu Allaaha an yajcalakum nujadaa’a, ruxamaa’a. Wa sa’altuHu an yahdiya daallakum, wa yu’ammina khaa’ifakum, wa yushbica jaa’icakum. Wa Allathii nafsii bi yadiHi laa yu’minu axadun xattaa yuxibbakum bi xubbii: a tarjuuna an tadhkuluu al jannata bi shafaacatii wa laa yarjuuhaa Banuu Cabdu Al Mudh-dhalib?”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Reer Bani Haashimow\هاشم\يا بني هاشم, anigu waxaan Ilaahay idiinka baryay inuu idinka dhigo geesiyaal, kuwo naxariis badan. Waxaan kaloo ka baryay inuu kiinna lunsan hanuuniyo, midkiinna cabsidu haysana inuu amni iyo nabadgelyo siiyo, midkiinna gaajoonna uu dherjiyo. Waxaan ku dhaartay Midka nafteydu Gacantiisa ku jirto inuusan axadna mu’min noqonayn (oo uusan iimaan buuxa yeelanayn) jeer uu aniga daraaday idiin jeclaado. (muslimiintuu markaas wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ku leeyahay: xasanwali) “Ma waxaad rajo ka qabtaan inaad shafeecadeyda jannada ku gashaan, ayanna reer Bani Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد المطلب\بنو عبد المطلب ayan taasoo kale rajo ka qabin oo ayan jannada ku gelin?”

Xadiithka kow iyo labaatanaad: Ibnu Abii Shaybah\شيبه\ iyo Musaddid\مسدد\ waxay labadooda “Musnad\مسند\” ka wariyeen, Al Xakiim Al Tarmithiina\الترمذي\ uu “Nawaadiru Al Usuuli\الوادع الاصول\” ku wariyay, Abuu Yaclaa\أبو يعلى\ iyo Al Dhabraanii\الطبراني\ ay dhammaantod Salamah bin Al Akwac\سلمة بن الأكوع\ ka wariyeen inuu yiri: “Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”النجوم أمان لأهل السماء وأهل بيتي أمان لأمتي.”

“Al Nnujuumu amaanun li ahli al samaa’i wa Ahlu Baytii amaanun li ummatii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“xidiguhu waxay amaan u yihiin inta samada deggan (xasanwali: oo hadday xiddiguhu soo hoobtaan samadu way burburaysaa sida dhici doonta maalinta aakhiro oo maalmaha ugu dambeysa sida ku xusan Aayadda labaad ee Suuratu Al Sh-shamsi وَإِذَا النُّجُومُ انْكَدَرَتْ Ahlu Baytkayguna waxay amaan u yihiin ummaddeyda.”

Xadiithka Laba iyo Labaatanaad. Al Bazaar\البيزار\ wuxuu Abuu Hurayrah\هريرة\ ka wariyay Allaha raalli ka noqdee inuu yiri: Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”إني خلفت فيكم اثنين لن تضلوا بعدهما أبدا: كتاب الله، ونسبي. ولن يتفرقا، حتى يرث علي الحوض.”

“Innii khalaftu fiikum ithnayni lan tadilluu bacdahumaa abadan: Kitaaba Allaahi, wa Nasabii. Wa lan yatafarraqaa xattaa yaridaa calayya calaa al xawdi.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Waxaan idiinka dhex tegey aniga dabaday laba aydnaan dabadood ebedkiin baadiyoobayn: Kitaabka Ilaahay iyo Nasbkayga. Labadoodaasna adduunka ku kala tegi mayaa ee waxay iigu wada imaanayaan xadkayga (maalinta qiyaame).”

Xadiithka Saddex iyo Labaatanaad. Al Bazaar\البيزار\ wuxuu Cali\علي\ ka wariyay Allaha raalli ka noqdee inuu yiri: Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”إني مقبوض، وإني تركت فيكم الثقلين: كتاب الله، وأهل بيتي، وإنكم لن تضلوا بعدهما.”

“Innii maqbuudun, wa innii qad taraktu fiikum hgthaqalayni: Kitaaba Allaahi wa Ahla Baytii, wa innakum lan tadilluu bacdahumaa.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Aniga naftaa la iga qaban doonaa, waxaanna dhexdiinna uga tegay labada culus: Kitaabka Ilaahay iyo Ahlu Baytii\أهل البيت\, adinkuna labadoodaas dabadood baadiyoobi maysaan.”

Xadiithka Afar iyo Labatanaad. Al Bazaar\البيزار wuxuu Cabdu Allaahi bin Al Zzubayr عبد الله بن الزبير Allaha labadoodaba raalli ka noqdee ka wariyay inuu Nabigu Sallaa Allahu Calayhi Wa Sallam yiri:

"مثل أهل بيتي؛ مثل سفينة نوح، من ركبها نجا، ومن تركها غرق."

“Mathalu Ahla Baytii mathalu safiinata Nuuxin, man rakibahaa najaa, wa man tarakahaa gharaqa.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Tusaalaha Ahlu Baytkaygu أهل البيت wuxuu la mid yahay tusaalaha doonta Nuux\نوح, oo qofka fuula waa badbaadayaa, kan ka tagana waa maashoonayaa oo dhimanayaa.”

Xadiithka shan iyo labaatanaad: Al Bazaar\البيزار wuxuu ibnu Cabbaas\ابن عباس labadoodaba Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

"مثل أهل بيتي مثل سفينة نوح، من ركبها نجا ومن تركها غرق."

“mithlu Ahlu Baytii mithlu safiinati Nuuxin: man rakibahaa najaa wa man tarakahaa gharaqa.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ahlu Baytkayga أهل البيت waxaa la mid ah doonta Nuux\نوح oo qofkii fuula wuu badbaadayaa qofka ka tagana wuu maashoobayaa oo uu biyaha ku dhimanayaa.”

Xadiithka Lix iyo Labaatanaad. Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu Abuu Tharr\أبو ثر Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

“Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay Sallaa Allahu Calayhi Wa Sallam oo leh:

"مثل أهل بيتي فيكم؛ كمثل سفينة نوح في قوم نوح، من ركبها نجا، ومن تخلف عنها هلك. ومثل حطة بني إسرائيل."

“Mathalu Ahla Baytii fiikum; ka mathali safiinata Nuuxin fii qawmi Nuuxin, man rakibahaa najaa, wa man takhallafa canhaa halaka. Wa lathalu xifh-dhati Bani Israa’iila.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Adinka dhexdiinna wuxuu Ahlu Baytkaygu أهل البيت ka yahay sida tusaalaha doonta Nuux\نوح oo kale, oo qofka fuula waa badbaadayaa, midka ka harana waa maashoonayaa. Waxayna la mid yihiin sida Xidh-dhatu Bani Israa’iil\حطة بني إسرائيل.”

Xadiithka Toddoba iyo Labaatan. Al Dhabraanii wuxuu “Al Awsadhu” Abii Saciid Al Khudriyyi Allaha raalli ka noqdee uga wariyay inuu yiri:

“Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam oo leh:

”إنما مثل أهل بيتي؛ كمثل سفينة نوح، من ركبها نجا، ومن تخلف عنها غرق.“

“Innamaa mathalu Ahla Baytii ka mathali safiinata Nuuxin, man rakibahaa najaa, wa man takhallafa canhaa najaa.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Tusaalaha Ahlu Baytkaygu أهل البيت waa tusaalaha doonta Nuux نوح oo kale, oo qofka fuula wuu badbaadayaa, midka ka harana biyuhuu ku maashoonayaa.”

Xadiithka sideed iyo labaatanaad: ibnu Al Najjaar\إبن النجار wuxuu kitaabkiisa taariikhda Al Xasan bin Cali\الحسن بن علي Labadoodaba Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri: “Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”لكل شيء أساس وأساس الإسلام حب أصحاب رسول الله صلى الله عليه وعلى آله وسلم وحب أهل بيته.“

“li kulli shay’in asaasun wa asaasu al islaami xubbu asxaabi Rasuuli Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wa xubbu Ahli Baytihi.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“wax walba aasaas ayay leeyihiin, aasaaska islaamkuna waa jacaylka asxaabta Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo jecaylka Ahlu Baytkiisa أهل البيت.”

Xadiithka Sagaal iyo Labaatan. Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu ka wariyay Cumar عمر Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”كل بني أنثى فإن عصبتهم لأبيهم، ما خلا ولد فاطمة، فإني عصبتهم، فأنا أبوهم.“

“Kullu Bani Unthaa fa inna casabatuhum li abiihimK maa khalaa walada Faadhimah, fa innii casabatuhum, fa anaa abuuhum.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Cunug kasta oo ay haweeni dhashay waxaa u qabiil ah qabiilka aabihiis, intaan ka ahayn caruurta Faadhimah فاطمة oo anaa qabiilkooda ah, anigaana aabhood ah.”

Xadiithka Soddonaad. Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu ka wariyay Faadhimah Al Zahraa’ فاطمة الزهراء Allaha labadoodaba raalli ka noqdee inay tiri:

”قال رسول الله صلى الله عليه وسلم:
”كل بني آدم ينتمون إلى عصبته، إلا ولدي فاطمة، فأنا وليهما وعصبتهما.”

“Qaala Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam:

“Kullu banii Aadama yantimuuna ilaa casabatihim illaa walady Faadhimah, fa anaa waliyuhumaa wa casabatuhumaa.

Xadiithka macnihiisu waxaa weye:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri::

“Aadan\آدم\ caruurtiisa oo idil waxay ku abtirsadaan qabiilkooda, intaan ka ahayn labada wiil ee Faadhimah\فاطمة\, oo labadooda anigaa waligooda iyo qabiilkoodaba ah.”

Xadiithka Kow iyo soddon. Al Xaakim\الحاكم\ wuxuu ka wariyay Jaabir\جابر\ Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”لكل بني أم عصبية ينتمون إليهم، إلا إبني فاطمة، فأنا وليهما وعصبتهما.”

“Li kulli banii ummin casabatun yantimuuna ilayhim, illaa ibnay Faadhimah, fa anaa waliyuhumaa wa casabatuhumaa.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weye:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri::

“Aadan\آدم\ caruurtiisa oo idil waxay ku abtirsadaan qabiilkooda, intaan ka ahayn labada wiil ee Faadhimah\فاطمة\, oo labadooda anigaa waligooda iyo qabiilkoodaba ah.”

Xadiithka Laba iyo Soddon. Al Dhabraanii\الطبراني\ wuxuu “Al Awsadh\الأوسط\” Jaabir\جابر\ Allaha raalli ka noqdee uga wariyay inuu yiri inuu maqlay Cumar bin Al Khadh-dhaab عمر بن الخطاب Allaha raalli ka noqdee oo dadka ku oranaya markuu guursaday gabadha Cali\علي\ Allaha raalli ka noqdee:

”ألا تهننوني! سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول:

”ينقطع يوم القيامة كل سبب ونسب، إلا سببي ونسبي.”

“A laa tuhanni’uunii! Samietu Rasuula Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yaquulu:

“Yanqadhicu yawma al qiyaamati kullu sababin wa nasabin, illaa sababii wa nasabii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ii hambalyeeya! Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay Sallaa ASllaahu Calayhi Wa Sallam oo leh:
“Waa go’ayaa maalinta qiyaame xarig kasta oo sababtiisa wax lagu heli jiray iyo nasab kasta, intaan ka ahayn aniga xarigayga iyo nasabkeyga.”

Xadiithka Saddex iyo Soddon. Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu Ibnu Cabbaas\ابن عباس ka wariyay Allaha labadoodaba raalli ka noqdee inuu yiri:
Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

"كل سبب ونسب منقطع يوم القيامة، إلا سببي ونسبي."

"Kullu sababin wa nasabin munqadhicun yawma al qiyaamati illaa sababii wa nasabii."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Xarig kasta iyo nasab kasta oo wax la isugu ahaa waa go'ayaa maalinta qiyaame intaan ka ahayn aniga xarigayga iyo nasabkayga: qofka adduunkaan xarig ila lahaa amanasab maalinta qiyaamana sidaasuu iila lahaanayaa."

Xadiithka Afar iyo Soddon. Ibnu Casaakir\ابن عساكر wuxuu kitaabkiisa "Taariikhda" uga wariyay ibnu Cumar\ابن عمر Labadoodaba Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:
"Rasuula Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

"كل نسب وصهر منقطع يو القيامة، إلا نسبي وصهري."

"Kullu nasabin wa sihrin munqadhicun yawma al qiyaamati illaa nasabii wa sihrii."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Nasab kasta iyo xarig kasta waa go'ayaa maalinta qiyaame, intaan ka ahayn aniga nasabkayga iyo xididnimadayda."

Xadiithka Shan iyo Soddon. Al Xaakim\الحاكم wuxuu ibnu Cabbaas\ابن عباس ka wariyay labadoodaba Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

"النجوم أمان لأهل الأرض من الغرق، وأهل بيتي أمان لأمتي من الإختلاف، فإذا خالفتها قبيلة من العرب اختلفوا، فصاروا حزب إبليس."

"Al nujuumu amaanun li ahli al ardi kina al gharqi, wa Ahlu Baytii amaanun li ummatii mina al ikhtilaafi, fa ithaa khaalafathaa qabiilatun mina al carabi ikhtalafuu, fa saaruu xizba ibliisa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Xiddiguhu waxay badbaado uga yihiin dadka arliga deggan inay biyo mu maashoodaan, Ahlu Baytkayguna أهل البيت waxay ummaddeyda badbaadu uga yihiin inay is khilaafaan. Hadday marka qabiilu carabta ka mid ihi ayaga khilaafto, way is khilaafayaan, markaasay waxay noqonayaa xizbiga ibliis."

Xadiithka Lix iyo Soddon. Al Xaakim\الحاكم wuxuu ka wariyay Anas\أنس Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”وعدني ربي في أهل بيتي؛ من أقر منهم بالتوحيد، ولي بالبلاغ، أنه لا يعذبهم.“

“Wacadanii Rabbii fii Ahla Baytii; man aqarra minhum bi Al Tawxiidi, waliya bi al balaaghi, annahu laa yucath-thibuhum.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Rabbigay wuxuu ii ballan qaaday Ahlu Baytkayga **أهل البيت**: kooda tawxiidka qira, una hoggaansama inuusan cathaabayn.”

Xadiithka Toddoba iyo Soddoon: Ibnu Jariir\ **ابن جرير** wuxuu tafsiirkiisa ku wariyay inuu ibnu Cabbaas\ **ابن عباس** Allaha labadoodaba raalli ka noqdee uu Aayadda

وَلَسَوْفَ يُعْطِيكَ رَبُّكَ فَتَرْضَى (5)

"Wa la sawfa yucdhiika Rabbuka fa tardaa(5)",

oo macneheedu yahay:

"Rabbigaana wuu ku siin doonaa, adiguna (waxaas lagu siiyay oo wanaagsan) raalli ayaad ku noqon doontaa(5)."

ka yiri: "

raallinnimada Muxammad **محمد** Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waxaa ka mid ah inuusan axad Ahlu Baytkiisa **أهل بيته** ka mid ah uusan naarta gelin.”

Xadiithka sideed iyo soddoon: Al Bazaar\ **البيزار**, Abuu Yaclaa\ **أبو يعلى**, Al Cuqaylii\ **العقيلي**, Al Dhabraanii\ **الطبراني** iyo ibnu Shaahiin\ **ابن شاهين** waxay dhammaantood ka wariyeen ibnu Mascuud **ابن مسعود** Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

"Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”إن فاطمة أحصنت فرجها فحرم الله ذريتها على النار.“

“inna Faadhimah axsanat farjahaa fa xarrama Allaahu thurriyitihaa calaa al nnaari.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Faadumo **فاطمة** waxay dhawrtay farjigeeda markaasuu Ilaahay ubadkeeda naarta ka xaaraantimeeye.”

Xadiithka sagaal iyo soddoon: Al Dhabraanii\ **الطبراني** wuxuu ibnu Cabbaas\ **ابن عباس** Allaha labadoodaba raalli ka noqdee ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Faadhimah **فاطمة** ku yiri Allaha raalli ka noqdee:

" إن الله غير معذبك ولا ولدك."

"inna Allaaha ghayra mucath-thibiki wa laa waladiki."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay ku cathaabi mayo, caruurtaadana cathaabi mayo."

Xadiithka Afartan. Al Tirmithii\الترمذي wuxuu ka wariyay Jaabir\جابر Allaha raalli ka noqdee, uuna xadiith xasan ah ka dhigay inuu yiri:

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

"يا أيها الناس، إني تركت فيكم ما إن أخذتم به لن تضلوا: كتاب الله وعترتي."

"Yaa ayyuhaa al nnaasu, inni taraku fiikum maa in tamassaktum bihi lan tadilluu: Kitaaba Allaahi wa citratii."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Dadow, waxaan idiinka tegay wax haddaad qaadataan oo ku raacdaan aydnaan lumayn, ahna Kitaabka Ilaahay iyo aniga caruurtayda."

Xadiithka Kow iyo afartan: Al Khadhiibu\الخطيب wuxuu kitaabkiisa Taariikhda Calii\علي Allaha raalli ka noqdee uga wariyay inuu yiri:

"Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

"شفاعتي لأمتي من أحب أهل بيتي."

"shafaacatii li ummatii man axabba Ahla Baytii."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"ummaddayda waxaa shafaacadayda helaya kuwa Ahla Baytkayga jecel."

Xadiithka Laba iyo Afartan. Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu ka wariyay ibnu Cumar\إبن عمر Allaha labadoodaba raalli ka noqdee inuu yiri:

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

"أول من أشفع له من أمتي، أهل بيتي."

"Awwalu man ashfacu lahu min ummatii, Ahlu Baytii."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Cidda ugu horreysa oo aan u shafeeco qaadayo oo ummaddayda ka mid ah waa Ahly Baytkayga أهل البيت."

Xadiithka Saddex iyo Afartan. Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu ka wariyay Al Mudh-dhalib bin Cabdu Allaahi bin Xandhab\عبد الله بن حنطب inuu aabihiis yiri:

“Waxaa noogu kudbeeyey Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam annago Al Juxfah (tuulada la yiraahdo) wuxuuna yiri:

“ألمت أولى بكم من أنفسكم؟” قالوا: “بلى يا رسول الله”، قال: “فإني سائلكم عن اثنين؛ عن القرآن، وعترتي.”

Alastu awlaa bikum min anfusikum?” Qaalu: “Balaa yaa Rasuula Allaahi.” Qaala: “Fa inni saa’ilukum can ithnayni; cani Al Quraani, wa citratii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Soo anigu nafatiiinna idiinkama xaq badnin?” Waxa yiraahdeen: “Haa Rasuulka Ilaahayow.” Wuxuu yiri: “Waxaan idinka weydiinaya laba: Quraanka iyo caruurta.”

Xadiithka afar iyo afartanaad: Al Dhabraanii\الطبراني wuxuu ibnu Cabbaas\ابن عباس Allaha labadoodaba raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

“لاتزول قدما عبد حتى يسأل عن أربع عن عمره فيما أفناه، وعن جسده فيما أبلاه، وعن ماله فيما أنفقه ومن أين إكتسبه، وعن محبتنا أهل البيت.”

“laa tazuulu qadamaa cabdin xattaa yus’ala can arbacin: can cumurihi fiimaa afnaahu, wa can jasadhi fiimaa ablaahu, wa can maalihi fiimaa anfaqahu wa min ayna iktasabahu, wa can maxabbatinaa Ahla Al Bayti.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“labada cagood ee addoonku ka dhaqaaqi mayaana bartaas maalinta qiyaami jeer afar laga weydiiyo:

(Kow) cumrigiisa wuxuu ku qabtay oo geliyay oo uu ku dhammeeyey,

(Laba) jirkiisa wuxuu ku qabtay oo ku falay,

(Saddex) maalkiisa meeshuu ku bixiyay iyo siduu ku kasbayba, (Afar) annaga jeceylkeenna haddaan Ahlu Baytka nahay.”

Xadiithka Shan iyo Afartan. Al Daylamii\الديلمي wuxuu Cali\علي Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

“سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول:
“أول من يرد علي الحوض، أهل بيتي.”

“Samictu Rasuula Allaahu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yaquulu:

“Awwalu man yaridu calayya al xawda Ahlu Baytii.

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Cidda ugu horreysa oo xawdka kasoo waraabaysa waa Ahlu Baytkayga أهل البيت.”

Xadiithka lix iyo afartanaad: Al Daylamii\الديلمي wuxuu Cali\علي Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri

”أدبوا أولادكم علي ثلاث خصال حب نبيكم وحب أهل بيته وقراءة القرآن فإن حملة القرآن في ظل الله يوم لا ظل إلا ظله مع الأنبياء وأصفيائه.”

“adabuu awlaadakum calaa thalaathi khisaalin: xubbu Nabiyyikum wa xubbi Ahlu Baytihi wa calaa qiraa’ati Al Qura’aani fa inna xamalata Al Qura’aani fii Thilli Allaahi yawma laa thilla illaa thillahu maca Anbiyaa’ihi wa asfiyaa’iHi.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“caruurtiinna waxaad ku edbisaan oo ku korisaan saddex wax yaalood oo kala ah:

(Kow) jeceylka Nabigiinna iyo

(Laba) jeceylka Ahlu Baytkiisa\أهل البيت iyo

(Saddex) xifdinta Quraanka maxaa yeelay kuwa Quraanka xifdisan waxay ku sugan yihiin harka (Carshiga: xasanwali) Ilaahay maalin uusan hoos jirin Harkiisa mooyee wuxuuna la jooga Anbiyada iyo kuwuu Ilaahay doortay.”

Xadiithka toddoba iyo afartanaad: Al Daylamii\الديلمي wuxuu Cali\علي Allaha raalli ka noqdee ka wariyey inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”أثبتكم على الصراط أشدكم حبا لأهل بيتي وأصحابي.”

“athbutukum calaa Al Ssiraadhi ashaddukum xubban li Ahli Baytii wa asxaabii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“midkiinna idiinku sugnaan badan Siraadka korkiisa iyo marka la marayo (oo jahannamada ka hooseysa ku dhacayn oo siraadku jahannama korkeeduu maraa: xasanwali) waa kiinna ugu jeceyl badan Ahlu Baytkayga\أهل البيت iyo asxaabtayda.”

Xadiithka sideed iyo afartanaad: Al Daylamii\الديلمي wuxuu ka wariyay Cali\علي Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”أربعة أنا لهم شفيع يوم القيامة المكرم لذريتي والقاض لهم حوائجهم والساعي لهم أمورهم عند ما اضطروا والمحب لهم بقلبه ولسانه.”

“arbacatun anaa lahum shafiicun yawma al qiyaamati: al mukrimu li thurriyatii wa al qaadii lahum xawaa’ijuhum wa al saacii lahum umuurahum cinda maa id-dharruu wa al muxibbu lahum bi qalbihi wa lisaanihi.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

Afar anigaa u shafeeco qaadaya maalinta qiyaame:

(kow) midka caruurteyda karaameeya iyo

(Laba) midka danohooda u fuliya iyo

(Saddex) kuwa u kaca oo u quma umuurtooda markay lagama maarmaan u noqoto iyo

(Afar) midka qalbigiisa iyo carrabkiisaba ka jecel.”

Xadiithka sagaal iyo afartanaad: Al Daylamii\الديلمي wuxuu Abuu Saciid\أبو سعيد\ Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”إشتد غضب الله على من آذاني في عترتي.”

“**ishtadda ghadabu Allaahi calaa man aathanii fii citratii.**”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ilaahay aad ayuu ugu carooday midka aniga caruurtayda igu dhiba, oo intuu caruurtayda dhibo aan anigu sidaas ugu dhibtoodo.”

Xadiithka kontonaad: Al Daylamii\الديلمي wuxuu Abuu Hurayrah\أبو هريرة\ Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”إن الله يبغض الآكل فوق شبعه، والغافل عن طاعة ربه، والتارك لسنة نبيه، والمخفر ذمته، والمبغض عتره نبيه، والمؤذي جيرانه.”

“**inna Allaha yubghidu al aakila fawqa shabicihi, wa al ghaafilu can dhaacata Rabbihi, wa al ttaariku li sunnati Nabiiyihi, wa al mukhfiru thimmatahu, wa al mubghida citrata Nabiiyihi, wa al mu’thii jiiranihi.**”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ilaahay wuu neceb yahay:

(Kow) midka cuna in ka badan intuu ku dhergo, iyo

(Laba) midka moog adeecidda Rabbigiis, iyo

(Saddex) midka ka taga sunnada Nabigiisa, iyo

(Afar) midka heshiiskiisa buriya oo khayaana, iyo

(Shan) midka caruurta Nabigiisa neceb, iyo

(Lix) midka dariskiisa dhiba.”

Xadiithka kow iyo kontonaad: Al Daylamii\الديلمي wuxuu Abii Saciid\أبو سعيد\ (Al Khudriyyi (الخدري) ka wariyay inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”أهل بيتي والآنصار كرشى وعيبتى وصحابى، وموضع مسرتى، وأمانتى، فأقبلوا من محسنهم وتجاوزوا عن مسيئتهم.”

“**Ahlu Baytii wa Al Ansaara kirashii wa caybatii wa sixaabiyya, wa mawdica masarratii wa amaantii, fa aqbaluu min muxsinihim wa tajaawazuu can musii’ihim.**”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ahlu Baytkayga **أهل البيت** iyo Ansaartu waa kuwa dadka iigu dhow oo sirtaydana weeleeya oo haya iyo amaanadaydaba iyo kuwa aan umuurtayda ku halleeyo oo u kaca. Marka kooda suubanna aqbala oo yeela, kooda qaldana cafiya oo dhaafa.”

Xadiithka Laba iyo konton. Abuu Nucaym أبو نعيم wuxuu Cuthmaan bin Caffaan\عثمان بن عفان Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:
“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”من أولى رجلا من بني عبد المطلب معروفا في الدنيا، فلم يقدر المطلبي على مكافأته، فأنا أكافئه عنه يوم القيامة.”

“Man awlaa rajulan min Banii Cabdu Al Mudh-dhalib macruufan fii al dunyaa, falam yaqdir Al Mudh-dhalibiyyu calaa mukaafa’atihi, fa anaa ukaafi’uhu canhu yawma al qiyaamati.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Qofka abaal ugu gala axad ka mid ah caruurta Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد المطلب adduunkaan, oo uu ruuxaas reer Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد المطلب u dhashay uu abaalkiisaas u gudi waayo, aniga uga gudaya maalinta qiyaame.”

Xadiithka Saddex iyo kontonaad. Al Khadhiibu\الخطيب wuxuu ka wariyay Cuthmaan bin Caffaan\عثمان بن عفان Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:
Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”من صنع صنعة إلى أحد ممن خلف عبد المطلب في الدنيا، فعلي مكافأته إذا لقيني.”

“Man sanaca saniicatan ilaa axadin min khalafi Cabdu Al Mudh-dhalib fii al dunyaa, fa calayya mukaafa’atuhu ithaa laqiinii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Qofka wax tara axad ka mid ah ubadka Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد المطلب adduunkaan, anigay korkeyga tahay inaan uga abaal gudo, markuu ila kulmo.”

Xadiithka Afar iyo konton. Ibnu Casaakir\ابن عساكر wuxuu ka wariyay Calii Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:
Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”من صنع إلى أحد من أهل بيتي يدا، كافأته يوم القيامة.”

“Man sanaca ilaa axadin min Ahla Baytii yadan, kaa-fa’atuhu yawma al qiyaamati.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Qofka axad Ahly Baytkayga **أهل البيت** ka mid ah gacan u geysta anigaa u gudaya maalinta qiyaame.”

Xadiithka Shan iyo konton. Al Baaruudii\البارودي wuxuu Abii Saciid\إبي سعيد\ Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:
Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

"إني تارك فيكم ما إن تمسكتم به لن تضلوا: كتاب الله، سبب طرفه بيد الله، وطرفه بأيديكم، وعترتي أهل بيتي، وإنهما لن يتفرقا، حتى يرثا علي الحوض."

"Inni taarikun fiikum maa in tamassaktum bihi lan tadilluu: Kitaaba Allaahi, sababun Dharfuhu bi Yadi Allaahi, wa dharfuhu bi aydiikum, wa citratii Ahla Baytii, wa innahumaa lan yatafarraqaa, xattaa yaridaa calayya al xawda."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Anigu waxaan idiinka tegayaa wax haddaad ku dhegtaan oo raacdaan aydnaan lumayn, waana Kitaabka Ilaahay oo ah Xarig ay darftiisu ku jirto Gacanta Ilaahay, darafta kalena adinka gacnihiinna, iyo caruurtayda Ahlu Baytkayga\أهل البيت\ Labadoodaas kala tegi mayaana, waxayna iigu wada imaanayaan xawdka\الحوض\."

Xadiithka Lix iyo Konton. Axmad\أحمد\ iyo Al Dhabraanii\الطبراني\ waxay Zayd bin Thaabit زيد بن ثابت Allaha raalli ka noqdee ka wariyeen inuu yiri:

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

"إني تارك فيكم خليفتين: كتاب الله، حبل ممدود ما بين السماء والأرض، و عترتي أهل بيتي، وإنهما لن يتفرقا، حتى يرثا علي الحوض."

"Inni taarikunn fiikum khaliifatayni: Kitaaba Allaahi, xablun mamduudun la bayna Al Samaa'i wa al ardi, wa citratii Ahla Baytii, wa innahumaa lan yatafarraqaa, xattaa yaridaa calayya al xawda."

Xadiithka macnihiisu waxaa weey:

"Anigu waxaan idiinka tegay laba khaliifo (oo hawshayda iyo hanuuninta meesheeda kasii wada aniga dabay oo sharciga Ilaahay dhaqan geliya): Kitaabka Ilaahay, oo ah xarig isku xira Samada iyo arliga, iyo caruurtayda Ahlu Baytkayga\أهل البيت\ Labadoodaasna kala tegi mayaana, waxayna iigu wada imaanayaan xawdka\الحوض\."

Xadiithka toddoba iyo kontonaad: Al Tarmithii\الترمذي\ iyo Al Xaakim\الحاكم\ iyo Al Bayhaqii\البيهقي\ ("Shicbu Al iimaan\شعب الإيمان\") waxay ka wada wariyeen Caa'ishah\عائشة\ Allaha ayada iyo aabeheedba raalli ka noqdee inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

"ستت لعنهم الله وكل نبي مجاب الزائد في كتاب الله والمكذب بقدر الله والمستلظ بالجبروت فيعز من أذل الله ويذل من أعز الله والمستحل لحرم الله والمستحل من عترتي ما حرم الله والتارك لسنتي."

"sittatun lacanahumu Allaahu wa kullu Nabiyyin mujaabun: al zaa'idu fii Kitaabi Allaahi wa al muk-thibu bi Qadri Allaahi wa al mustalidhu bi al jabruuti fa yucizzu man athalla"

Allaahu wa yuthillu man acazza Allaahu wa al mustaxillu li xurami Allaahi, wa al mustaxillu min citratii maa xarrama Allaahu wa al taariku li sunnatii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Lix qofka Ilaahay ayaa lacnaday iyo Nabi kasta oo ducadiisa la aqbalo:

(Kow) midka Kitaabka Ilaahay wax ku kordhiya oo Quraan aan Ilaahay soo dejin ku dara

(Laba) ninka Qadarka Ilaahay beeniya, iyo

(Saddex) ninka jabbaar daacadda Ilaahay ka baxa noqda oo markaas kor usoo qaada oo cizzi siiyay kuwuu Ilaahay dulleeyey, dulleeyana oo hoos u dhiga kuwuu Ilaahay kor yeelay oo cizzi siiyay, iyo


(Afar) midka xalaalaysta wuxuu Ilaahay xaaraantimeeyey, iyo

(Shan) kuwa caruurtayda u xalaalaysta wuxuu Ilaahay xaaraan ka dhigay iyo

(Lix) midka sunnadayda ka taga.”

(waagaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Somaaliya ka shaqayn jiray markuu sanadku ahaa kun sagaal boqol sideed iyo sagaashan waxaan Agaasime Guud ka ahaa Waaxda arrimaha siyaasadda ee dawladaha Asiya iyo Dawladaha Hantiwadaagga ah. Dibloomaasiyiinta shisheeye oo aan la kulmi jiray waxaa ka mid aha Sii-Hayaha Safaaradda Jamhuuriyda Islaamka ah ee Liraan, ayadoo uusan markaas Danjire u joogin. Wax badan ayaan ninkaas, oo laftiisu shiico ahaa, la kulmay aanna shiicada ka wareystay, waxyaaluhuu ii sheegay waxaa ka mid ahaa inuu yiri: “shiicadu waxay leedahay Kitaab Quraan oo kiinna ka duwan. Kitaabka aad haysataan waxaan u naqaanna “Musxafu Xafsah\مصحف حفصة” ahna “Kitaabka Quraan ee Xafsah” (Xafsana حفصة waxay ahayd hooyada mu’miniinta hawenta Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waxaana dhalay Amiiru Al Mu’miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab\خطاب أمير المؤمنين عمر بن الخطاب Allaha labadoodaba raalli ka noqdee). Annaguna kitaabka aan haysanno waxaa la yiraahdaa “Musxafu Faadhimah\مصحف فاطمة” ahna “Kitaabka Quraan ee Faadhimah\فاطمة” wuxuuna kiinna dheer yahay kun Aayadood oo aan kiinna ku jirin. Quraankaas masjidyaada lama keeno oo waxaa haysta culumadeenna oo keli ah, masjidyaadana waxaa yaalla Quraanka aad adinku haysataan oo kale, si khilaaf aan loo abuurin.” Wuxuuna dibloomaasigaas ii keenay kutubbo uu Quraanka zaa’idka ahi qaarkiis ku dhigan yahay oo ay ayagu gacnohooda ku dhigteen kaddibna ay yiraahdeen waa Quraan. Hadda waxaan haya kitaabka uu allifay Al Aluusii\الأوسي oo la yiraahdo “Tuxfato Al Ithnaa Cashariya تحفة الإثنى عشرية\عشرية” ayna boggisa kow iyo soddon ku dhigan tahay Suurad aan Quraanka ku jirin oo la yiraahdo “Suuratu Al Walaayah Sabca aayaatin\سورة الولاية سبع يات” oranaysana inuu Calii Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dabadiis uu isagu khaliifo yahay!! Naskeeduna waa tanaa:

yahay!! Naskeeduna waa kanaa:



Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Yaa ayyuhaa allathiina aamanuu bi Al Nnabiyyi wa bi al waliyyi allathayni bacathnaahumaa yahdiyaanikum ilaa siraadhin mustaqiimin(1)Nabiyyun wa waliyyun bacduhumaa min bacdin wa anaa Al Caliimu Al Khabiiiru(2)Inna allathiina yuufuuna bi cahdi Allaahi lahum jannaatu al nnaciimi(3)Wa allathiina ithaa tuliyat calayhim aayaatunaa kaanuu bi aayaatinaa kukath-thibiina(4)Inna lahum fii jahannma maqaaman cathiiman ithaa

nuudiya lahum yawma al qiyaamati ayna al th-thaalimuuna al mukath-thibuuna lil mursdaliina(5)Maa khalaqahumu al mursaliina illaa bi al xaqqi wa maa kaana Allaahu li yuth-hirahum ilaa ajal in qariibin(6)Wa sabbix bi xamdi Rabbika wa calaa al shaahidayni(7).”

Xadiithka sideed iyo kontonaad: Abu Nucaym\أبو نعيم\ wuxuu ka wariyay Cuthmaan bin Caffaan\عثمان بن عفان\ Allaha raalli ka noqdee inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”من تولى رجلا من بني عبد المطلب معروفا في الدنيا فلم يقدر المطلبي على مكافئته فأنا أكافؤه عنه يوم القيامة.”

“man tawallaa rajulan min Banii Cabdu Al Mudh-dhalib macruufan fii al dduunyaa fa lam yaqdir Al Mudh-dhalibiyu calaa mukaafa’atihi fa anaa ukaafi’uhu canhu yawma al qiyaamati.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“qofka abaal u gala nin ka mid ah caruurta Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد المطلب\ adduunkaan, ninka reer Al Mudh-dhalib\المطلب\ ahna uu kari waayo inuu u abaal gudo, anigaa u abaal gudaya maalinta qiyaame.”

Xadiithka sagaal iyo kontonaad: al Xaakim\الحاكم\ wuxuu kitaabkiisa taariikhda ku wariyay, Al Daylamii\الديلمي\ uu isaguna wariyay inuu Abii Saciid (Al Khudriyyi)\الخدري\ Allaha raalli ka noqdee yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

”ثلاث من حفظهن حفظ الله له دينه وديناه ومن ضيعهن لم يحفظ الله له شيء حرمت الإسلام وحرمتي وحرمة رحمي.”

“thalaathun man xafithahunna xafatha Allaahu lahu diinahu wa dunyaahu wa man dayyacahunna lam yaxfathi Allaahu lahu shay’an: xurmatu al islaami wa xurmatii wa xurmatu raximii.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“saddex qofka dhawra Ilaahay wuxuu u dhawraa diintiisa iyo adduunkiisaba, qofka lumiyana Ilaahay waxba uma dhawro: (Kow) xurmada islaamka iyo (Laba) aniga xurmadayda iyo (Saddex) xurmada raximkayga, waa qaraabadaydee.”

Xadiithka Lixdanaad. Al Daylamii\الديلمي\ wuxuu Cali\علي\ Allaha raalli ka noqdee ka wariyay inuu yiri:

“Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

”خير الناس العرب، وخير العرب قريش، وخير قريش بنو هاشم.”

“Khayru al nnaasi al carabu, wa khayru al acarabi qurayshun wa khayru qurayshin Banuu Haashim.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Dadka waxaa ugu khayr badan Carabta\العرب, carabtana waxaa ugu khayr badan Quraysh\قریش , Qurayshna waxaa ugu khayr badan Bani Haashim\بنی هاشم.”

Sidaasuu kitaabkaan noogu dhammaaday waxaanna ku gunaanadaynnaa annago leh:

Al Xamdu li Allaahi Rabbi Al Caalamiina Wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin wa Calaa Aalihi Al Dhayyibiina Al Dhaahiriina wa Sallam tasliiman kathiiran kullamaa thakarahu al thaaliruuna wa ghafala can thikrihi al ghaafiluuna/

الحمد لله رب العالمين، والثناء لله صلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون، أما بعد

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanwali wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Sddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen. Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmada dalbeen gaashaanbuurtoda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaano hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmada ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmada ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho, Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawladda Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladaha Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High School ee Boston, Baare Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyaada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi

badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh.